# waaga cusub

Maajo 1976 — Sannadkii 4aad — L. 33 wargeys bil walba soo baxa waxaana soo saara W.W. iyo Hanuuninta Ummadda JDS.

# DABBAALDEGGA 1 DA MAAJO



# 15KA MAAJO

1943




# MAALINTII DHALLINYARADA

# FAALLO AYAAMO XUS

## 1da MAAJO WAA MAALINTII SHAQAALAHA ADDUUNKA

J.D.S. Waxaa soo maray bishii Maajo ayaamo taariikh leh, oo si xiisa leh dalka oo dhan looga dabbaaldegay; iyadoo la tixgelinayo qiimaha ay leeyihiin maalmahaas, ama weynaanta ay ku leeyihiin Kacaanka. Iyagoo kala ah:- 1da Maajo 15 Maajo, 25ka Maajo.

1da Maajo waa maalin si wacan adduunka oo dhan looga xusay; taariikhda ay ku leedahay xoogsatada horusocodka adduunweynaha oo dhan darteed, gaar ahaan, kuwa loollanka kula jira hantigoosadka cadaadinaya, iyagoo ku dadaalaya in ay ka soo dhacsadaan xuquuqdooda laga boobay.

Maalintaas astaanta ku ah maalintii shaqaalaha adduunweynaha ha ahaadeen kuwa ku nool dalalka hantiwadaagga ah ama kuwa hantigoosadka ah, Soomaaliyada Kacaanka ahina waxey ku dadaashay intii suura gal ah in ay ku xusto maalintaa si u qalanta; iyadoo daryeelaysa xuquuqda shaqaalaheeda ilaa intii Kacaanku curtay. Waana hubaal in sannad walba guulaha la gaaray ay sii kordhi doonaan.

Sidaa oo kale ayaa loogu dabbaaldegay 15ka Maajo taasoo ah maalin taariikh ku leh nolosha Ummadda Soomaaliyeed, waxeyna tahay maalintaa weyni: mid ka mudan in lagu qoro bog dahab ah oo tixgelin iyo xurmo ka istaahisha, maxaa yeelay waxey ka gashay taariikhda dalka meel aad iyo aad u weyn, haddii, laga eego bilawgii dhaqdhaqaaqyadii xisbiyada gobannimo doonka Soomaaliyeed gaar ahaan dhinaca konfur (1943) taasoo ay bilaabeen, 13 halyey oo naftood hurayaal ah asaaskana u dhigay tiirarkii midnimada iyo gobannimada Shacbiga Soomaaliyeed.

# IYO XURMO MUDAN

## 15ka MAAJO MAALINTII DHALLINYARADA SOOMAALIYEED

Bisha Maajo waxay kaloo qaaya weyn u leedahay qaaradda Afrika oo idil maxaa yeelay 25 Maajo 1963; waxaa dawladaha Afrika oo madaxbannaani asaaseen Ururka Midowga Afrika si ay u mideeyaan halganka dadyowga Afrika kula jiraan gumeysiga, midabtakoorka iyo dib u dhaca ka kooban sabboolnimada, jihliga iyo cudurka oo ah raad gumeysigu ku reebay dalalka Afrika oo dhan; waxaa kaloo ka mid ah ujeeddooyinka loo asaasay Ururka Midowga Afrika in la xoojiyo Iskaashiga Xagga dhaqaalaha siyaasadda, Hiddaha iyo ganacsiga ka dhexeeya dawladaha Afrika iyo in dhidibada loo adkeeyo gobanimadooda taasoo ah in ay gaaraan dadyowga Afrika gobannima run ah oo aan ku ekayn xagga siyaasadda keli ah gobannimo dhaqaale, gobannima Bulshadeed ka maran dhiigmiirad isku dulnoolaadka imbiriyaaliyada Caalamiga ah hantigoosiga iyo dib u socodka guduhu kuhayaan dadyowga dunida saddexaad iyo midab takoorka foosha xun.

Aasaaskii Ururka midowga Afrika kaddib waxeye gaareen dad-yowga Afrika Guulo waaweyn-Badiba dalalka Afrika wey ka baxeen gumeysigii siyaasiga ahaa waxaana ka curtay dalalka Afrika qaarkood Kacaanno hor u socod ah ee hantiwadaag ah oo tusaale fiican uu yahay Kacaankeenna Barakaysani.

Waxaa nasiib wanaag ah in ay dalalka Afrika ka wada xoroobeen gumeysiga, wax yar mooyee meelahaas gumaysigu ku dambeeyana waxaa ka mid ah Koonfurta Afrika, Roodeesiya, Naamiibiya iyo dalkeenna qaarkiis waxaan ka oogan dhaqdhaqaaq gobannimadoon ah oo aan shaki ku jirin in uu guul dhaqso leh gaarayo.

# WAREYSI WARGEYS FARANSIIS AHI LA YEESHAY JAALLE SIYAAD

*Waxaan halkan idinkula socodsiineynaa, war aannu aannu ka soo wareejiney Wargeyska ka soo baxa bishiiba mar Baaris ee la yiraahdo «ECONOMIA» kana faallooda, arrinmaha Dhaqaalaha iyo Siyaasadda Adduunka.*

*Wargeysku wuxuu bishii Abriil 1976kii qoray maqaal ka hadlaya Jabuuti iyo su'aallo uu weydiiyey Madaxweynaha GSK Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre. wuxuu qoray Wargeysku: «Ninkasta oo Maanta taga Jabuuti waxa uu si c a d u arkaa in dadka ku nool Jabuuti ay dhammaantood, yar iyo weyn xoriyo doonayaan. Sababtuna ay tahay, isticmaarka oo Dunda ka ciribtimahaya, iyo dadka ku nool Xeebta Soomaaliyeed ee doonnaya in noloshoodu isbeddesho. Dhallinyarada oo aan maanta awood u lahayn in ay wax bartaan waxay rajeynahayaan in ay xoriyaddu tacliintooda, horey u mariso.*

*Dhallinyarada kale ee boqolkiiba siddeedtan (80 %) ayaan shaqa haysan, waxay eedeeynayaan isticmaarka waxayna halgan ugu jiraan gobonnimo. Dadka reer Jabuuti waxay aad u raacsan yihiin Xisbiga Gobannimadoonka (LPAI) ayadoo isla markaas ay dhallinyaro badani caddeeynayaan, in isticmaarku sabab u yahay shaqa la'aantooda iyo dhibaatooyinka faraha badan.*

*Wargeysku wuxuu si tifaftiran u sheegay, sida midabtakoorka ah ee loo kala deggan yahay Jabuuti.*

*Waxaa jira ayuu yiri,«In dadka caddaanka (Yurubka & wixii raaca) oo u badan askar 7,000 ay deggan yihiin xaafado qurux badan, mushaharkooduna uu aad u weyn yahay, dadka Afrikaanka ahna ay xaashiyo aqal ka dhigtaan. Waxaa intaa raacda in silig koronta ah uu magaalada Jabuuti ku wareegsan yahay oo dadka Reer Baadiyaha ayan u tagi karin Qaraabadooda Jabuuti deggan.*

*Waxaa intaa raacda in warqadaha aqoonsiga la siiyo ninkii Cali Caarif raacsan keliya ee dadka kale ee ka soo horjeedana la masaafiriyo. Dhibaatooyinkaas faraha badan oo ay dheer tahay, Dawladda Jabuuti oo ka beecmushtarta qaadka iyo dumarka jirkooda iibiya, waxay dhalisay in dadka reer Jabuuti ay maanta intooda badan ay xoriyo u halgamaayaan iyo sidii ay waddan cusub u dhisi lahaayeen, ayna raacsan yihiin Xisbiga Gobannimadoonka (LPAI) oo ay hoggaamiyaan Xasan Guuleed Abtidoon iyo Axmed Diini.*

*Xagga Dhaqaalaha Wargeysku wuxuu sheegayaa in aan dhaqaalaha waddankaas uusan aad u wanaagsanayn. Dhaqaalahaas oo ku dhisan furddada Jabuuti iyo Tareenka oo ay Jabuuti Addis-Abbeba oo xamaala sannadkii 450,000 kiintaal oo badeeca ah.*

*Faransiisku wuxuu horey isku dayey in uu Jabuuti ka dhigo Magaalo beecmushtarka ku horreeysa ee Lacagta lagu kala beddesho, Faranka Jabuuti kor ayuu u qaaday, laakiin taasu ma ay keenin faa'iidooyin weyn.*

*Haddii la warsaday Madaxda LPAI aayaha Jabuuti haddii ay xoriyo qaadato waxay ku jawaabeen, in ay doonayaan Hantiwadaag Cilmi ku dhisan oo waddankooda u habeeysan iyo xiriir walaaltinnimo ah oo ay la xirtaan Waddammada jaarkooda ah.*

*Wargeyskaa «Economia» ee ka soo baxa Baariss Bishiil kol oo ka faalooda arrimaha siyaasadda iyo dhaqaalaha dunida, wuxuu bishii Abriil 1976, qoray wada hadal uu la yeeshay Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaank Jaalle Mxamed Siyaad Barre.*

*Wada hadaladaasu waxay ahaayeen su'aalo uu u jeediyey Wargeysku Madaxweynaha GSK:-*

Su'aal: Maxay tahay Siyaasadda Faransiiska ee Afrikada Bari?

**Jawaab:- Siyaasadda Faransiisku maanta ma aha mid xasilooni nabad iyo saxibtinimo keni karta, haddii uusan Faransiisku bedelin siyaasaddiisa lagama yaabo in nabad iyo isgarad ka dhex dhaco asaga iyo dadka ku nool geeska Afrika.**

Su'aal:- Sidee ayay ku la tahay in nabad lagu gaari karo?

**Jawaab:- Waa sahal waa in uu Faransiisku aqoonsadaa xoriyada Xeebta Soomaaliyeed, oo uu wada haddallo la bilaabo dadka masuul u ah reer Jabuuti ee uusan shacbiga Xeebta ku khasbin nin ayan dooneyn.**

**Waxaa kale oo loo baahanyahay in la xoreeyo dadka siyaasadda ku xiran, ee dadkii horay loo masaafiriyey na ay dhulkooda ku noqdaan. Waxaa intaa raacda in uu Faransiisku joojiyo dadka shisheeyaha ah ee uu Xeebta Soomaaliyeed ku beerahayo.**

Su'aal: Xeebta Soomaaliyeed ma noqon kartaa waddan xor ah oo isku filan oo ka maarma Faransiiska?

**Jawaab: Dadaka Xeebta xoriyo a-**

yey doonayaan xaq ayay na u leeyihiin in ay helaan. Shacbi kastaa xaq ayuu u leeyahay in uu asagu ismaamulo waana in uu isagu xoriyadiisa ilaaliyo ee ma aha in dal kale u ilaaliyo. Anagu haddii aan Soomaaliya nahay uma baahnin in waddan kale na ilaaliyo ama na daafaco.

Su'aal:- Maxay Soomaaliya kaga tala jirtaa xoriyada Jabuuti? mase laga yaabaa in aad arrintaas ka wada tashataan adiga iyo Madaxweynaha Faransiisku?

**Jawaab:- Ilaa hadda siyaasadda Faransiisku ma ahayn mid ogol xornimada Xeebta Soomaaliyeed, haddii uuse Faransiiku ka soo laabto siyaasaddii hore ee uu ogolaado xaqa dadka jabuuti JDS. diyaar waxay u tahay in ay wadahadallo la yeelato Madaxweynaha Faransiiska. Hadda ka hor waxaan horay u sheegay in arinta Xeebta Soomaaliyeed ay ka dhaxayso dadka XeebtaFaransiiska iyo Soomaaliya oo aan cid kale shaqo ku la hayn.**

Su'aal:- Ma laga yaabaa in Itoobiya soo faragaliso arrimaha xeebta haddii daneheeda khasan kuwa dhaqaalaha ay khatar galaan?

**Jawaab:- Anigu uma jeedo waxa laysugu xirayo, xoriyadaa xeebta, iyo danaha wadan uu dhowi uu leeyahay. Itoobiya waa wadan dariskaya ah oo Afrikan ah in kastoo an xiriirkayagu uusan markastaba fiicnayn, haddana waa laga yaaba in aan is afgarano oo aan dhibaatooyinka qaarkood ka kaaftoono. Xeebta Soomaaliyeed had dii ay xoriyo qaadato waa in ay ilaalisaa danaha dhaqaaleed ee Itoobiya sidaas ayey na latahay. Dhibaato kasta oo anaga iyo waddan kale ka dhex dhacda ma aamin sanin in aan waddan kaas cunaqabteyno.**

Su'aal:- Waxaa jirta in aalaaba ba laga hadlo «Soomaali weyn» muxuu gobolka Afrikada bari ku dambeyndoonaa, mase laga yaabaa in Afrikada Bari ay Isutimaado?

**Jawaab:- Soomaaliya waa qaran weyn oo uu isticmaarku kala googooyey. Shacbiga Soomaaliya wuxuu ka mid yahay, dadka Afrika ee isticmaarku sida Foosha xun u qaybiyey Soomaaliya waxaa run ah in tahay qaran wadaaga Af, Diin, Dhaqan iyo Taariikh, xuduud kastoo la dhexdhigana kii dadka Soomaalida ka goyn kara ma aha isla markaas waxaan aaminsanahay in Soomaalidu si nabad ah isugu yimaadaan. Waxaan aamin sanahay oo kale midnimada Afrika. Itoobiya, Soomaaliya iyo dalalka u dhow way is bahaysan karaan oo midoobi karaan laakiin koley Soomaalidu waa kuwii maalin isu yimaada.**

Suaal:- Waxaa la yiri Soomaaliya waxay noqotay dayaxgacmeed midawga Soofiyeeti, maxaa warkaas ka jira?

**Jawaab:- Hadal kaa-su ma aha mid uu dadka Soomaaliyeed qaadan karo. Waxaa warkaa faafiyey waddamada qarbiga ah ee doonaya in ay Afrika sii fadhiyaan, Soomaaliya waa waddan xor ah waxana u marag ah mowqifyada ay ka istaagto qaramada midoobey iyo arrimaha kale ee dunida. Xiriirka aan la leenahay midowga Soofiyeeti waa cad yahay midowga Sooyeeti waa dal saaxib ah, oo naga caawima xagga dhaqaalaha laakiin aan waligii siyaasaddayada faragalin, kacaanka Soomaaliya iyo madaxdiisu waxay doonayaan danta dadka Soomaaliyeed waxaan aaminsan nahay in ciilaaqaadka u dhexeeya dalalka uu ku dhismo, ixtiraam iyo isle'ekaansho.**

Su'aal:-Ma runbaa in Soomaaliya ay ogolaatay in ay midowga Soofiyeeti siiso saldhig maraakiib iyo dayuurado?

**Jawaab:- Waxaan hore u sheegay in xiriirka Soomaaliya iyo midowga Soofiyeeti uu yahay mid ku dhisan iskaashi iyo saaxiibtinimo Wadankaasuna waligii na ma weydiisan Saldhig, waxaan aamin sanahay in wadankii saldhig shisheeye u ogolaada dhulkiisa uu qaranimadiisii qaar ka tanasuley oo una nabada dunida halis galinaayo. Saldhigga lagu sheegayo Soomaaliya waxaa looga danleeyahay in la is hor taago halganka soomaaliya iyo madaxdeedu ugu jiraan in ay xoroobaan, xagga siyaasadda iyo dhaqaalaha.**

# HESHIISKII LOOME

W. Q. Cabdullaahi Salaad Warsame

Wareerka sanooyinkaan danbe ka taagnaa soo saarka cuntada wuxuu baraarujiyay dunida wuxuuna xudun u noqday doodaha ka dhadhaca shirka caalamiga ah.

Dhammaan doodaha caynkaas ahi waxay ku arooreen oo xoogooda saareen siyaabaha lagu kordhin karo tacabka beeraha iyo tabaha looga gacan sareynaayo, iyadoo lagu adeeganaayo baarid iyo cilmiga lahayo, mashaakiilka la xiriira gabaabsiga cuntada.

Maqaalkani ku tiigaalanmaayo mow duucan, laakiin wuxuu si koo ban u eegayaa dhawr arrimood oo caalami ah qiimana ku fadhiya isla markaana wuxuu tilmaamayaa soo saarka badarka, iyo sareeynka adduunka inta la haysto iyo inta loo baahan yahay.

Soorta lagu taamayo in la haysto 1980ka waxaa ka muuqda argagax laxaad leh waayo waxaa la la'yahay 250 malyan oo tan oo sareen ah. Xoojinta ganacsiga ixtiyaajaadka dunida oo intaa kordhaya iyo qaayaha beeruhu u leeyihiin dal walba ayaa soorta la haysto heer istaraateeji ah ka siiya horumarinta dhaqaalaha ee waddankasta shuruudna u noqda xiriirka ganacsiga iyo wax-wadaqabsiga caalamka ka dhaxeeye qiilqiilka cuntada ka dhasha wuxuu sidaa darteed culayska biiriyaa xiriirka wax lagu kala qaato, maantase lama joogo wakhtigii imbiryaaliyaddu ay dadka kale ku cadaadin jirtay qawaaniinta danaheeda u dhigan.

Balse aan u ahaanno halka xaaladda cuntadu ay maraysay, aan tusmo u qaadanno 1966kii oo sal ahaan qiimaha cuntada ahaa 100. Waxaa ka dib guud ahaan kacay ascaartii cuntada adduunka. oo bishii Nofambar 1973kii joogay 279.9, bishii Agoostona 1974kii 321. afar sanno dhexdoodana waxaa seddex laamay ascaartii miraha beeraha. Sonkortu waxay kor kacday afar jeer, Bariiskuna seddex jeer tan iyo1966kii-74kii, 1970kii dalalka soo koraya soorrta u soo degtay qiimaheedu wuxuu gaaray 3.1 Milyaardi oo doolar iyadoo inta loo baahanaa ay ahayd Afar milyaardi, 1980 kana sida ururo caalami ahi ay adoraseen, waxaa laga yaabaa inuu ku baxo qiimo ah 4.8 milyaardi oo doolar iyadoo markaa loo baahan yahay raashin ah tadobo milyaardi xaaladdu way ka ba'antahay intaa maxaa yeelay wararka caynkaa ahi ee FAO ay dhiibtay waxay ku dhisnaayeen heerkii ascaartu joogtay 1970kii oo kaliye. Markaan tixraacno warar in dhaweynto soo baxay, waxaan qiiyaasynaa 1980ka wax yaabaha loo baahan yahay qiimahoodu ku agwareegi doono 14 milyaardi oo doolar. Waxa naga horeeya ma aha qaar laabtu u bogi karto.

FAO waxay saadinaysaa in gabaabsiga cuntada ee haysta waddamada dunida seddexaad uu saddex laamood muddada 1970ka-80ka Mashaalkilka ka abuurmay quwadda la shito iyo dhaqaalaha adduunka oo hoos u dagaye ayaa xataa si

ba'an u sii balaariyay faraqa u dhaxeeya w a d a m a d a hanti goosadka ah ee sanaacadda ku horeeye iyo kuwa soo koraya. Sida laanta u qaybsan Agaasimidda lacag ta Adduunka ay ku warrantay, waddamada saboolka ahi lacagta ay u baahan yihiin waxay ka kacaysàa 78 milyaardi oo doolar oo 1974kii ay joogtay sannadkan 1976kana waxaa lagu wadaa in ay gaarto 35 milyaardi oo doolar.

Haddan wax ka sheegno badarka yio sarreenka dunidda; arrimaha ku soo fool leh ma'aha wax sidaa u wanaagsan. Sannadkii tagay dabayaaqadiisii badarka iyo sareenka soo baxa waddamada dhoofintiisa ku horreeya wuxuu hoos u dhacay 50 milyan, oo tan iyadoo sannadkii kaa ka horeeyey uu hoos u dagey 58 malyan, bishii Juun 1972kiina 109 milyan. Taana waxaa heerkii ugu hooseeyay ee uu gaaro muddo 20 gu' ku siman inta sarreenka hoos u dhacday waxaa 25 milyan oo tan marka la barbardhigo 26 milyan 1974kii, bishii juun 1972kiina 49 milyan. 25ka milyan ee kale waxay ka koobnaayeen 4 milyan oo bariis ah iyo 21 milyan oo tan oo ah soor kale duwan. Arrintu uma eka mid mudda dhaw soo ladnaan doonta saadaalkii ugu danbeeyay wuxuu runtii ku baaqay in soo saarkii laga filayay dunida ee ahaa boqolkiiba sideed uu haatan u dagay boqolkiiba Hal, waana sarreenka iyo soorta kale soo saarka la hadal hayo ee ahaa inuu gaaro1974-75ka 1.332 milyan oo tan ka dibna 1.345 milyan oo tan.

Sababta arrimahaa dib loogu kuurgalay oo adoros cusub laga bixiyay waxaa weeyey duruufta cimilada oo ka dartay gaar ahaan dalalka kulaylaha ku jira oo roobku u yahay asliga biyaha. Iyadoo inta oo dhibaata ah ay jiraan darteed ayaa waxaa la filayaa in waddamada dhoofinta socrta ku horeeyay dalagga u go'idoona uu dhamaandoono markuu idlaado ololaha maanta lagu jiro 56 malyan oo tan, oo micnaheedu tahay in 6 milyan oo kaliye ay ku dordhindoonto kii sannadkii hore lala kulmay: Korarka galleydu wuxuu ugu yaraan noqonayaa 25-26 milyan oo tan (ba riiskana 4-5 milyan oo tan) badarka kale nooca ahi ee kale ayaa laga yaabaa inuu xoogaa kuwa hore karron soo saarayo. Iyadoo heerka hooseeye ee soo sarrenku cilladdeedu tahay guul darro qabsatay beeraha waddamada tabcada sarreenka qaarkood, yaraanta ku dhacday soo saarka badarka kala jaad ka ah ee kale waxaa sabab u ah habka ay u shaqeeyaan beeraha maraykanka.

Beeraha oo laga qaxayo ayaa isir weyn u ah isdhimidda soo saarka khayraadka beeraha marka shaqaalaha ka ciidamiya beeraha uu yaraado, malyuunaad qof ayaa ka wax ka tacbaan beeraha oo noqda dad iyagu qaata cuntada. Siyaasadwarreega shaqadoodii ahayd inay da beeraha ku taxan ee maanta ku taagan waddamada qaarkood runtii way ka sii dari doontaa haddii fara ka qaadka beeraha caalamku heer xun ka gaaro gaar ahaan dalalka dhaqaalahoodu ka waraabo beeraha.

Horukaca laga sameeyey farsamooyinka beeraha tobaneeyadii san nadood ee danbe wuxuu dhaliyey in tacabka beeruhu aad u talaabsado. Beeraha casriga ahi ee ah kuwa ku shaqaynaya habka tegnoolijiyadda ee cusub waxay xagga awoodda soo saarka ka kormareen laamaha kale ee iyaguna lagu dheefsado.

Habboonaanta agaasimka beeraha waaweyn iyo mideenta laama badan oo kala shaqeeya isla markaana larraaciyo qalabka tignikada, hab cusub ee ah dhul waraabinta, bacriinta iyo la dagaalanka cayayaanka, arrimiha ka soo baxay baaridda biyokiimikada iwm. Waxay dhaliyeen in la gaaro faa'iidooyin waaweyn.

Arrimaha xiga ee intaa hore soo raaca ee isbadalka tignoolajiyadda noocaa ahi ku suurta galiyey in beeruhu koobcaan waxay ka koobmaan saldhigyada dhaqaalaha ijtimaaciga iyo qawaaniinta sida isbadalka dhulka lagu samaynayo, hagaajin siyaasadda ascaarta maalgalinta xagga wax-barashada iyo baaridda, balaarrinta barnaamijyada iwm.

Teeda kale siyaasad maamul toosan ee dawladi ay ku dhaqaaqdo waxay si weyn wax u taraysaa dhanka beeraha. Shaki kuma jiro in hawlaha oo aad loo kala saaro ay dhalin doonto, ka dib markii si haboon loo qorsheeyo, in laga gun gaaro si fududna loo xaliyo mashaakilkii ka taagan cuntada. La'kiin waxaa taa shuruud u ah daggaanta ascaarta iyo suuqa, siyaasadda oo laga fongoro isticmaalidda cuntada taalla iyo wax wadaaga dhexmara waddamadii ay khusayso taa micnaheeduna waa iskaashì ballaaran ee dunida dhexmara ee dalbaya in wax laga wada qabsado xoojinta dhaqaalaha.

# SOOMAALIYA WAXAY KA GAARI DOONTAA ISKU FILLASHO XAGGA CUNTADA 1980

W. Q. Khaliif Maxamed Barre



Mustaqbalka Horumarka Soomaaliya wuxuu ku xiran yahay had ba sida ay uga faa'iideysato, dhulkeeda beeraha ah; kaasoo saldhig u ah nolosha dhaqaalaha dalka iyo dadka waqtigan cuntadu ciriiriga ka gashay Adduunka iyo qiimaheeda oo kor u kacay, dhibaatooyin fara badanina ka taagan yihiin arrintaa, kana taagnaan doonaan mustaqbalka haddii aaney ka gaashaaman dadyowga Adduunweynuhu taas oo aaney Dawlad waliba dib ugu noqon ka Faa'iideysiga dhulka ay haysato sidii ay wax ugala soo bixi lahayd.

Sidaas daraaddeed ayey J.D.S. goosatay in ay culays saarto sidii ay cunto ku filan ugala bixi lahayd dhulkeeda Sanooyinka soo socda. Annagoo ogsoon taas ayaanxiriir la yeelannay Xoghayaha Wasaaradda Beeraha Jaalle S/Guuto Maxamed Ibraahim Axmed, si aannu uga wareysanno qorshaha ay Wasaaradda Beeruhu ugu talo gashay wax soosaaridda iyo tacab kordhinta Beeraha sannadkan iyo guud ahaanba.

Wuxuuna Xoghayuhu nooga war ramay Qorshaha ay fulineyso Wasaaraddu 1976ka, iyo sida uu ugu xiran yahay midka shanta (5) sano ah oo loogu qorsheeyay in wax locga qabto Tabcashada Beeraha, & Kordhinta wax soo saaridda. Isagoo kaasi salka ku haya Siyaasadda guud ee Dawladda iyo go'aannadii Shirweynihii 1aad ee Golaha Ummadda lagu qabtay 1975kii. Barnaamijkaana waxaanu haysannaa in uu yahay bilaw saldhig u noqda qorshaha isku fillaanshaha ee la higsanayo in la gaaro 1980ka ayuu yiri Xoghayuhu.

Waxayna Wasaaradda Beeruhu fulineysaa 1976ka Barnaamijkan soo socda:

1. In ay isugeyneyso Beeraleyda Saboolka ah; si ay ugu sameeyso Iskaashatooyin kala duwan sida Tacab Wadaag & Ujeeddooyin badan, iyadoo siineysa wixii kaalmo ah oo suuragal ah (Abuur, Bacrin, Sun, Cagaf-cagaf iwm.)
2. Waxay ku dhaqmaysaa habka cusub ee laga hirgelinayo Wasaaradda sannadkan ku saabsan (Registrationka,) ama diiwaangelinta dhulka la beerayo uu la eg yahay, dadka Beeranaya, isla mar ahaantaana lagu xisaabtamayo dhulka la beerayo waxa laga beerayo sida ay u kala duwan yihiin kaasoo ka duwan habkii ay hadda ka hor ku dhaqmi jireen Beeraleyda Soomaaliyeed oo aan lahaan jirin HAB XISAABEED ay ku isticmaalaan marka ay falanayaan Beeraha, maxaa yeelay ma ay aqoon bacrinta dhulka ama qalabka cusub oo hadda la damcsan yahay in si wacan dalka loo wada gaarsiiyo ku qodashadiisa beeraha. Habkaa cusub oy damacsan tahay Wasaaraddu in ay ku hormariso Barnaamijka Beeraleyda waxaa ka mid ah in ay siiso Tababarro B e e r o qodatada Soomaaliyeed oo ku saabsan H A B K A MAAMULKA BEERAHA & HORUMARINTOODA si ay ula socdaan waqtigan casriga ah waxyaabaha uu ku kordhiyay aqoonta Beera Falashada Adduunweynaha.

*HABKA WAX-BEERASHADA:*

S/Guuto Maxamed Ibraahim wuxuu faahfaahin ka dhiibay habka Wax Beeridda dalka kaasoo uu ku tilmaamay in uu la socdo isbeddelka cusub ee Wasaaraddu waddo waqtigan. Kaddib markii uu soo baxay bishii 21ka Oktoobar 1975kii sharcigii habaynayay DHULKA BEERMA. Wuxuu caddeynayaa shaarcigaasi in waxii ka dambeeya hadda ay dawladdu keli ahaanteeda leedahay Dhulka, iyada ayaana bixin karta DHULKA labeeranayo fasaxiisa hanashadiisa iyo ku

dhaqankiisa.

Dadkii hadda ka hor dhulka beeraha lahaa ay Qaaddiyadu u sharciyeeyeen waxaa laga sugayaa in ay mar labaad cusbooneysiistaan Fasaxoodii hore ee lahaanshada ama ku dhaqanka. Waxaana ka mid noqday Shuruudaha Sharciga habeynta dhulka:-

1. Dhulka Dawladda ayaa leh taasina waxay muujineysaa qarannimo Soomaaliyeed iyadoo tirttiraysa qaababkii goofafka, iyo dhulka xirashadii sharci darrada ahayd oo qabiilka iyo qaanuun la'aanta

3. Ninkii dhul haysta oo aan cusbooneysiisan fasaxiisa waxba kama jiraan wixii hore, waana la buriyay Sharci-kusheeggii Fashiistadii soo saartay 1922kii, oo aan ahayn mid si wacan u baahi tiraya Ummaddu waxay rabaan.
4. Dhulka Dawladdu waa qiyaas tey kuna hal dhul keliya ayuu yeelan karaa; kaasoo lagu qiyaasay dhulka waraabka ah 30 Hegtaar, dhulka roobka ahna 60 Hg.

Waxaana Wasaaradda Beeraha waxtar weyn u noqonaya ama ku ha kor ku tilmaaman oo dhami waxyaabaha ay ku faaneyso Wasaaraddu, kuna rajo weyn tahay in ay u horseeddo, Ummadda in barnaamijkaa lagu gaari doono isku fillaanshaha 1980ka.

*DHIBAATOOYINKA WASAARADDA HAYSTA*

Waxaana haysta Wasaaradda Beeraha dhibo fara badan, qaarkoodna ka sarreeyaan awoodda Wasaaradda, oy ka mid yihiin:
1. Awoodda wax ku' qabsashada Wasaaradda oo aan socon fara badida b a a h i d a dadka qabo wax walba oo ku xiran maaliyad aqoon farsamo, Biyo ku filan iwm.



ku dhisnayd.

2. Waxaana dhulka loo bixinayaa waa ku dhaqan keliya iyadoo gaareysa 50 sano muddada fasaxa ugu badani waxaana ugu yar 2 sano, iyadoo tilmaameysa qof dhul lahaan karaa in aannu jirin haba yaraatee, haddii aaney ogayn Wasaaradda Beeraha.

kaalmeynaysa sidii ay u gudan lahayd xilka laga sugayo oo ku saabsan kordhinta wax soo saarka, hirgelinta Habka diiwaan gelinta dhulka, waxaa lagu ogaan doonaa run ahaantii dhulka beermi kara inta uu la eg yahay ee dalkeenna, laga-na kontorooli karo waxa la beeri karo oo dhan.

Waxayna ka mid yihiin arrima-

Tan kale Shimbiruhu aad bay u dhibeen beeraleyda; waxaa intaa ka sii daran aqoonta ay kula dagaallami lahayd oo maqan.

Dhul ballaaran, oo beermi kara,inkasta ay kala duwan tahay waxa la beero; oo aaney la socon aqoonyahannadii wax ka qaban lahaa dhulka Ballaaran, waxay ka mid tahay dhibaatada haysata Ummadda.

# QIRID IYO TIXGELIN UU MUTAYSTAY JAALLE BRESHNEV

*Bishan Maajo oo socota 10dii, ayaa billaddii Maarshaalnimada Nabadda adduunka; derejada ugu sarraysa ee Millitariga Soofiyeetiga iyo Diblooma Madaxtooyada Soofiyeeti lagu guddoonsiiyey Jaalle Leonid Breshnev, Xoghayaha Guud ee Xisbiga Shuuciga ah ee Midawga Soofiyeeti iyo Guddoomiyaha Golaha Gaashaandhigga ee Midawga Soofiyeeti. Derejada Maarshaalnimada ee Leonid Breshneev la siiyey oo uu Kremliinka Moosko ku guddoonsiiyey Madaxweynaha Golaha Madaxtooyada Midawga Soofiyeeti Jaalle Nikolay V. Bodgoorni, taasoo uu leonid Breshnevku mutaystey hawlaha wax-ku-oolka ahaa ee uu kasoo qabtay dalka ilaa bilawgii shaqadiisa, doorkii uu ka ciyaaray dagaalweynihii waddaniga ahaa iyo jebintii xooggii fashistiga ahaa ee Hitlar markii uu dalka Duullimaadka cadawtinimada ah kusoo qaaday, xilkasnimadiisa, daacadnimadii uu u muujiyey mabaadi'da hantiwadaagga ah intii uu xubinnimada xisbiga kusoo biiray iyo kaalinta lama illaawaanka ah ee uu ka qaatay qaddiyadda xaqa ah ee himilada beni aadanka oo idil koobaysa; taasoo ah xarakada dhowaanta bilaabantay ee dhimidda hubka halista ah, isu soo dhowaanta dadyawgadunida, dunida, wax wada qabsiga dunida, taageeridda dhaqdhaqaaqyada gobanimo doonka waddaniga ah iyo debcinta xiisadaha dunida ka aloosan, u halganka nabadda iyo badbaadada Ummadaha adduunka.*

*Isagoo guddoonsiinaya Billadda Maarshaalnimada nabadda adduunka Jaalle Nikolay Bodgorni wuxuu yiri khudbaddiisii «Sifooyinkaaga wanaagsan ee hoggaamiyenimada siyaasadeed, dabeecadahaaga la yaabka leh ee dadnimo jacaylka ah ayaa kuusoo jiitay kalsoonida ay kugu qabaan dadyawga horusocodka ah ee dunidu. Shirweynihii 25naad ee Xisbiga Shuuciga ee M.S. wuxuu daboolka ka qaaday heerka sare ee ay maraysa haybadda Xoghayaha Guud ee Guddiga Dhexe XSHMS. Taasu waxay tahay sharafta iyo haybadda Xisbigayaga Leninistaha ah, haybadda dalkayaga oo ah waddankii ugu horreeyey ee hantiwadaaggu ku dab shitay.*

*Maanta oo Leonid Breshnev uu yahay Maarshaalka nabadda adduunka ma jirin derejo la mid ah oo qof dunida hore uga qaatay, hase yeeshee isaga waxa siiyey dadka, waxa siiyey dadkii yaqaannay isagoo dhawr iyo toban jir ah shaqooyinkii uu qaban jiray, waxa siiyey shaqaalaha warshadaha birta ee dnieper ee Breshnev awowayaashii, aabbihii iyo walaalihiiba ay ka shaqeeyaan, waxa siiyey Injinneerada dalka ee Dibloomahoodii ugu horreeyey kaasoo qaatay Dugsiyada Sare Khaaska ah ee Breshnev Madaxa ka ahaan jiray, waxa siiyey Guutada 1aad ee Ciidamada Badda ee Breshnev, hoggaamiyahoodu cuntada la qaybsan jiray ayaamihii madoobaa ee Guuldarradii Fashiistadii Jarmalku dalka ay ku dulgawdiidday, markii ay ku jireen dhufaysyadii Novorsiisk.*

*Taariikhdii nololeed ee Jaalle Breshnev iyo hiyigii uu usoo maray ilaa figta ugu sarraysa ee derajada Dawladda Soofiyeetiga Xisbiga Shuuciga ah iyo Ciidammada Soofiyeetiga ma ah wax aan caadi ahayn. Hawshii weyneyd ee uu Breshnev qabtay ayaamihii xanuunka badnaa, gaar ahaanna fulintii iyo iskuduwiddii qorshayntii shanta sano ee 1aad ee lagu dhisayey dhaqaalihii dagaalku burburiyey iyo hindiseyaashii uu u jeexay beeriddad dhulka curdinka ah.*

*Doorka weyn ee uu Leonid maarshaalka nabaddu kaga jiro horseedka xarakada loogu jiro dhimidda hubka halista ah, debcinta xiisadahaa dunida ka aloosan iyo abuuridda xaalado nabadeed oo suurto geliya in beni aadanku ka baxo kala qoqobnaanta iyo iscollaysiga oo la iska kaashado waa midda usoo jiidday jacaylka dadyawga nabadda iyo dimuqraadiyadda ku dhaata iyo aqoonsiga halyeynimada iyo maarshaalka nabadda iyo xasilloonida dunida. Taasoo uu ku helay horseednimadiisa dadnimo u dirirka ah halyeynimadiisa nabad raadiska ah iyo doorka waxku oolka ah ee uu ka qaatay dib u habaynta xiriirada dunida iyo xaaladaha dunida ka taagan sidii nabad gelyo loogu xallili lahaa.*

# 1da Maajo WAA MAALINTII SHAQAALAHA ADDUUNKA

# 15ka Maajo waa Maalintii Dhallinyarada Kacaanka

# 25Ka MAAJO MAALINTII URURKA MIDOWGA AFRIKA



# Shaqaaluhu waa kuwa libinta Xorriyadda soo hooyey una horseedaya aayaha cusub

## Qaaradda Afrika Waxay maraysaa heerkii ugu dambeeyey oo ay kaga bixi lahayd

## Kadeedka iyo dhagarta gumeysiga

**Madaxweynaha GSK, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre wuxuu shalay ku dhawaaqay in halganka iyo isbeddelka taariikhiga ah ee xoogsatada adduunku uu sii soconaayo ilaa laga baabi'iyo nidaamka hantigoosiga oo adduunyada la gaarsiiyo horumar, caddaalad iyo sinnaan.**

**Jaalle Siyaad oo ka hadlaayey Beerta Daraawiishta ee magaaladan Muqdisho oo lagu qabtay xuska Shaqaalaha Adduunka ee 1da Maajo halkaasoo ay isugu soo baxeen shaqaalaha Wasaaradaha, Wakaaladaha iyo Sharikadaha iyo Gud** diyada Ijtimaaciga ee magaaladan Muqdisho, **wuxuu Madaxweynuhu caddeeyey in halgankaasi shaqaala weynaha adduunka aan la hakin karin sida aan loo celin karin kaaha qorraxda.**

**Khudbaddii oo dhanna waa tan :**

Jaallayaal

Ugu horrayntii waxaa salaan iyo hambalyo iga mudan shaqaalaha iyo Dadweynaha Soomaaliyeed ee xusaya Maalintan qaayaha weyn leh ee 1da Maajo. Waxaan halkaan dhiirrigelin iyo salaan uga diraynaa xoogsatada adduunka oo idil, iyagoo si raynrayn iyo farxad leh ugu dabbaaldagaya maalintii magaca weyn lahayd ee bogga hore kaga tiil taariikhda dhaqdhaqaaqa xoogsatada iyo dadyowga u halgamaya. 1da Maajo waa maalinta ay bahoobaan, ul iyo diirkeedna noqdaan, shaqaalaha iyo dadyowga horusocodka ah ee la diriraya kadeedka, isku dulnoolaadka, midiidinsiga iyo dhiigmiiradka waayeheennan midabbada kala jaadka ah yeeshay. Iyadoo halgan loogu jiro sidii imberiyaaliyadda, gumeysiga cusub, midabtakoorka iyo sahyuuniyadda loo tirtiri lahaa baa Xoogsatada adduunku nolosheeda dhidibbada u aasaysaa. Sida hubaal ahna nololi ma jirto shaqo la'aanteed. Maantana shaqadii iyo shaqaalihii baa xooggooda, haybadooda iyo sharaftooda halkan iyo meel walba oo adduunka ka mid ah looga dabbaaldagayaa. 1da Maajo waxay tilmaan u tahay dagaalka xoogagga horusocodka ah ee niyadsami ku goobaya adduun caddaalad, sinnaan, xurmo iyo nabad ku dhaqan.

Dhinaca dadkii la gumeysan jirey ee hadda cagta saaray dhabbaha madaxbannaanida waa shaqaalaha kuwa libinta xorriyadda soo hooyey, waana shaqaalahaas kuwa u horseedaya aayaha cusub. Waxaase marar badan dhacda in dalalkaasi u gacan galaan gumeysiga cusub iyo dibusocodka gudaha, sidii inna haysatay Kacaanka ka hor, halkaasna dadkii gu'yaasha dheer halganka ku soo jiray la fool habawsho oo laga dullaysto xagga laxaadkooda, la curyaamiyo dhaqaalahooda la yaso lana dumiyo dhaqankooda, la aaso astaamihii wacnaa ay lahaan jireen, dhinaca maskaxdana gun laga dhigo, rajadana laga qodo. Markaana shaqaalaha gilgishay oo dadaal badan iyo halgan la yimid; kuwaas oo dadkii u soo celiyey xuquuqdoodii, dibna u nooleeyey buruudkoodii, beddeley dhaqaalahoodii oo si wacan ugu tallaalay isku kalsoonaan iyo hanweyni aanay markaan ka hor il iyo baal saarin. Dalalkaas aayatiinka fiican leh waxaa ka mid ahaa dalkeenna oo amarku taaglayntii dibusocodka ku beddelay talis dadweyne, talis shaqaale, talis dimuqraadi ah, oo hantiwadaag ah. Inta aan weli guushaas gaarinna halgan bay ugu jiraan; shakina ma leh in la wiiqi doono gumeysiga, midabtakoorka, sahyuuniyadda iyo addoonsiga aadamigu walaalkii ku hayo midab kastaba ha ahaadee. Taasina waa astaan kale oo maalin tan boqrani leedahay.

Asalkeeda banaanna waxaa guulaha isdabajoogga ah ee shaqaalaha ugu wacan soona dejiya midnimada ay ku dhaataan horuso codka adduunka oo dhammi. Waayo halgankani mid la kala takoori karo maaha; mid la kala faquuqi karo maaha, mid baahsan oon iska warqabin maaha ee il qura buu ka biya cabbaa, waana mid isdugsanaya isna tabantaabinaya. Haddii meel Imberiyaaliyadda laga jebiyo guushaasi waxtar aan la koobi karin ayey u tahay dadyowga kale ee weli la-dagaallanka imberiyaaliyadda jaanta ka wada. Taas waxaa daliil u ah libta dawladaha horusocodka ah ee Afrika ay soo hooyeen iyo sida ay u hiyi kicisay, waxtarna ugu yeelatay dalalka Afrikaanka ah ee gacanta gumeysiga ku sii harsanaa. Isu-taggaasi mahadda ha la haadee, Afrika maanta badankeedu waa xorowday, waxaana ugu dambeya Angoola; kuwaas oo faa'iido loo aayi doono u noqonaya halganka Xeebta Soomaaliyeed, Naamiibiya Koonfur Afrika iyo Simbaabwi.

Jaallayaal, sida aad ogsoon tihiin qaybaha Kacaanka adduunka ee ka kooban dalalka hanti-wadaagga ah, xoogsatada ka dhex halgamaysa dalalka hantigoosiga ah, iyo dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka ah waxay maalinta 1da Maajo u tahay xuddun midaysa. Waxaadna gun iyo maan uga dheregsan tihiin in Kacaankii adduunku meel walba miro ka bixinayo gumeysigana maal fulin karo danaha dadweynaha.
miro ka bixinayo gumeysigana maal

mihiisu gabaabsi ku jiraan. Hase yeeshee haddii aynu fiiro u yeelanno marxaladda taariikhiga ah ee addunku maanta ku sugan yahay waxaynu arkaynaa in xilka xoogsatada iyo dadweynaha addun ku aad u weynaaday. Maxaa yeelay dhinac waa inay daafacaan nabadda adduunka oo xoogagga dib u socodka ah ee hortaagan isbeddelka adduunka khatar gelinayaan iyo haysashada hubka halista ah oo aan casriga ka hor la maqal: dhinaca kalena waa in ay kiciyaan shuucuubta adduunka si ay dagaal ugu qaadaan gumeysiga iyo gumeysiga cusub.

Xoogsatada adduunka meelo badan bay qarnigaan la wareegeen xukunkii. Waxa xus leh Kacaankii heegnaa ee Oktoobar 1917kii ka curtay dalka Midoowga Soofiyeetiga ee horseed u noqday halganka xoogagga horusocodka ah taageero aan shuruud lahaynna u geeysta xoogaggaas. Taas waxa matal u ah taageerada ballaaran oo ay Soomaaliya u fidisey.

Adduunka oo idilna waxaa loo dheg taagayaa maalintii gumeysiga fooshaxuni ka alaab guran lahaa meelihii uu adduunka uga haray. Qaaradda Afrika waxay maray saa heerkii ugu dambeeyey oo ay kaga bixi lahayd dulliga iyo dhagarta gumeysiga iyo midabtakoorku u geysteen.

Waad la socotaan halganka ay ku jiraan dadka Azania, Namiibiya, Zimbaabwe iyo Xeebta Soomaaliyeed.

Meesha ay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed ka taagan tahay arrinta gobannimadoonka mid u baahan in aan maanta halkan ka caddeeyo maaha, maxaa yeelay, dhammaan waa la ogyahay taageeradeenna. Waxaan mar walba maanka ku haynaa laba aflaynta, leexleexadka, ballanka-baxa iyo ku xadgudubka xurmada xeerarka caalamiga in ay yihiin astaamaha gumeysiga laguna yaqaan. Arrinta Xeebta Soomaaliyeed oo dadkeenna si gaar ah u taabanaysa dhib badan baa ka taagan oo la xiriira degaankeeda istratejiga ah oo guud ahaan sal u ahayd kala googooyintii hore ee gumeysiga ee Ummadda Soomaaliyeed. Dawlado badan iyo dano badan oo aan marnaba daryeelayn maslaxada iyo xuquuqda aadamiga ee dadka ku nool Xeebta Soomaaliyeed ayaa ku baratamaya; waxaase guul weyn ah in dadka Xeebta Soomaaliyeed oo isku duubani maantay u halgamayaan sugidda sharaftiisa, xuquuqdiisa bani'aadamiga iyo xor nimada dalkooda oo buuxda. Taas ayaa dawladda iyo dadweynaha Soomaaliyeedba kula garab taagan yihiin had iyo jeer, hiil iyo hooba. Halgankaas xaqa ah waxa kaloo dadkaas ku garab taagan Ummaddaha Midoobay, Ururka Midoowga Afrika, Ururka Jaamacadda Carabta, Ururka Dawladaha Dhexdhexaadka oo dhan iyo inta na badda jecel. Waxa hubaal ah in dadka Xeebta Soomaaliyeed gumeysiga ka bixi doonaan sida Ummadaha kale uga baxeen amba uga baxayaan. Taasi waa taariikh lama ha-kiyaan ah. Waxaase isweydiis leh sidee baa dalkaasi xornimadiisa ku gaarayaa?

Dawladda Faransiisku waxay ku dhawaaqday inay Xeebta Soomaaliyeed gobannimadeeda hab dimoqraadi ah ku siinayso. Aad bayna arrintaas ugula dhex wareegtey dawlado badan iyo dadweynaha Faransiiska. Ayaan darro waxaa ah in taasi ka fog tahay siyaasaddeeda runta ah ee ficilkeeda ka muuqatay. Xornimaan siinayaa si dimuqraadinnimo ah baan ku siinayaa isla markaasna silig ayaan ku wareejinayaa, calooshood u shaqaysato awood buuxda leh ayaan ku sii deynayaa waa xirxirayaa waan qayb-qaybinayaa, guryahaan ka burburinayaa, waa musaafurinayaa, waddanninimada ayaan u diidayaa dad aan dalka u dhalan ayaan dejinayaa xuquuqdii jinsiyaddana siinayaa, waa mid la yaab leh, aan la qaadan karin, laakiin muujineysa wajiga runta ah ee siyaasadda Dawladda Faransiisku ka leedahay Xeebta Soomaaliyeed.

Sida la ogyahay Dawladda Faransiisku marna uma qasdiyin in ay xornimo siiso Xeebta Soomaaliyeed ee waxaa ku khasbay halganka dadka dalka deggan, dawaynaha Faransiiska iyo kan adduunka. Dhibaato ma timaaddeen haddey Dawladda Faransiisku garwaaqsan lahayd lama-huraannimada xornimada dalkaas si habbonna ku dhiibi lahayd. Laakinse waxay goosatay in ay dalkii xornimo maqaar-saar ah siiso isla markaasna xukunka sideedii uga taliso. Taas ayaa keentay maaweelada ay adduunka la dhex wareegeyso iyo iska hor-imaadka joogtada ah ee hadalladeeda iyo falkeeda ka soo if-baxaya. Sidaas awgeed waxaa lagama maarmaan ah in Dawladda Faransiisku dib ugu noqoto siyaasaddeeda ayna tixgeliso himilooyinka dhabta ah ee dadweynaha Xeebta Soomaaliyeed ee in badan danta Faransiiska u adeegaayey: Si taasi lagu gaarona, waa in:-

1. Sharciyada foosha xun ee hornimada ah ee gumeysigu dadweynaha ku dibindaabyeynayo la baa-

bi'iyo;

2. Dawlad-ku-sheegga dhalanteedka ah ee maqaar-saarka ah ee hadda Xeebta ka dhisan oo la dumiyo;
3 Dadka xiran oo la sii daayo;
4. Dadkii dhulkoodii laga masaafuriyey oo lagu soo celiyo, kuwa hadda la wadana la joojiyo;

5. Dadka aan dalka u dhalan ee lo dejinayo in la celiyo, lana joojiyo soo gelintooda;

6. Dadka shisheeyaha ah oo aan waddanka u dhalan, waa in aan codbixin loo oggolaan;

7 In la qabanqaabiyo, si degdeg ah, shir distooreed oo ay ka soo qayb galaan xoogagga dhab ahaan u halgamaya xornimada Xeebta si meel loo wada dhigo sidii xukunka loogu wareejin lahaa dawlad dadka matisha.

Haddii dawladda Faransiisku sidaas yeesho waxay sugaysaa xasilloonida gobolka oo waajib culus ka saaran yahay; waxay adkaynaysa waaridda xiriirkii dheeraa oo ay la lahayd waddankaas, waxayna is-afgarasho iyo wax-wada-qabsi fiican la yeelanaysaa J.D.S.

Haddiise amuurahaasi hal bacaad lagu lisay noqdaan waxa hubaal ah in xasilloonida agagaarku la mid noqon doono tan Afrikada Koonfureed ka aloosan. Sababtuna waxay tahay Ummadda dhulka leh oo aan marnaba oggolaan karin gobannimo been ah, khiyaano iyo dhagar lagu hodo, iyo tabaha kala jaadka ah ee gumeysiga Faransiisku ku ugaarsado. Dadweynaha Xeebta Soomaaliyeed iyo kan adduunkuba ma hilmaamin dhaleecadii iyo dhagartii Faransiisku ka sameeyey Xeebta Soomaaliyeed bishii Maarso 1967, mana oggolaan doonaan kuwo kale oo la mid ah.

Dawladda Faransiisku waxay marar badan ku gabbataa in haddii Xeebta Soomaaliyeed ay ka baxdo, Dawlado jaar ahi isku hardiyayaan, nabadgelyada gobolkuna khatar galeyso; Dawladda Itoobiyana waxa muuqata in ay qabto in maslaxad ay leedahay ku waayeyso. Runtu waxay tahay in khatartaas la muujinayo ayan marnaba baajin karin xornimada Xeebtaas, dano dhaqaale oo Itoobiyana xornimada dalkaasu waxba u dhimeeyn, weliba waxaan leenahay Itoobiya waxa u roon ee ay danaheeda dhaqaale kala xaajooto dawlad Afrikaan ah intii ay ku tiirsanaan lahayd dawlad gumeysi ah oo kolleyba tegi doonta.

Haddii aan u soo noqdo dalka gudihiisa iyo sida Kacaanku horumarka wax uga qabtay waxaa xusid u baahan in Kacaanka Soomaaliyeed isagoo tixgelinaaya waayaaragnimada dalalka kale iyo halgan kii dheeraa ee Ummaddani soo martay uu ku dhawaaqay inaan mabda'a Hantiwadaagga ah u doorannay dawgii aan ku horumari lahayn. Taasi maaha in hantiwadaaggu yahay caano iyo malab, nasasho iyo barqo-seexad. Hantiwadaaggu waa halgan waa hawl, waa hig sad xalaal ah si degdeg horumar loo gaaro. Beryaa la oran jiray ma suurowdo in dal dhaqaalihiisu aad u hooseeyo uu hantiwadaag dhiso. Maantase heerkaas waa la gudbey. Kacaanka ka hor dalku ma lahayn warshado waaweyn iyo beero laxaad leh saas awgeed, ma jirin dabaqad hantigoosi ahi oo baaxad leh iyo mid xoogsato ah oo dhanka kale halgan kaga haysa, waxaase jirtey fikrad hantigoosi ah oo iska-horimaad abuurtay khalkhal iyo qaab darri beylah iyo dayacnimo ku sugtay xuquuqdii iyo danihii dadka Soomaaliyeed. Taasina Kacaankii 21kii Oktoobar curtey bay u sii gogol-xaareysey.

Kacaankuna markiiba isagoo fulinaaya danta Ummadda, buu hoggaanka u qabtay dhismaha bulshada hantiwadaagga ah ee cusub markiibana ma fududaysan dhibaatooyinka horyaal. Markaan Hantiwadaagga doorannay bulshadeennu waxay ka koobnayd reer miyi iyo beeraley garashadoodu aad u dambeyso. Si degdeg loo beddelo dadkaas arrin hawlyar ma ahayn. Waxaa taas soo raacay dhaqaalaha yar ee dalka oo ku jiray gacan shisheeye. Kacaanku si degdeg ah buu arrimahaas oo dhan xal ku haboon u raadiyey isagoo tijaabooyin dhowr heer ah sal uga dhigaya. Dawgii loo raacay fulinta mabda'a hantiwadaagga ah waxaan ku soo koobi karnaa: Arrin walba oo marka hore si qota dheer loo derso loona qaadaa-dhigo si aan loogu dhicin boholaha dhaan-raacnimada ama il-qaadashannimada oo keli ah.

Tan labaad, heerar kala duwan baa la soo marayaa sharribaadgelinta arrinta Kacaanka soo foodsaara iyadoo mar walba natiijada il feejigan lagu hayo. Tan saddexaad, si buuxda oo aan dadweynaha daah ka saarrayn baa loo hirgeliyaa. Kolka afaraadna si fiiro leh baa loola socdaa taabbagalka, iyadoo la hubinayo in habkaasi saldhig u noqon karo horumarka 'a higsanayo iyo in kale. Habka caynkaas ah waxaa tilmaan u noqon kara Ololihii Horumarinta Reer Miyiga. Kacaanku isagoo arrin kasta habkaas u fulinaya si weyn buu wax uga beddelay bulshada iyo dhaqaalahaba.

Jaallayaal, dhammaan waad xusuusan tihiin in Kacaanku dawladihii hore ka dhaxlay dhaqaale baaba' ah, deyn ciiddaa ka badan iyo saboolnimo aan la koobi karin. Waxaana guul aan marnaba la iska indha tiri karin ah in Kacaanku uu waqti aad u yar dhaqaalihii liitey u rogey mid nool oo firfircoon oo qorshe salka ku haya. Tan iyo 1973kii, sicirka alaabta dadku u baahan yahay aad buu u degganaa. Dakhliga beeraleydu si weyn buu kor ugu kacay tan iyo aasaaskii Wakaaladda Horumarinta Beeraha. Isla sidaas oo kale waxaa si door ah u kordhay dakhligii reer miyiga. Guud ahaan dakhliga guud ee shaqaaluhu waa kordhay, taas oo ay ugu wacan tahay tiradoodii oo badatay iyo joogtayntoodii oo la hirgeliyey. Maalgelinta qudheedu way xoogowday iyadoo caddaynaysa in awooddii dawladdu xoog sii yeelatay.

Haddaba, waad la socotaan, Jaallayaal, in dhaqaalaheenna oo si fiican madaxa u la soo kacay ay ka hor yimaadeen dhibaatooyin dabiici ah oo xad-dhaaf ahi. Abaartii Dabadheer dhaawac weyn bay u geysatay qaybaha kala duwan ee dhaqaalaheenna, oo ay ka mid yihiin beeraha iyo baadiyahaba ee 85% dadweynaha Soomaaliyeed ku nool yihiin. Middaasi khasab bay nagaga dhigtay inaan xataa masaggada iyo galleyda dibadda ka keensanno.

Haddaan soo koobo waxaan oran karnaa in abaartii dabadheer dakharro waaweyn u geystay 1974-1975, tacabka beeraha, taranka xoolaha iyo miisaaniyadda ganacsiga. Lacagta nooga baxday abaartii dabadheer waxay dhan tahay 502.160.828,00 shilin. Maalka nagaga khasaarayna uu ku dhow yahay 5 (shan) bilyan.

Sidaad ka warqabtaan, waxaa la furay (21) xero si loo badbaadiyo nafta dadka oo wax kasta nooga qiima weyn. Xeryahaas waxaa galay 268.000 ruux, in ka badan malyuun qofna dibadda ayaa gargaar lagu siinayey. Annagoo u mahadcelinayna dawladihii iyo Hay'adihii gacanta noo fidiyey, baan halkan ka caddaynaynaa in habka hantiwadaagga ahi yahay kan fakiyey jiritaanka dadkaas, maxaa wacay, wuxuu awood u siiyey ummadda Soomaaliyeed inay gacanta ku dhigto mas'uuliyadda aayatiinkooda.

Sicir kabidda oo keli ah waxaa sannadkii 1974-75 dawladda kaga baxay in ka badan 50 malyuun oo shilin. Dhaawacii inaga soo gaaray abaartii calaamadahiisu way inala socon doonaan. Sidaad ka warqabtaan qorshaha dhaqaalaha ee 1974-78, wuxuu saameynayaa 16 waaxood, lacagta loogu tala galayna waxay ahayd 3.8 bilyan oo shilin. Haddaba, sannadkii 1974kii waxaa la fuliyey intii ku tala galka ahayd 30.6%. 1975kii waxaa la fuliyey 28.1%. Halkaas waxaa laga qiyaasi karaa dibudhaca weyn ee abaartii iyo qaskii dhaqaalaha adduunku na soo gaarsiiyeen, iyo sidaan awooddeennii ugu jeedinnay la dagaallanka abaarta.

Warshado iyo beero waaweyn oo keli ah Kacaanku dhisi maayo ee wuxuu dhisayaa hab tiir u noqon kara dhaqaalaha bulshada hantiwadaagga. Maamul cusub ayaan hirgelinaynaa oo waxtar bulshada u leh.


Iskaashatooyin fara badan baan abaabulaynaa si dhaqaalaha loo hormariyo, teknoloojiyada looga faa'iideysto, garaadka siyaasigа ah ee xoogsatadana kor loogu qaado. Iskaashatooyinka waxaa laga abuuray xubno dhaqaaleed oo kala duwan.

Kacaanku xooggiisa ayuu saaray Iskaashatooyinka, himilooyinkii laga lahaana waa laga gaarayaa. Turaanturooyinka dibusocodku u dhigayo ma hakinayso, waana muuqataa kaalinta ay ka cayaari doonaan siyaasadda iyo dhaqaalaha si da ay u muuqato inay u noqonayaan Kacaanka tiirar aan la ridi karin. Intaa waxaa dheer mashaariicda ka socota beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumaysatada.

Sida laga wada warqabo dadka halkaas la dejiyey waxay dhan yihiin 125,000 qof, waxaana la hubaa inay mar dhow iyaguna sal adag u noqonayaan dhaqaalaha dalka. Mashaariic qaayo leh baa laga wadaa dhinaca xoolaha iyo biyahaba.

Sida laga warqabo sanooyinkan dambe khal-khal iyo xiiso dhaqaale ayaa adduunka ka dhacay sababaha dhaliyeyna waa qorshe la'aanta aasaaska u ah habka hantigoosiga. Dhibahaas wax door ah ayaa dunidii soo koreysay ka soo gaaray. Sicirradii cirka ku dhegay iyo sabbayntii lacagtu waxay keeneen jaha wareer iyo xasillooni la'aan ganacsi.

Sidii aan horeyba u sheegnay Kacaanku wuxuu ku dadaalay inuu yareeyo dhibaha arrimahaasu keeneen. Sicirradii ayuu xaddiday si ayan maalin walba kor ugu kicin. Khasaaradii ka timidna dawladdaa la wareegtay. Dadka mushaharka hoose qaatana 5% ilaa 10% ayaa loogu daray. Si dadweynaha loo gaarsiiyo cuntada lagama maarmaanka ah degmooyinka ayaa



mas'uul looga dhigay. Waxaa xaqiiq ah in tallaabooyinkaasi ahaayeen kuwo si wacan loogaga gaashaantay dhibihii la xiriiray shiddadii aynu kor ku soo sheegnay. Waxayna noqdeen kuwo guulo la taaban karo keenay. Waxaa kaloo inoo suurtagalay in sicirku dalka gudihiisa guud ahaan uu kor ugu kacay si macquul ah oo aad iyo aad uga yar sicir-kicii adduunka. Inkastoo dhibahaas iyo kuwo kaleba ay inaga hor yimaadeen, marna kama hakan fulitaanka arrimaha ku saabsan daryeelidda xoogsatada oo Kacaankuba u dhashay. Waxaa taas marag u ah sharciyadii isdabajoogga ahaa ee Kacaanku u sameeyey daryeelidda shaqaalaha.

Sharciyadaas waxa ka mid ahaa:

1. Sharciga lam. 5 ee 31-12-1969, oo lagu daryeelayey xuquuqda shaqaalaha dawladda.
2. Sharciga lam. 29 ee 1-4-1970, oo lagu hagaajinayo sharcigii hore ee u yiil shaqaalaha dawladda.
3. Sharciga lam. 26 ee 2-3-72, oo lagu joogtaynayey shaqaalaha dawladda.
4. Sharciga lam. 44 ee 19-7-1972, ee ku saabsan fasaxa caadiga ah.
5. Sharciga lam. 11 ee 14-10-1973, ee lagu daryeelayo danaha shaqaalaha farsamayaqaanka.
6. Sharciga lam. 29 oo lagu abuuray Guddiga Baarista Dacwooyinka shaqaalaha.
7. Sharciga Wakaaladaha dawladda.
8. Sharciga Wakaaladaha Badbaadada Shaqaalaha.
9. Sharciga shaqo-qorista.
10. Xeerka Qoyska.

Waxaa intaa dheer wareegtooyinkii iyo tusaalooyinkii faraha bad naa ee intaa ka soo baxayey Madaxtooyada GSK oo lagu daryeelayo danaha shaqaalaha (sida kan lagu dhisay Guddiyada Shaqaalaha).

Dhammaan hawlaha dhismaha ee hadda dalka ka socda waxay na tusayaan ballaarka iyo kala duwanaanta shaqooyinka loo baahan yahay in la fuliyo. Noocyada badan ee hawlaha iyo isku dubbaridkooda waxay marag u yihiin bislaadka Kacaankeenna iyo xoogga aan suuragelinnay inaan kicinno si loo gaaro himilooyinka ku qoran Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaankeenna. Hawlahaas kala duwan waxaa ka cad inta xubnood ee dhaqaalaheennu ka kooban yahay, qayb dawladeed, mid iskaashato, iyo mid gaar ahaaneed oo loo baahan yahay inay jirto dhaqaale hantiwadaag xilliga kala guurka. Rajooyinku waa fiican yihiin. Mustaqbalka waa in kalsooni lagu

qabaa iyadoo madaxa lagu hayo in socod kasta oo dheeri hal tallaabo ka bilowdo.

Waa in aynu ku fekernaa sidii loo dhisi lahaa dhaqaale dheelliti-ran oo awood u leh inuu kaafiyo baahideenna. Waa qalad weyn in aan hadda ka hadalno qaybinta degdegga ah ee waxaynu hayno oo hadda kooban iyo mushaaro ba-dis. Laakiinse waa inaynu ku so-connaa jidka ina gaarsiinaya tirti-ridda shaqa la'aanta. Waa guul in 6dii sannadood ee Kacaanku jiray la abuuray jagooyin shaqo oo ay shaqo ka heleen dad ka badan 148.000 qof. Kuwaas oo aanay ku jirin beelaha Danwadaagta iyo shaqooyin yaryar ee gaar ahaaneed. Waxaa isweydiin leh; intee xaas baa ka baxday foolxumadii gaaja-da iyo shaqo la'aanta? Haddii aan raaci lahayn siyaasad aragti gaa-ban ah oo taxgelinaysa danaha intii hore u shaqaynaysay keliya, weli-geen ma noqonneen hantiwadaag waxaan noqon lahayn xaasidiin iyo dhiigmiirato. Arrintaasi kama dha-cayso xaggeenna, maxaa yeelay, waxaan diidnay 1970kii, waxaynu-na ku adkeynay shirweynihii 1aad ee Ummadda.

Sidaan horeyba u soo sheegay dad fara badan ayaa shaqa helay inkasta oo ay weli jirto shaqo la'-aan badani. Si looga baxo arrin-taas ma fududa, waxayna ku xiran tahay koboca dhaqaalaha, kor u qaadista aqoonta, xoojinta tekno-loojiyada iyo kor u dhigidda wac-yiga siyaasiga ah ee dadka. Arrin-taas oo dhan xoog ayaa la saaray. Dhinaca waxbarashada tallaaboo-yin waaweyn ayaa laga qaaday. Meel walba maanta dugsi ayaa ka furan. Tusaale ahaan ardada tira-deedu waxay ahayd 1969-1970, 55,023; 1975-76 waxay ahayd 231,753. Intaas waxaa ka maqan waxbarashada aan tooska ahayn iyo midda la xiriirta joogtaynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga.

Waxaa kale oo faan inoo ah in Jaamacad la dhisay, lana balaari-yey, dugsiyo badan oo teknika ah la furay qaar kalena qorshaha ku jiraan. Waxaa keli ah oo u baahan xusuus kharashka faraha badan oo waxbarashada la xiriira. Dhinaca kor u dhigidda wacyiga siyaasiga ah meel wanaagsan ayuu marayaa. Taasi waxay ka muuqatay Shir-weynihii Kowaad ee Ummadda iyo shirarka is dabajoogga ah ee xub-naha kala duwan ee bulshada in-taas isugu imaanayaan, oo uu ugu dambeeyey shirweynihii labaad ee shaqaalaha Soomaaliyeed. Sida la-ga warqabana Shirweynihii Koo-waad ee Ummadda waxaa ka soo baxay go'aanno lagu tilmaamayo tallaabooyinka ay tahay in la qaa-do si lagu fuliyo danaha bulshada. Go'aannadaasi waxay u kala ba-xaan 23 saameynaya siyaasadda, 49 dhaqaalaha iyo 16 bulshada.

Shirka labaad ee shaqaalaha go'aannadii ka soo baxay waxay xoojinayaan fulinta kuwii shirwey-nihii 1aad ee Ummadda. Door weyn waxaa ka qaatay kicinta dad-weynaha Xafiiska Siyaasadda Ma-daxtooyada GSK, iyo Ololayaashii isdabajoogga ahaa, ha ugu dambee-yo kii Horumarinta Reer Miyiga, fulintiisii iyo joogtayntiisii.

Tallaabo kasta oo waxtar lihi waxay la timaaddaa dhibaheeda waxay dhalisaa kharaj cusub. Daw-lad shacbi ahina mas'uuliyaddaas kama dhuumato ee waxay degdeg ku raadisaa muruqii iyo maalkii, tallaabooyinkaas lagu fulin lahaa, wixii ay la yimaadeen-na looga hortegi lahaa. Dawladda JDS, si wanaagsan bay uga soo bax-day waajibaadkaas, dadkeennuna waa isku dubbadhacay, waana gartay inay tahay waajibaadkiisa taariikhiga ah inuu falankeed galo sidii uu degdeg uga bixi lahaa dib-jirnimada dhaqaalaha.

Waxaa isweydiin leh maamul-ka xubnaha dhaqaalaha iyo kuwa kaleba ma u dhisan yihiin si dad-kaas habaysani ugu fushadaan hi-milooyinkooda? Waxaan leennahay haa, welise waxbaa ka dhiman. Kacaanku aad buu wax uga qab-tay maamulka, isagoo og sidii ka soo baxday Shirweynihii Koowaad ee Ummadda, in farsama maamul oo la kacaaneeyey hub u tahay kordhinta tacabka dhinac kasta ha ahaatee, iyo ka dhiidhiga xannaa-nadarrida hantidada dadweynaha, Kacaanku wuxuu mideeyey maa-mulka waddanka wuxuuna fudu-deeyey maamulidda Gobollada iyo xubnaha kala duwan ee dhaqaala-ha, wuxuuna ku dadaalay sidii maa mulkeenna looga xoreyn lahaa fik-radaha dibuscoodka iyo qabiilka, isagoo sharciyo adag, ololayaal iyo hanuunin isdabajoog ah sal uga dhigaya. Waxaa kale oo la qaaday tallaabooyin lagaga saarayo maa-mulka ninkii la hubiyo inuusan la socon karin himilooyinka Kacaan-ka. Intaas oo jirta waxa hubaal ah inuu dhaliil ku jiro maamulka dalku. Arrintu ma aha mid fudud, ma aha mid khaas ku ah dalkeenna, waa dhibo ay soo wada mareen dalalka hantiwadaagga ahi.

Kuwa hantigoosadka ah arrima-haan la iskuma hayo, maxaa yee-lay, waxay ku dhisan yihiin isku dul-noolaasho, xoogsatadooduna jid kale uma furna oo aan dagaal ahayn si ay ku beddelaan habkaas foosha xun. Dalalka Hantiwadaag-ga ahi qalabka wax soo saara wa-xaa leh ummadda, waxaana loo maamulaa sida ugu fiican ee lagu Fulin karo danaha dadweynaha. Habka Hantiwadaagga ma jiro ma-na jiri karo iska hor imaad maa-mul iyo shaqaale. Marka waxaa dhaliisha keenaya waa turunturro

loo dhigaayo qawaaniinta nidaamyada xiriirka tacabka bulshada hantiwadaagga ah. Dhaliilkaasi inuu jiro waxaa marag ka ah warshado iyo wakaalado badan oo tacabkii meeshii aan rabnay uusan gaarin ama kuwa qas iyo lab ka bixi waayey. Waxaas oo dhan waxaa sal u ah: (1) Maskaxda dadkoo dhan oo aan isbeddelin; (2) Aqoonta oo aan heer sare gaarsiisnayn; (3) Is-aqoon la'aanta dadka horusocodka ah oo dhalisay tuhun iyo kala biqid.

Waxaa isweydiin leh sidee lagu xallin karaa dhibahaas. Intaan laga jawaabin waa in aannu isla garannaa in dhibahaasu ayan ahayn kuwo kala geynaya xubnaha tacabka ku lug leh, maxaa yeelay, iska hor imaadkii aasaasiga ahaa waxaan guud ahaan ku xallinnay 7dii Maajo 1970kii. Midda kale waa in aynu isla garannaa in dadka maamulka iyo shaqaaluhu mid qura yihiin. Halkaas waxaa ka cad in dhibahaasu yihiin kuwo aan qoto dheerayn, inay yihiin dhibo sahlan oo la buunbuuninayo. Waxaannu u jeednaa in kacaanka siyaasaddiisa la iska hor keenayo, si naloo habawsho, taasina ma dhici karto, maxaa wacay, Kacaanku waa hanaqaaday. Marka aan intaas garanno baan xal sax ah u heli karnaa mashaakilka maamulka xubnaha kala duwan. Dhinaca kalena waxaa jira in shaqaaluhu marar badan arrin yar weyneeyo oo mug ayan lahayn siiyaan, kuwaasoo si Jaallannimo loo xallin karayo. Marka dhaliishu dhinac walba waa jirtaa. Sida keli ah oo loo xallin karo arrintaas waa kor u dhigidda wacyiga siyaasiga ee dadka iyo sii hagaajinta maamulka dalka. Labadaas arrimoodna faraha ayaa lagu hayaa.

Waxay ila tahay inaannu si sugan oo habboon u darisno sidii lagu xoojin lahaa Ururrada Ijtimaaciga ah ee bulshada sida kan shaqaalaha, kan dhallinyarada, kan haweenka iyo kan iskaashatooyinka, si aynu tiirka ugu taagno habsamida shaqooyinka koox kasta gaar u ah.

**GABAGABO:**

Markaan si cad uga soo hadlay siyaasadda dhaqaalaha iyo tan bulshada ee dalka muddooyinkii aan soo gudubnay, waxna ka taabtay marxaladda taariikhiga ah ee adduunku marayo, waxay ila tahay in aan soo uruuriyo arrimaha lagama maarmaanka ah si aan himilooyinkeenna dhaqaalaha siyaasadda iyo bulshada si habsami ah u hirgelinno. Waddadu waa dheertahay waana ay dhib badan tahay; waxaa ka bixi kara gaa rina kara guulihii aan tilmaamay dad ay midaysan tahay fikraddooda iyo ficilkoodu, si geesinnimo, isku kalsooni ahna, qorshe hagaagsani ku dhisanna ku fuliya daryeelidda aayahoda dambe.

Waxa lagama maarmaan ah in xogsatadu horseed u noqoto halganka dheer ee lagu dhisayo siyaasadda iyo dhaqaalaha ee bulsha da hantiwadaagga ah. Wakhtiga hore ee dhismaha bulshada hantiwadaagga ah horseedkeedu (Xoogsatada) danta gaar ah meel bay iska dhigtaa tan guudna dhexday u xirtaan. Qofka shaqaalaha ah wakhtigaa isaga ah ee mid ah kan dad keennu marayo maantay wuxuu ka walwalaa sidii uu ugu abuuro kan suuqa jooga shaqo ka dhalanaysa maskaxdiisa muruqiisa iyo maal la uruuriyey kana xoreeyaan dhaqaalaha iyo siyaasadda dalka ku hoosjiridda kan ajnabiga ah

Waxay ila tahay in xoogsatada Soomaalidu, iyagoo isku duuban ay tixgelinayaan fikradahaas saxa ah, oggolaanayaan mas'uu[illegible]yadda taariikhiga ah ee ka saaran [illegible]madda faraha badan ee sha[illegible] la' kuna dadaalayaan sidii ta[illegible] soo saarka dalka ay ku kordhin [illegible]haayeen. Si tacab - soo - saarku ugu fududaado waxaa lagama maarmaan ah, in ay u soo jeestaan dhammaantood kor u dhigga garaadkooda siyaasiga ah. Waxaa lagama maarmaan ah in ay indha dheer u yeeshaan dibusocodka qarsoon iyo kan muuqdaba, dabadhilifyada iyo biroqaraatiyaasha isticmaarka u adeega, una daafacaan si geesinnimo ah miraha Kacaanka ay horseedka u yihiin. Waa in ay aqoonsadaan midabyada kala duwan ee isticmaarka iyo dabadhilifyadiisu ay hadba la soo baxayaan: Waa in ay kala gartaan saaxibkooda iyo cadowgooda. Waa in ay si dhab ah u fahmaan waajibaadka ka saaran calanka, xoojiyaanna xiriirka ay la leeyihiin xoogagga horusocodka ee adduunka.

Waxa lagama maarmaan ah in aan halka ka sheego anoo huba in aanan gafsanayn guulihii isdabajoogga ahaa oo ay soo hooyeen dadweynha iyo xoogsatada Soomaaliyeed lixdii sano ee Kacaanku dalka maamulayay, uguna mahadceliyo magaca Ummadda Soomaaliyeed meel ay joogaanba guulahaas iyaga ah, anigoo ay ii sugan tahay inay sii wadi doonaan ilaa aynnu gaarno himilooyinkeenna.


Xoogsatada adduunku ha noolaato
Xoogsatada Soomaalidu ha noolaato.

*Hantiwadaagga ha waaro.*

*Soomaaliya ha noolaato.*

*Isticmaarka sahyuuniyadda Caalamiga iyo midabtakoorku ha dheceen.*

# Khudbaddii uu Jaalle Siyaad u Jeediyay Dhallinyarada Soomaaliyeed oo u Dabbaaldegey Sanadguuradii Labaad 15 ka Maajo



# Jaalle Siyaad: Dhallinyarada Soom-aaliyeed waa inay ka Feejignaadaan Fikradaha Dhaqanguurka ah ee BURJUWAASIYADDA

**Si farxad ku sugan ayaa looga damaashaaday Gobollada iyo Degmooyinka uu dalku ka kooban yahay 15kii Maajo ee ku aaddanayd dorraato.**

**Muqdisho oo ah caasimadda dalka Soomaaliya waxa gegida kubbadda Cagta isugu yimid dhallinyaro aad u tiro badan iyo dadweynaha intiisa kale ee deggan magaalada iyagoo xusaya «Maalintii Dhallinyarada».**

**Xafladdaas qiimaha lahayd waxa ka qayb qaatay Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre iyo Madaxda dalka.**

**Khudbaddii munaasabaddaa ku saabsanayd ee uu Madaxweynuhu ka jeediyey oo dhan waxay ahayd sida tan:**

Jaallayaal,

Waxaa sharaf iyo farxad ii ah inaan ka soo qaybqaato dabbaaldeggan lagu xusayo sannadguurada 33aad ee abuuritaankii Ururkii Dhallinyarada Soomaaliyeed, waxaan isla markaa salaan iyo hambalyo diirran u soo gudbinayaa Dhallinyaradda iyo Dadweynaha Soomaaliyeed ee halkaan isugu soo uruuray iyadoo aan dareensiinaayo inay maalintani u ahaato guubaabo ay ku gutaan, fuliyaan waajibaadka iyo xilka horyaalla ee waxtarka u leh dhismaha bulshada han tiwadaagga ah ee Dhallinyaradu horseedka u tahay.

Waxaan kale oo aan jeclahay inaan xuso dadkii, halyeeyadii, geesiyadii naftooda u huray daryeelka danaha dadweynaha Soomaaliyeed. Waxaa tilmaan mudan 13kii dagaalyahaan ee dhigay aasaas kii Ururkii dhallinyarada Soomaali yeed ee qaarkood galabta halkaan inala joogaan.

Dhallinyarada Soomaaliyeed waxay soo martay tijaabooyin farabadan oo si aada loogu aayey mirihii iyo natiijooyinkii ka soo baxay.

Jaallayaal, dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka Soomaaliyeed wuxuu ahaa mid ka dhashay gumeysigii shisheeyaha ee sandulleeyey, cadaadiyey, adoonsaday Ummaddeenna. Tan iyo maalintii isticmaarku cagta soo saaray dalkeenna dadweynaha Soomaaliyeed halgan iyo dagaal qadhaadh ayey kala hortageen. Dhallinyarada Soomaaliyeedna waxay ahaayeen halbowlaha horseedka taasi ayaa keentay inay noqdaan dablaydii iyo gaashaan-qaadyadii dhaqdhaqaaqii Daraawiishta, inay ahaadaan kuwii aan marnaba la baqaynin naftooda iyo awooddooda ee had iyo jeer heegan u ahaa hirgelinta himilooyinka Ummaddooda.

Si wax looga qabto arrimahaas oo idil waxaa loo baahan yahay in taxliil iyo falanqeyn cilmi ah lagu sameeyo waayaha jira iyo dhibaatooyinka yaalla ee addunweynuhu ku sugan yahay, gaar ahaan dalka soomaaliyeed.

Jaallayaal, adduunku wuxuu maanta joogaa waqti gabbalkii Imberyaaliyaddu sii dhacayo, hantiwadaagguna guuleysanaayo; waqti gumeysi, isku dulnoolaan iyo cadaadiis ifka ka dhammaanayo; caddaalad, sinnaan iyo nabad adduunku u siman yahayna dhalanayso.

Xooggagga Imbeeryaaliyaddu marba marka ka dambaysa bay sii itaal darraynayaan, xoogagga hantiwadaagga, xornimada iyo horumarkuna mar walba laxaad baa u sii kordhaaya. Maanta adduunku saddex dalool meel baa hantiwadaag ka dhisan yahay. Hubaal waxaa ee in hadda xoogagga horusoco dka ahi taariikhda ka gacan sarreeyo. Waddannada hantiwadaagga waxay gaareen guula waaweyn xagga dhaqaalaha, siyaasadda iyo militerigaba, arrintaas oo sal u noqotay isbeddelka aynu ifka ku aragno.

Waxaa xus gaara leh kaalinta ay ka qaataan Dhallinyaradu dhismaha iyo horumarka dalalka hantiwadaagga, kuwaasoo had iyo jeer adkeeya waxbarashadooda, si dhab ahna uga faa'iideysta fursadda waxbarashada iyo kororsiimada cil miga heer kasta iyo nooc kastaba. Waxaana ka jira maanta dalalkaas dhallinyaro farabadan oo xeel dheeryaal ku ah Laamaha cilmiga ee kala geddisan. Isla markaa waxay qayb libaax ka qaataan dhismaha mashaariicda horumarinta dalalkooda, waana kuwa had iyo jeer horseedka ka ah, loona xilsaaro xaqiijinta hawlaha ugu ad-adag, sida jeexidda weybiyaasha, qodidda waddooyinka dhulka hoostiisa ah iyo kuwa Tareenka; dhismaha Warshadaha culus, beeridda iyo qoynta beeraha iskaashatooyinka iyo kuwa kaleba iwm. Waxaa kale ay gacan weyn ka geystaan kaalmada dalalkaasu u fidinayaan xoogagga horusocodka ah iyo dalalka dhisaya mustaqbalkooda, iyagoo cuskanaya mabaadii'da isbahaysiga xoogaggg horusocodka ah ee dunida.

Dhaqdhaqaaqa shaqaalaha dalalka hantigoosiga ku nool iyo axsaabtoodu waxay soo hooyeen libo tiro badan kana muuqata Ururradii dibusocodka ahaa oo hadda kalsoonidii dadku ka hallowday, xukinkiina farahooda ka sii baxayo. Halkaa waxaa ahmiyad gaara leh in la tilmaamo Dhallinyarada dalalkaasi wareerka iyo walaacowda ay ku jiraan, iyagoo ka danqanaaya, kana dhiidhinaya nidaamyaya fooshaxun ee ka dhisan waddammadaas inkastoo nasiib-dar-

ro, aysan aqoon u lahayn habka hantiwadaagga ah ee looga bixi karo kadeedka, caddaalad li'ida iyo isku dulnoolaadka; si runta ka fogna loogu sawiro, lagalana dagaallamo garashadiisa iyo dhaqange lintiisa, taasoo dhallinyarada dalalkaasi khasab kaga dhigtay inay habab kala geddisan kala soo horjeestaan nidaamyada lagu hoggaaminayo dalalkooda, sida ansha- xu mida, liididda tacliinta iyo u noqodka noloshii billawga ahayd. Haddana dhallinyaradu waa horseedka xoogagga ka soo horjeeda gardarrada imberyaaliyadda caalamiga ah; waayo, iyagay toos ugu dhacaysaa dhibaatada hantigoosatada iyo imberyaaliyaddu ka geysanayso dalkooda iyo dibaddaba; sida shaqo la'aanta, argagixisooyinka iyo dagaallada gardarrada ah ay dunida kale ku qaadayaan qaybwayna ka qaataan guuldarrada goor iyo ayaan haleelaysa gumeysiga iyo imberyaaliyadda.

Dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka ee waddamada Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika guulo badan oo ay ka mid yihiin dalal badan oo xornimadoodi gaaray, dhaawaca xunna u geystay dibusocodka gudaha iyo ka dibedda; isla markaana ku dhaqaaqay sidii ay u xaqiijin lahaayeen xornimo dhaqaale iyo bulshannimo, iyagoo doortay jidka hantiwadaagga ah, dharbaaxooyin kululna ku dhuftay danihii dhiigmiiratada monoboolka adduunka laakiin waxaa lagama maarmaan ah in dhallinta dalalka soo koraaya, gaar ahaan kuwa Afrika sii xoojiyaan horseednimadooda ay ku soo dhiciyeen madaxbannaanida siyaasiga ah, adkeeyaana uruursanaantooda, midnimadooda dhan walba ka hubaysantooda (aragtida iyo aqoonta) si ay uga gilgishaan kebedda gumeysiga cusub, una gaarsiiyaan waddammadooda xorriyad buuxda iyo horumar deg-deg ah.

Waana inay si gaara uga feejignaadaan fikradaha dhaqanguurka ah ee u midiidimaya afkaarta burjuwaasiyadda iyo imberyaalidda caalamiga ah; kuwaasoo doonaya inay ku indhasarcaaddiyaan nolol dhalanteed ah, si doqoni-ma-garata ahna ugu hor gurtaan kheyraadka dalalkooda.

Jaallayaal, inkastoo ay guulo iyo libo farabadan gaareen dadyowga horusocodka ahi ee dunida, isla markaana isticmaarka iyo imberyaaliyaddu ku hoobteen goobo badan oo dunida ah, taasi macnaheedu ma aha in imberyaaliyaddii isdhiibtay; ee si joogta ah waxay isugu dayeysaa inay joojiso hakisana socodka taaraakhda ee dhinacooda ka janjeraa, tusaale waxaa u ah arrinta mu'aamaraadka, shirqoollada iyo faragelinta tooska ah ee ay ka wadaan dunida. Muddadan dambe, kaddib markii ay tijaabiyeen awoodda xoogagga horusocodka, waxay dareemeen khatarta ay danahoodu ku sugan yihiin. Taasaa dhalisay in maalin walba imberyaaliyadda caalamigu iyadoo haab-haabanaysay, xumbada cuskanaysa ay had iyo jeer dacaayado beena uga faafinayso Kacaanka Soomaaliyeed ee Horseedka u ah dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka iyo Kacaanka Qaaradda Afrika.

Gumeysiga iyo imberyaaliyadda caalamigu iyagoo raba inay dumiyaan go'doomiyaan tirtiraanna halganka xaqa ah ee ay wadaan dadka Xeebta Soomaaliyeed, ayey duullimaad badheedh ah ugu soo qaadeen Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed hase yeeshee gobannimadoonka Xeebta Soomaaliyeed iyagoo ku hiranaya, higsanayna waddada xorriyadda, madaxbannaanida, la dagaallanka gumeysiga, ayey heegan u yihiin inay xaqiijiyaan himilooyinkii sannadahanba ay u soo dagaallamaayeen, waxaana marnaba shaki galeyn, mugdina ku jirin socodka taariikhduna qaadanayn inay oggolaadaan dadka Xeebta Soomaailiyeed gobannimo maqaarsaar iyo dhalanteed ah.

Kumaankunkii iyo boqollaalkii qof ee sadqada u noqday halganka gobannimadoonka Xeebta Soomaaliyeed maaha mid la hilmaami karo, maatadii aabbayaashood la laayey, la xiray, la soo masaafiriyey maaha wax la illaabi karo, siligga korontaysan, dadka la kala xirxiray, shisheeyaha lagu soo daadgureeynayo ma suurowda in la iska indha tiro, dabadhilifka imberyaaliyaddu soo dirayso ee sida nacasnimada ah dabinka ugu dhacaaya iyana maaha mid aan la dhaadayn.. Waxyaalahaasi oo idil ayaa guubaabo u ah dadka Xeebta Soomaaliyeed, isla markaasna ku dhiirrigelinaya kalsoonida ku abuuraaya, sidii ay ugu jilib dhigi lahaayeen ka hortagga dhibaatooyinkaasi, una hanan lahaayeen xorriyaddooda, iyagoo si madaxbannaan uga talinaya aayahooda.

Dhammaan dadweynaha Soomaaliyeed si bisil ayey ula socdaan diyaar iyo heegan ugu yihiin inay si buuxda oo hiil iyo hooba ah u kaalmeeyaan dadka Xeebta Soomaaliyeed ee ku hoos nool gumeysiga fooshaxun, naxariista daran ee Faransiiska ee ka tala qaadanaya imberyaaliyadda caalamiga ah.

Sidaasi daraaddeed, maadaama aad tihiin dhallinyaradii Soomaaliyeed ee ku caan baxday geesinnimada, waddaninnimaad iyo kacaannimada, waxaan idinku guubaabinayaa inaad maskax iyo muruqba u diyaar ahaataan xaqiijinta yoolka kacaanka, midnimada ummadda

Soomaaliyeed, heeganna u ahaataan kaalmo-u-fidinta dadka Xeebta Soomaaliyeed ee sida doora ugu baahan.

Haddii aan u soo guda galo Kacaanka Soomaaliyeed iyo kaalinta ay tahay in dhallinyaradu ka qaadato taabbagelinta mabaadi'da kacaanka, waxaan oran karaa Kacaanka Soomaaliyeed, kaddib lix sano iyo badh, wuxuu galay marxalad cusub, wuxuuna abuuray xiriir dhaqaaleed iyo bulshadeed oo salka ku haya aragtida hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, la dagaallanka isku kornoolaadka nooc kastaba ha noqdeene, ka hortagga imberyaaliyadda, si wadajir iyo naf huridnimo ahna uga hortagayaan dhibaatooyinka ka horyimaada, islana jeexaan habka iyo qaabka looga gudbayo dhibaatooyinkaasi.

Waxaa isweydiin leh halkee bay dhallinyarada Soomaaliyeed kaga jirtaa halgankaasi sida tayeeda leh ee loogu beddeleyo bulshada? Haddii taariikhda aynu dib ugu noqonno waxaynu arkaynaa in ay dhallinyaradu ahaayeen kuwii horseedka u ahaa halgankii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, abuurayaashii iyo hoggaamiyeyaashii Ururkii Dhallinyarada ee soo dhiciyey gobannimadii siyaasiga ahayd ee la gaadhay 1960kii.

Dhalashadii Ururka Dhallinta Soomaaliyeed ma ahayn mid iskeed isaga timid, ma ahayn mid riyo ku abuurantay ee waxay ahayd natiijo mawduuci u ahayd bislaanshihii iyo halgankii dadweynaha Soomaaliyeed. Dadkeennu dagaal qadhaadh oo ku xusan bogga taariikhda ayey u soo mareen xornimadooda iyo madaxbannaanidooda, waxaana dhammaantiin ogsoon tihiin in 33 sano ka hor, maanta oo kale la dhisay ama la aasaasay «Naadigii Dhallinyarada Soomaaliyeed», kaas oo ku shaqeynayey mabaadi'da ah: (1) midaynta qaranka Soomaaliyeed; (2) La dagaallanka qabyaaladda iyo koox-kooxaysiga; (3) iska xoreynta gumeysiga; (4) isla markaana ka talinta aayahooda. Kuwaasoo soo nooleeyey xamaasaddii waddaninimo ee dadka Soomaaliyeed, kana tirtiray meel kastoo ay joogaan kala firirsanaantii, qabyaaladdii iyo isnacaybkii.

Jaallayaal, waxaa lagama maarmaan ah inaynu xusuusanno siday muddo gaaban u kiciyeen una mideeyeen halganka dadweynaha Soomaaliyeed iyo ka tirtiridda dhaqamadii habowga ahaa. Innagoo si gaara u xusayna maanta geesiyaashii Calanka dhallinta Soomaaliyeed hoostiisa ugu geeriyooday soo dhicinta gobannimada.

Waxaan ogsoonnahay, Jaallayaal, imberyaaliyaddu inay beddeshay tabihii iyo qaabkii markii ay xaqiiqsatay in lagu gartay looguna dulqaadanaynin siyaasaddoodii gabowday.

Waxayna weerar qaraar ku soo qaadeen Ururkii Dhallinyarada Soomaaliyeed, kuna soo nooleeyeen waxyaabihii foosha xumaa ee ay horey bulshada uga tirtireen, taas oo gaarsiisay in ay ka lunto kalsoonidii dadweynaha markii ay gobannimadii siyaasiga ahayd hoggaanka u qabteen kuwo aamminay isticmaarka cusub, beddeleenna ujeeddadii halganka ururkaas. Waxaa cabashadii dhallinyarada, guubaabadoodii iyo dagaalkoodii joogtada ahaa waddada u xaaqay dhalashadii Kacaanka 21kii Oktoobar 1969kii.

Jaallayaal, waxaan garwaaaqsanahay inaan ku sheegay khudbaddaydii maalintii Kacaanku dhashay in «Kacaankani yahay mid soo nooleynaya siyaasaddii dhallinyaradii Soomaaliyeed ee la weeciyey». Had iyo jeer dhallinyarada Soomaaliyeed waxay ahaayeen kuwii sida tooska ah uga soo horjeeday taliskii dibusocodka ahaa ee dalka maamulayey 9kii sano ee ka horreysay Kacaanka. Dhallinyaro fara badan ayaa sadqo u noqday taliskii aan daryeeleyn danta dalkooda ee fulinayey awaamirta iyo siyaasadda isticmaarka cusub.

Jaallayaal, Kacaankii curtay 21kii Oktoobar 1969kii wuxuu xaa shi cusub u furay dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuuna ku soo celiyey kalsoonidii ka laalantay, wuxuu u gogol xaadhay siday ku dhaqan gelin lahaayeen tabarta awoodda iyo aqoonta ay leeyihiin, wuxuu ku daadihiyey waddadii gaarsiinaysay himiladooda, waxaa fursad loo siiyey dhallinyarada in ay wax bartaan, shaqa helaan, garaadkooda siyaasiga iyo aqoon farsamaadkooda kobciyaan.

Si dhallinyaradu ugu qalanto horseednimada dadkooda waxaa lagama maarmaan ahayd inay leeyihiin hadaf siyaasi ah ee qeexan, kaasoo ah mabda'a hantiwdaagga cilmiga ku dhisan, oo si fiican loo barto loona garto si wanaagsan si fiicanna loo dhaqan geliyo.

Maanta way muuqataa xilkasnimada ay kaga soo baxeen waajibaadkii Kacaanku hordhigay, tusaale waxayn u qaadan karnaa sidii qaayaha iyo qiimaha lahayd ee ay uga qayb qaateen OHRM, Gargaarkii abaarta iyo Dejinta, Barwaaqeynta Beesha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada Hawlahaas iyo guulihii ay ka soo hooyeen waa kuwo ku dhigmay taariikhda ummadda Soomaaliyeed, kuna qoran far dahab ah oo u noqota da'da dambe tusaale ay higsadaan, kana dab qaataan.

Halkan laguma soo koobi karo waxyaalaha Kacaanku u qabtay dhallinyarada, inkastoo ay warbi-

xintoodii meeshaan laga akhriyey si fiican uga muuqdeen, hase yeeshee waxay igula habboon tahay in aan wax ka taataabto dhowr arrimood oo aan u arko in ay yihiin halbowle:

— Ceel Jaalle, oo ujeeddada laga leeyahay ay tahay in dhallinyarada lagu beero ruux bulshannimo, wadajir iyo is-abaabul;
— Dugsiga Xalane, oo loo sameeyey in lagu baro, carbiyo laylistiro dhallinyarada dhammaystay waxbarashadooda, si ay awood ugu helaan daafacaadda iyo ilaalinta dalkooda hooyo. Kacaan waliba wuxuu awood iyo xoog yeeshaa markuu kari karo inuu isdaafaco, waxay muddadaa si fiican u bartaan qawaaniinta guud ee mabaadi'da hantiwadaagga iyo habka maamulka iyo maareynta;
— Abuuridda iyo ballaarinta Jaamacadda Ummadda, oo looga jeeday in si sugan looga haqab beelo baahida hawlkareennada, lagalana dagaallamo dhallinyarada dhaqanguurka;
— Shaqo-siinta, oo dhallinyarada lagaga xoreeyey ku tiirsanaantii reerka iyo qabiilka;
— Qoraalka Af Soomaaliga oo u hawlyareeyey dhallinyarada in ay si sahal ah u dhuuxaan bartaanna cilmiga, isla markaana ku hormariyaan suugaanta, hiddahooda iyo dhaqankooda.

Haddaba, Jaallayaal, gaar ahaan dhallinyarooy, iyadoo aan cuskanayno waayaha dalkeenna iyo dunidaba, waajibaadka iyo xilka ina horyaalla, waxaan farayaa dhammaan dhallinyarada Soomaaliyeed:

— Inay naftooda u huraan xaqiijinta hantiwadaagga, jecaylka dalka hooyo iyo barwaaqeynta ummadda Soomaaliyeed;
— Inay dhaadaan, dhadhansadaan qiimaha aqoonta, isla markaana garwaaqsadaan heerka waxbarashadooda (Cilmiga iyo Farsamadaba);
— Inay ilaaliyaan, daafacaan, dhowraan xoolaha ummadda, korna u qaadaan heerka noloshа dadka;
— Inay u hagar baxsanaadaan si xilkasnimo iyo aqoon lehna u gutaan hawlaha dalka ka socda ee waxtarka u leh horumarinta dadweynaha Soomaaliyeed;
— Inay yeeshaan aaminnimo, runnimo, nadiifnimo, kibir iyo isla weynaan la'aan;
— Inay si aada ugu bislaadaan waajibaadka waddaniga ah, ayna u dulqaadan, raallina ka noqon in waxyeello loo geysto danaha bulshada;
— Inay si wadajir ah, iskaashi iyo jaallannimo u gutaan hawlahaas oo ruux waliba ka kale naftiisa u huro;
— Xidhiidh bani-aadannimo inay kula dhaqmaan dadka;
— Inay aad u ixtiraamaan waalidkooda iyo saaxiibbadooda, si doorana u dhaqaaleeyaan, gacan qabtaanna carruurta iyo maatada;
— Inay la dagaallamaan anshaxxumida, dhaqan-xumida, beenta iyo sifooyinka kharriban oo dhan;
— Inay la dagaallamaan caajiska, shaqa-nacaybka, googooyska, faanfaanka iyo jago jacaylka;
— Inay dagaal qadhaadh ku qaadaan imberyaaliyadda, afkaarta isku kornoolaadka, gumeysiga, midabtakoorka, dibusocodka, iwm;
— Inay si aan naxariis lahayn ula dagaallamaan qabiilka, eexda, qaraabakiilka, afmiinshaarnimada iwm;
— Inay kayd u noqdaan shaqaalaha, isuna carbiyaan hoggaanka dalka;
— Inay taageero buuxda oo hiil iyo hooba ah u fidiyaan dhammaan xoogagga horusocodka, dimuqraadiyadda, hantiwadaagga iyo nabadda adduunka;
— Inay qeyb laxaad leh ka qaataan mashaariicda iskaa wax u qabso;
— Inay tusaale wanaagsan u noqdaan da'aha soo koraya, hantaanna waayo-aragnimadii da'ihii ka horreeyey.


Markaan soo gebagebeeyo, waxaan hubaa in dhallinyarada Soomaaliyeed ay waqtiga foodda innagu soo haya ay dhismada dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada qaayb weyn ka qaadan doonaan.

Soomaaliya ha noolaato;
Kacaanku ha waaro;
Dadkii u geeriyooday xornimada Allaha u naxariisto;
Dhallinyarada Soomaaliyeed ha waareen;
Haweenku waa saldhiggii bulshada Soomaaliyeed;
Shaqaalahu waa lafdhabarkii dadka Soomaaliyeed;
Ciidammada Qalabka Sida waa gaarhayihii midnimada, xornimada shacbiga Soomaaliyeed;
Dhallinyaradu waa horseedkii dadka Soomaaliyeed;
Beeraleydu waa noloshii bulshada Soomaaliyeed;
Guulwadayaashu waa ilaaliyayaalkii miraha Kacaanka;
Ubaxu waa quruxda waddanka ee maanta iyo qoodhii bulshada berrito;
Dhammaan ummadda Soomaaliyeed waa halbowlihii hoggaaminayey horukaca bulshada, xoojinayey jiritaanka qarannimada Soomaaliyeed iyo barwaaqaynta dalka iyo dadka.

# 13kii Halyey ee Asaasay Ururkii Dhallinyarada SYL



Dheere Xaaji Dheere



Maxamad Cali Nuur



Maxamed Cabdulle Xaasan



Yaasiin Xaaji Cusmaan



Cabdulqaadir Sakhaawaddiin



Cali Xasan Maslax




Khaliif Hudo Macallin



Maxamad Cismaan Baarbe




Maxamed Faarax Hilole



Cismaan Geedi Raage



Xaaji Maxamad Xuseen



Siidiin Xirse Nuur



Daahir Xaaji Cusmaan

**Taariikhdu waa Dhaxal aan Duugoobin, qofkii ummaddiisa wax muugda u qabtana waligii ilaawi meeyso taariikhdu**

# Guddiga khaaska ah ee UMA ee arrinta Xeebta Soomaaliyded oo la kulmay Jaalle Siyaad, Madaxda Dawladda iyo J. Xoreynta X. Soomaaliyeed



NA) — Madaxweynaha GSK, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, wuxuu Xafiiskiisa ku qaabbilay Guddigii Khaaska ahaa ee Ururka Midowga Afrika (UMA) u qaabbilsanaa Arrimaha Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto.

Jaalle Siyaad oo hadal gaaban u jeediyey Guddigaa wuxuu ugu horrayntii isagoo ku hadlaya magaca GSK, kan Golaha Xoghayayaasha iyo dadweynaha Soomaaliyeed ku soo dhoweeyey dalka J.D.S. Macallinka Kacaanku wuxuu yiri: «Waxaan aad ugu faraxsanahay intii aad joogteen dalkeenna inaad kala kulanteen soo dhoweyn wanaagsan inkastoo muddo yar aad joogteen».

Kolkaa kaddib, Jaalle Siyaad wuxuu si qoto dheer Guddigaa ugu qaadaa dhigay siyaasadda dawladdeenna Kacaanka ah ee ku saabsan dhulka Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto.

Madaxweynaha GSK oo ka hadlaayey siyaasadda dagidda badan ee gumeysiga wuxuu Guddigaa ku boorriyey inay si xalkasnimo leh ugu kuur galaan xaaladda ka taagan dalkaa oo haatan Guddiga loo xilsaaray, wuxuuna ka codsadav inay waraystaan dadweynaha si gudashada waajibaadkooda ay ugu fududaato isla markaana ay u helaan runta xaaladda ay ku sugan yihiin dadkaa Afrikaanka ah ee ku noolaa boqollaalka sano isticmaarka hoostiisa haddana ku nool, dadkaa oo waddankoodii ay u dhasheen laga soo qaxiyey dadkaa ku dadkaa oo si naxariisdarro leh loo la'anaaya xabsiyada isticmaarka laayo, wuxuuna Jaalle Siyaad xusuusiyey si loogu gargaaro in ay tahay mid uu Afrikaanku farayo Xeerka Ururka Midnimada Afrika (UMA), taas oo fulinteeda iyo socodsiinteeda aanu ka gaarnay guulo waaweyn oo aanu ku xoraynay dalal badan oo ka tirsan Afrika oo ku hoos jiray gumeysiga.

Madaxweynuhu wuxuu u caddeeyey Guddigaa xilkoodu in uu yahay mid taariikhi ah kuna saabsan socodka taariikhiga ah ee xoraynta Afrika.

Ka hor intuusan Madaxweynuhu hadalka qaadan, waxa magaca Guddiga mahadnaq ugu soo jeediyey Dawladda iyo dadka Soomaaliyeed, Guddoomiyaha Guddiga oo caddeeyey hawshii ay ku yimaadeen inay gacan weyn uga heleen dawladda si ay ugu fududaato, kolkaa kaddib wuxuu Macallinka Kacaanka baray ragga Guddiga ka tirsan iyo mid waliba dalka uu u dhashay.

Guddigii khaaska ahaa ee Ururka Midowga Afrika uu qaabilsanaa arrimaha Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku uu Gumeysto iyo Madax ka tirsan JDS ay wadahadalo ku yeesheen Golaha Ummadda ee Muqdisho. Madaxdii Dawladda JDS u qaabilsanaa wada hadalladaas waxay Guddiga Ururka Midawga Afrika qoraal ugu gudbiyeen mawqifka ay Soomaaliya ka taagan tahay gobannimadaas Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto kaasoo qodobbadiisu ay dhigayaan: In dadka ku dhaqan Xeebta Soomaaliyeed la siiyo gobannimo iyo madaxbannaani aan shuruud lahayn in Dalka lagu soo

celiyo dadka waddaniyiinta ah ee laga masaafuriyey ,lagana qaado dalka siligga korontada ah iyo miinooyinka lagu wareejiyey magaalada Jabuuti, in la baabi'iyo sharciyada gumeysigu u dajiyey dalka iyo dawladda daakhiliga ah ee aan sharciga ku dhisnayn, lagana qaado dhammaan askarta gumeysiga Faransiiska iyo cadaadiska lagu hayo dadka ku dhaqan Xeebta Jabuuti. In la sii daayo dadka waddaniyiinta ah ee xabsiyada ku jira, in la joojiyo dadka shisheeyaha ah ee dalka la soo gelinayo lana joojiyo warqadda dhalashada ee la siinayo, in la isugu yeedho shir lagaga xaajoonayo distoorka dalka «Constitutional Conference» oo ay ka soo qayb galaan dhammaan hay'adaha iyo xoogagga horusocodka ah ee ka dhisan gudaha iyo dibadda Xeebta Soomaaliyeed kuwaas oo ay ka mid yihiin: Xisbiga LPAI, Jabhadda FLCS, xoogagga shaqaalaha, ardayda iyo dhallinyarada horusocodka ah, in dadka reer miyiga ah ee Xeebta ku dhaqan laga qayb geliyo lagalana tashado sida dalka gobannimo loo siinayo xuquuqdoodana la aqoonsado. In la joojiyo wax allaala waxii cadaadis ah ee Gumeysiga iyo dabadhilfkiisu kula dhaqmayaan dadka waddaniyiinta ah ee ku dhaqan Xeebta, iyo in aan loo oggolaan inay ka qayb galaan aftida ka dhici doonta Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku Gumeysto dadka shisheeyaha ah ee ay ka midka yihiin ciidammada gumeysiga Faransiiska.

Warku wuxu intaa ku daray in Madaxda Jabhadda Xorraynta Xeebta Soomaailyeed ee Faransiisku gumeysto (FLCS), markii ay shir la yeesheen Guddiga khaaska ah ee Ururka Midowga Afrika (UMA) u gudbiyeen warqad cad oo tilmaamaysa mowqifka ay Jabhaddu ka taagan tahay xorreynta Xeebta Soomaaliyeed.

Warqaddaa cad ee Jabhaddu waxay si bayaan ah uga warramaysaa tabaha iyo xeeladaha fooshaxun ee Faransiisku ka damacsan yahay Xeebtaasi, waxayna Jabhaddu halkaa ku caddeeysay arrinta dhabta ah ee ka taagan dalkaasi iyadoo isla markaa tilmaantay siyaabaha habboon ee dalkaasi lagu gaarsiin karo gobannimo buuxda.

Jabhadda FLCS waxay sheegtay inay lid ku tahay sida uu Faransiisku u damacsan yahay in dal kaasi uu gobannimo u gaarsiiyo, taasoo ay ujeeddadiisa dhabta ah ay tahay inuu ka abuuro dawladdabadhilif u ah isaga uuna daboolo xuquuqda dadka halkaa ku nool.

Waxayna caddeysay inay aad u kala fog yihiin waraka ka soo yeeraya Faransiiska iyo tallaabooyinka maalinba maalinta ka dambeysa uu ku dhaqaaqayo, kuwaasoo ay ka mid yihiin:- isaga oo kor dhiyey ciidammadiisa u fadhiya Jabuuti oo markii hore ahaa 6000 haatan uu gaarsiiyey 12,000, isagoo sii xoojiyey siliggii korontada ahaa ee ku wareegsanaa Jebuuti, isagoo soo rogay sharciyo degdeg ah oo uu ku sii xoojinayo ciriiriga iyo cadaadiska uu ku hayo dadka halkaa ku nool, isagoo ku soo daadguraynaaya dalka dad shisheeye ah iyo isagoo si xad dhaaf ah ugu musaafurinaya dalka dadka waddaniyiinta ah ee u dhashay.

Jabhaddu waxay kaloo caddeysay inay tilmaan cad u yihiin Faransiiska diidmada uu diiddan yahay inuu wada hadallo la yeesho wakiillada xaqa ah ee matalaya dadka halkaa ku nool oo ay ka mid yihiin Jabhadda FLCS iyo Xisbiga LPAI.

«Tilaabooyinka aan soo xusnay iyo kuwa la mid ah ayaa ka mid ah siyaabaha aan ku diiddan nahay siyaasadda Faransiiska oo uu ku damacsan yahay inuu gobannimo ku gaarsiiyo Xeebta Soomaaliyeed» ayey caddeysay FLCS.

Jabhaddu waxay Faransiiska uga digtay in tallaabooyinka uu ku dhaqaaqayo ayan ahayn kuwo lagu gaari karo nabad balse ay yihiin kuwo keeni kara dagaal halkaa ka qarxada.

Jabhadda FLCS waxay kaloo ka digtay in haddii laga waayo dhinaca Faransiiska siyaasad qayaxan oo ku saabsan dalkaa inuu ku gaarsiiyo gobannimo aan shuruud ku xirnayn ay jawaabtu noqon doonto qori caaraddii oo ay Jabhaddu halgankeedii xaqa ahaa sii xoojin doonto.


Jabhadda FLCS waxay kaloo warqaddaa guddiga khaashka ah hor dhigtay ugu codsatay inuu Faransiisku fuliyo qodobbada ay ka mid yihiin : in la joojiyo aftida uu Faransiisku ka damacsan yahay Jabuuti in la baabi'iyo dawlad ku sheegga halkaa ka dhisan, in laga qaado miinooyinka lagu wareejiyey Jabuuti, in la sii daayo dadka siyaasadda u xiran, in waddanka lagu soo celiyo waddaniyiin tii hore looga masaafuriyey iyo in dalka laga qaado xukunka degdegga ah.

Jabhaddu waxay ugu baaqday guddiga khaaska ah ee ka socda UMA inay si dhab ah u baaraan xogogaalna u noqdaan arrinta xaqiiqda ah ee halkaa ka taagan, taasoo ay u suurtagelinayso inay kulamo yeeshaan wakiillada xaqa ah ee matalaya dadka ku dhaqan Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiiska gumeysto.

Jabhadda FLCS waxay u rajeysay guddiga UMA booqashadoodu inay noqoto mid dhalisa guul gobannimo.

JAALLE KULMIYE OO KA HADLAY XAFLAD LAGU XUSAYEY 15ka MAAJO, MAALINTII DHALLINYARADA SOOMAALIYEED

# Dhallinyaradu waa inay dagaalka halkoodii ka wadaan si loo mideeyo Dalka Soomaaliyeed



Madaxweyne ku-xigeenka GSK isla markaana ah Guddoomiyaha Guddiga GSK u qaabbilsan Dhaqaalaha, Jaalle Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye Afrax wuxuu ka qayb galay xaflad aad u ballaaran oo lagu xusayey 15ka Maajo Maalinta Dhallinyarada Soomaaliyeed oo lagu qabtay Golaha Hanuuninta Dadweynaha ee degmada Boondheere.

Madaxweyne ku-xigeenka GSK, Jaalle Kulmiye oo uu la socdey Xoghayaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, Jaalle Maxamed Cali Warsame waxa halkaasi si diirran ugu soo dhoweeyey madaxda, guddiyada ijtimaaciga iyo dhammaan dadweynaha ku dhaqan degmada Boondheere.

Jaalle Kulmiye, Madaxweyne Ku-xigeenka GSK oo halkaasi khudbad qiimo leh ka jeediyey wuxuu si faahfaahsan uga warramay taariikhda 15ka Maajo iyo halgannadii ay dhallinyarada Soomaaliyeed u soo galeen gobannimada dalka marka laga soo bilaabo geesigii Garaad Axmed Gurey Garaad Ibraahim bilowgii qarnigii 15aad, dagaalkii uu Sayid Maxamad Cabdulle Xasan ku soo qaaday gumeysiga iyadoo halgannadaas soo taxnaa ay halkoodii ka sii wadeen dhallinyaradii Xisbigii Kulanka Dhallinyarada Soomaaliyeed (SYL) gaar ahaan markii uu dhammaaday dagaalkii labaad ee dunida.

Guddoomiyaha Guddiga GSK u qaabbilsan Dhaqaalaha wuxuu dadkii dhageysanayey khudbaddiisii xusuusiyey in dhallinyaradii 13-ka ahayd ee dhidibbada u aastay Xisbigii (SYL), iyagoo ka faa'iideysanaya waaya-aragnimada halgannadii gobannimadoonka, waxay ummadda u jeexeen siyaasad cad oo ay daaha kaga qaadayaan hagardaamada gumeysiga caalamiga ah, wuxuuna xisbigaasi ummadda Soomaaliyeed ku baraarujiyey sidii ummaddu ay gobannimadeeda uga soo dhacsan lahayd gumeysiga.

Jaalle Kulmiye wuxuu kaloo ka warramay dagaalladii ka dhacay Muqdisho sannadihii 1945, '46 iyo '47kii kuwaasoo, buu yiri Madaxweyne ku-xigeenku, ujeeddadoodu ahayd in adduunyada la maqashii-

yo codka ummadda Soomaaliyeed, oo ku dhawaaqaysey gobannimo, waxaana sii xoogeystay kifaaxii dadweynaha iyadoo wufuud Soomaaliyeed loo diray waddammada dibedda gaar ahaan magaalooyinka San Faransiisko iyo New York si Qaramada Midoobay loogu muujiyo in ummadda Soomaaliyeed ay diyaar u tahay in ay gacanta ku dhigto gobannimadeeda.

Jaalle Kulmiye wuxuu sheegay in ergo ka wakiil ah waddammadii adduunyada ugu xoogga weynaa ee markaa ku adkaaday dagaalkii labaad ay timid Soomaaliya si ay u xaqiiqsato xaaladda dhabta ah ee Soomaaliya ka taagnayd.

Isagoo ka warramaya sida uu Kacaanku dhallinyarada uga badbaadiyey dhibaatooyinkii ka soo gaaray xukuumadihii rajciyada ahaa, Madaxweyne-ku-xigeenka wuxuu sheegay in kacaanku dhallinyarada u dejiyay nidaam si wacan uga taliyaana aayahooda dambe wuxuuna intaa raaciyey in dhallinyaradu, iyagoo ku socdo dhabbihii Kacaanku u tilmaamay, ay qayb libaax ka qaateen dhismaha iyo horumarinta dalka wuxuuna tusaale u soo qaatey Jaalle Kulmiye Ololihii Horumarinta Reer Miyiga kaasoo uu ku tilmaamay mid dhaxal gal ah oo dhallinyarada Soomaaliyeed ay ku mudatay ammaan iyo magac gooni ah.

«Kacaanku markii uu dhashay», ayuu yiri Jaalle Kulmiye, waxaa la guddoonsaday sidii loo soo nooleyn lahaa taariikhdii Soomaaliya si Ummadda ugu hirato waayo-aragnimadii iyo tajruubooyinkii ay soo mareen oo markaa oo loo gud biyo iyadoo munaasabooyinkaasi la qaddarinayo facba ficii uu ka dambeeyo».

Madaxweyne ku-xigeenka GSK wuxuu sheegay iyadoo la fulinaayo siyaasadda ayaa waxaa lagama maarmaan noqotay in Maalinta dhallinyarada Soomaaliyeed loogu magac daro maalintii la aas-aasay X. Kulanka Dhallinyarada ee (SYL) 15kii Maajo 1943kii.

Madaxweyne-ku-xigeenka wuxuu dhallinyarada Soomaaliyeed ugu baaqay inay dagaalka halkoodii ka sii wadaan si loo mideeyo dalka Soomaaliyeed oo laga dhammeystiro dalka gumeysiga Gobollada uu weli ku haray. «Waa in laga dhabeeyo amaalka Ummadda Soomaaliyeed oo ku tilmaaman Xiddigta 5 gees ah ee bartamaha uga taal Calanka Ummadda Soomaaliyeed», ayuu yiri Jaalle Kulmiye; wuxuuna, isagoo si wada dardaarankii uu u jeedinaayey dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuu sheegay in dalka iyo dadkuba ay si weyn uga dhur sugayaan dhallinyarada Soomaaliyeed.

Madaxweyne-ku-xigeenka GSK, Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax wuxuu dhallinyarada u tilmaamay inay mar walba shiraan oo ay ka wada xaajoodaan danaha Ummadda Soomaaliyeed isla markaana ay si weyn ugu dadaalaan sidii ay qayb wacan uga qaadan lahaayeen hawlaha lagu hormarinaayo dalka, wuxuuna xusuusiyay inay diyaar u ahaadaan sidii ay waddanka uga daafici lahayeen qiyaamooyinka gumeysiga adduunka.

Madaxweyne-ku-xigeenka ka hor waxaa halkaa hadal soo dhaweyn iyo warbixin ku saabsan kaalinta ay dhallinyarada Degmada kaga jirto dhismaha dalka ka jeediyay Guddoomiyaha Degmada Boondheere, Jaale Cabdi Cali Macallim iyo Xoghayaha Dhallinyarada, Jaalle Nuur Salaad.

Madaxdii iyo martidii kale ee halkaas isugu timid waxaa heeso, gabayo iyo riwaayado goo'goos ah ku maaweeliyay Ubaxa Kacaanka iyo Kooxda Fanka ee Degmada Boondheere.

# Shaqaalaha Soomaaliyeed Waxay Muujiyeen bisayl Siyaasadeed iyo Xilkasnimo Sare



# Go'aanno Taariikhi ah ee Shirweynihii labaad ee Shaqaalaha Soomaaliyeed

WAR GUUD.

Shirweynihii 2aad ee Xoogsatada Soomaaliyeed waxaa lagu qabtay Guriga Shaqaalaha, Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Muqdisho Abriil 9-22-1976, oo si rasmi ahaana uu u furay Madaxweyne ku-xigeenka GSK Jaalle G.le Sare Ismaaciil Cali Abokar, ahna Guddoomiyaha Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada ee GSK.

Waxaa shirka ka soo qaybgalay wufuud ka kala socota Gobollada iyo Ururrada Shaqaalaha:

1. Ergada Gobolka Bari
2. Ergada Gobolka Bakool
3. Ergada Gobolka Sanaag
4. Ergada Gobolka Bay
5. Ergada Gobolka Banaadir
6 Ergada Gobolka Jubbadda Dhexe
7. Ergada Gobolka Jubbada Hoose
8. Ergada Gobolka Shabeellada Dhexe
9. Ergada Gobolka Shabeellada Hoose
10. Ergada Gobolka Hiiraan
11. Ergada Gobolka Gedo
12. Ergada Gobolka Nugaal
13. Ergada Gobolka Togdheer
14. Ergada Gobolka Waqooyi/Galbeed
15. Ergada Gobolka Galgaduud
16. Ergada Gobolka Mudug
17. Ergada Ururka Shaqaalaha Ganacsiga iyo Maaliyadda
18. Ergada Ururka Shaqaalaha Dhismaha iyo Xoogga Korontada
19. Ergada Ururka Shaqaalaha Warshadaha
20. Ergada Ururka Shaqaalaha Beeraha Xoolaha iyo Macdanta
21. Ergada Ururka Shaqaalaha Gaadiidka, Isgaarsiinta iyo Warfaainta
22. Ergada Ururka Shaqaalaha Maamulka iyo Arrimaha Bulshada.

Shirweynuhu wuxuu dhegeystay22 warbixinood oo ay soo jeediyeen ergooyinka ka socdey Gobollada iyo Ururrada Shaqaalaha isla markaana, waxaa tusaalooyin iyo khudbad ka soo jeediyey Madaxda Dawladda:

1 — Madaxweyne Ku-xigeenka GSK Jaalle S/Gaas Maxamed Cali Samantar, isla markaana ah, Xoghayaha Wasaaradda Gaashaan dhigga iyo Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

2. — Xoghayaha Xafiiska Siyaasadda MGSK Jaallle G.le Dhexe Cab dulqaadir Xaaji Maxamed, xubinna ka ah Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada ee GSK.

3 — Xoghayaha Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga Jaalle Aadan Maxamed Cali.

4. — La-Taliyaha Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh.

5. — Madax ka tirsan Xisbiga Xoreynta Xeebta Soomaaliyeed.

6. — Madax ka tirsan Jabhadda Falastiin.

7. — Guddoomiyaha Iskaashatada Beeraleyda Kulmis ee Gobolka Shabeellada Hoose Jaalle Maxaad Mumin Arbow.

Muddadii uu soconaayey Shirweynuhu, ergooyinku waxay kulanno kala geddisan la yeesheen madax ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka, Golaha Xoghayayaasha iyo hawlwadeennada Hay'adaha kala duwan ee Dawladda waxay kaloo booqasho ku tageen mashruucyo kala duwan oo Dalka ka socda iyo Danwadaagta Beeraleyda iyo Kallumaysatada.

ARAR.

Casrigan aynu ku jirnaa wuxuu caan ku yahay «casrigii hoobashada iyo halaagga Hantigoosiga, curashada iyo dhalashada Habka Hantiwadaagga», xoogga ugu weyn uguna muhimsan ee gudanaaya xil kaas wadadniga ahi waa Xoogsatada. Taariikhda bulshadda aadimigu way caddaysay noloshan ku xaqiijisay arrintaas, Waxaa abuurmay Beesha Dawladaha Hantiwadaagga, waxaana burburay habkii gumeysiga ee caalamiga; si cad waxaa u soo shaac-baxay heer sarena gaadhey halganka dhaqdhaqaaqa dimoqraadiyadda, nabadda iyo horusocodka ee Dalalka Hantigoosiga.

Isbeddelladaasi waxay Xoogsatada ku beereen, abuureenna Kalsooni iyo yididiilo, waxayna diyaar iyo heegan u noqdeen dhaqangelinta mabaadii'dooda, isla markaasna, horumarinta iyo kobcinta Mabaadii'daas.

Xoogsatada Soomaaliyeed iyadoo ka mid ah Xoogagga horusocodka ah ee dunida waxay soo martay tijaabooyin fara badan oo ay maanta hananaayaan indhaheedii Waxay si aan naxriis lahayn dagaal qaraar ula soo gashay gumeysigii shisheeyaha: waxay si aan heshiis lahayn uga hortageen diideenna Taliskii dibusocodka ahaa ee Dalka maamulayey sagaalkii sano; waxay si buuxda u taageertay crushadii Kacaankii 21 Oktoobar 1969.

Kacaankii 21 Oktoobar ee uu hormoodka u yahay Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre, wuxuu u furay xaashi cusub taariikhda Ummadda Soomaaliyeed. Wuxuu u soo celiyey kalsoonidii ka luntay, isla markaana u jeexay jaho siyaasi ah oo waafaqsan baahida dadweynaha. Waxaa taa marag u ah barnaamijkii caddaa ee ku dhignaa Xaashadii 1ad ee habkii lagu fulin lahaa barnaamijkaas uu ku xusnaa Xaashidii 2aad ee Kacaanka. Sidaa waxaa isugu dheehmay xirmay na Taliska Kacaanka iyo Xoogsata-

da Soomaaliyeed.

Hoggaanka Hantiwadaagga ah ee JDS si mowduuci ah ayuu u muujiyey Kaalinta laxaadka leh ee shaqaaluhu ka qaato dhismaha bulshada cusub. Xoogsataduna awooddeeda, aqoonteeda iyo afkaarteeda waxay u taabbagelinayaan si dimoqraadi ah oo la xiriirta Mabaadii'da Hantiwadaagga Cilmiga ah ee saldhigga iyo aasaaska u ah horukaca Dalka.

Halgan waliba wuxuu qiimo yeeshaa markuu salka ku hayo aragti cilmi ah oo tawri ah. Sidaas daraaddeed, bay lagama maarmaan ugu muuqatay in kor loo qaado garaadka siyaasiga ah ee shaqaalaha lana hubeeyo Xoogsatada Soomaaliyeed, si ay daboolka uga qaadan shirqoollada iyo siyaasadda dibusocodka, isla markaasna, u dhisaan bulsho hantiwadaag ah. Baahidaas baa dhalisay in la abuuro Xafiiskii la oran jirey «Xafiiska Xiriirka Dadweynaha», ee maanta u kobcay Xafiiska Siyaasadda MGSK. Kaalin weyn ayaa Xafiiska Siyaasaddu ka qaataa barbaarinta iyo diyaarinta horseedka iyo hawlkareennada (Kaadir) loo caribinaayo hoggaaminta hawlaha kala duwan ee saameeya horukaca iyo isbeddel-tayeedka bulshada.

Kaddib markii laga soo wareegey 5 sano dhalashadii Kacaanka kasmada siyaasiga ah ee shaqaaluhuna ay sare u kacday ayuu awood u yeeshay inuu abaabulo Shirweynihii 1aad ee Guddiyada Shaqaalaha oo lagu qabtay Dugsiga Sare ee Booliiska 27kii Abriil 1975kii ilaa 18kii Maajo 1975; shirkaasoo lagu gaarey go'aanno dhaxalgal ah oo uu ka mid ahaa abuuristii Sanduuqa Shaqaalaha saldhigna u ah aasaaska dhaqaalaha Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Shirweynaha 2aad ee Shaqaalaha Soomaaliyeed waxaa u sii gogolxaadhey shirarkii heerka degmo gaarsiisnaa ee loogaga soo dooday arrimaha siyaasadda dhaqaalaha, bulshada iyo guud ahaan danaha shaqaalaha ee degmooyinka.

Go'aannadii iyo talooyinkii doodahaas waxaa mar labaad lagaga wada hadlay heer gobol iyo heer Urur. Go'aannadii ka soo baxay Gobollada iyo Ururrada waxaa la horkeenay Shirweynaha 2aad ee Shaqaalaha, taasoo tusaale cad u ah dhaqangelinta Dimoqraadiyada Bartamaha.

Ujeeddada weyn ee laga leeyahay Shirweynahan, waxay tahay in Xoogsatada Soomaaliyeed si cad u deristo, dooddo, go'aannana uga gaadho arrimaha saameeya horumarka dalka xagga siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka iyo bulshada.

SIYAASADDA

Dal kasta siyaasadda lagu maamulaa waxay ku xiran tahay habka khadka siyaasiga ah ee loo doorto. Haddii la qaato Jidka Hantiwadaagga, si habsami iyo cilmiyan loo dhaqan geliyo, waxaana shaki lahayn in si degdeg ah loo gaadhayo guulo isdabajooga oo dhaxalgal ah, haddii la doorto habka hantigoosadkana waxaa hubaal ah inuu xoogoobayaan isku-kornoolaadka iyo dhiigmiiradku.

Kacaanka 21 Oktoobar wuxuu si cad u hantay Mabaadii'da Hantiwadaagga ee u baaqaysa horseedeysana barwaaqo iyo horumar.

Isbeddelka ka socda gudihiisa, wuxuu si toos ah u taabayaa siyaasadda dibedda. Siyaasadda gudaha ee Soomaaliyeed waa gundhiggii iyo udub-dhexaadkii guulihii laga soo hooyey gaadheyna siyaasadda di bedda. Magaca iyo sumcadda J.D.S. maanta ay ku leedahay Adduunweynaha ma aha wax iskood isaga yimid ee waxay si taariikhi ah ula xiriiraan libihii Xoogsatada Soomaaliyeed xaqiijisay.

Xoogsatada Soomaaliyeed kama indhala'ayn siyaasaddii foosha xumayd ee Kacaanka ka hor lagu maamuli jirey Dalka, taasoo ku dhisnayd qabiil, eexasho, qaraabakiil, nin jecleysi, iwm., iyadoo ujeeddadu ahayd in koox yar oo dibusocod ahi ay dalka maamulaan, kuwaasoo u adeegaya Imbeeryaaliyadda iyo hantikoobka caalamiga ah ee ku soo gabbanaya siyaasadda gumeysiga cusub.

Xoogagga horusocodka ee adduunka, waxay si aad ah u qiimeyeen, tixgeliyeenna Kacaankii 21 Oktoobar ee safafka hore kaga jira dhaqdhaqaaqa tawriga ah ee caa lamiga ah.

Siyaasadda JDS waxay u habaysan tahay si tilmaamaysa Kacaannimda iyo horusocodnimada Ummadda Soomaaliyeed. Taas wa xaa markhaati u ah, mar kastana lagama maarmaan ah in la xuso Xaashidii 1aad ee Kacaanka isla markii uu curtay u soo bandhigay Adduunweynaha siyaasaddiisa gudaha iyo tan dibeddaba, taasoo Ummadda Soomaaliyeed iyo Adduunweynaha horusocodka ahi u riyaaqeen. Sannadguuradii 1aad ee Kacaanka, waxaa lagu dhawaaqay Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan ayadoo lagu soo saaray Xaashadii 2aad ee Kacaanka, ujeeddadiisuna ahayd in si dedgdeg ah loo dhiso Bulsho saldhiggeedu yahay sinnaan, caddaalad, horukac iyo barwaaqo.

GUNDHIGGA SIYAASADDA GUDAHA

Sida la wada ogsoon yahay, qof kasta oo horusocod ah kama qarsoona barnaamijkii ku caddaa Xaa

shidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka, taasoo u keentay Ummadda Soomaaliyeed midnimo buuxda, nabad iyo xasillooni ku fidday dalka oo idil, waxtarna u yeeshay horukaca Ummadda. Madaxweynaha GSK Jaalle Siyaad wuxuu ugu baaqay Ummadda Soomaaliyeed inay dagaal ku qaaddo saddexda cadow ee Bani-aadamka leeyahay: gaajo, cudurka iyo jahliga.

Xoogsatada Soomaaliyeed iyo dadweynuhu ,iyagoo fulinaya baaqaas waxay si habsami iyo geesinnimo ah u guteen hawlihii laga xilsaaray, taasoo waxtar u yeelatay nolosha bulshada iyo hirgelinta Hantiwadaagga, Qoridda Afkeenna iyo Ciribtirka Aqoondarrida, hirgelinta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga iyo ololayaashii isdabajoogga ahaa, u-gurmadkii abaarihii dabadheer ee waxyeellada u geystay dadkii Soomaaliyeed, barnaamijkii Raridda iyo Dejinta, hirgelinta Dhismaha dhaqaalaha waddanka iyo kobcintiisa dhanka beeraha, xoolaha, warshadaha Dalka, ilaalinta guulaha Kacaanka iyo la dagaallan ka dibusocodka iyo kuwa ku soo hoos dhuunta, intaas oo dhan waxaa suuragal ka dhigay inay fulaan Kacaankii u curtay Ummadda Soomaaliyeed 21 Oktoobar 1969.

SIYAASADDA DIBEDDA.

Kaddib curashadii Kacaanka, siyaasadda dibedda ee J.D.S. waxay yeelatay waji cusub oo u ah muraayad guulaha laga gaarey siyaasadda gudaha. 21kii Oktoobar 1969 ka hor, siyaasadda dibeddu waxay u adeegeysey Imbeeryaaliyadda Caalamiga ah iyo Xoogagga Dibusocodka.

Ayadoo la wada ogsoon yahay guulihii waaweynaaa ee laga gaarey siyaasadda dibedda ee J.D.S., waxaa lagama maarmaan ah in la xuso kaalinta weyn oo ay ka qaadatay Afrika, Dalalka Carabta, Waddammada Hantiwadaagga, Aasiya iyo Laatiin Ameerika. Aqoonsigii Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Jarmalka, Dawladihii ku-meelgaarka ahaa ee Viyetnaam, Kamboodiya iyo taageeradii Jamhuuriyadda Dalka ee Shiinaha inay ku yeelato Golaha Ummadaha Midoobey kursigeeda xaqa ah ee muddo badan laga hortaagnaa.

Haddaba waxaa mudan in la xuso kaalmadii geesinnimada lahyd ee J.D.S. u fidisay dhammaan dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka, gaar ahaan kuwa Afrika iyo Waddammada Carabta.

Waxaan marnaba la iska indhatirayn tallaabooyinkii qiimaha lahaa ee dadweynaha iyo Dawladda Soomaaliyeed ka qaateen halganka xaqa ah ee ay ku jiraan dadyowga u halgamaya gobannimadooda iyo madaxbannanidooda, meel kastoo ay joogaanba.

Magaalamadaxda JDS, Muqdisho, waxaa lagu qabtay shirar caalami ah oo ay ka mid yihiin shirkii Madaxda Bariga iyo Bartamaha Afrika laguna guddoonsaday «Moqdisho Declaration» iyo shirkii 11aad ee Ururka Midowga Afrika iyo kuwo kale.

Shirkaas guulo waaweyn ayaa laga gaarey oo dhirbaaxooyin iyo dhibaatooyin fara badan buu soo gaarsiiyey gumeysiga, Imberyaaliyadda Caalamiga iyo dibusocodka, isla markaasna, rajuu geliyey dadyowga Qaaradda Afrika.

Shirweynaha 2aad ee Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu cadday-nayaa in ku biiridda JDS ay ku biirtay Jaamacadda Carabta ay tahay tallaabo weyn oo qiimo u leh xoojinta midnimada Carabta, la dagaallanka Imberiyaaliyadda, gumeysiga iyo sahyuuniyadda iyo xoraynta Dalalka Carbeed ee la haysto, Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto iyo Falastiin.

Shirweynaha 2aad ee Shaqaaluhu wuxuu xagga siyaasadda guddoonsadey:

— In la taageero go'aannadii Shirweynihii 1aad ee Ummadda, ee ku saabsanaa abuuritaanka Xisbi Siyaasi ah iyo Ururrada Ijtimaaciga ah,

— In la faafiyo, baahiyo, la fidiyana Mabaadii'da Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan, iyadoo fiiro gaar ah la siinayo Machadka Culuunta Siyaasadda lana gaarsiinayo heer Jaamacadeed, laguna baahiyo Gobollada Dalka oo dhan, sidii ku xusnayd Wareegtadii Madaxweynaha GSK iyo Go'aannadii Shirweynihii 1aad ee Ummadda;

— In dagaal qadhaadh oo aan naxariis iyo heshiis lahayn lagu qaado Imberyaaliyadda, gumeysiga jaad kasta uu yahay, dibusocodka, danaystayaasha iwm.

— In daboolka laga qaado lana ciribtiro xeeladaha iyo shirqoolada dibusocodka, qabiilka, qaraabakiilka, eexashada, gobollaysiga iwm.

— In la sii xoojiyo xiriirka lalala leeyahay xoogagga iyo Dawladaha horusocodka ee dunida.

— Inay u dagaallamaan xoojiyaanna midnimada iyo xoraynta Dalalka Soomaaliyeed oo weli ku hoos nool kuna jira gacanta gumeysiga.

DHAQAALAHA.

*A R A R*

Dhaqaaluhu waa dhidibbada nolosha bulshada wuxuuna ku xiran yahay ka faa'iideysiga iyo la dagaallanka dabeecadda.

Waxaannu xusuusannahay dha xalkii xumaa oo dhaqaalaha ee uu inooga tagey isticmaarkii iyo gumeysigii cusbaa, ee ku dhisnaa baahaysiga iyo qorshaha aan isusargo'nayn.

Waxaannu ogsoonahay inuu dhaqaalaha Ummadda Soomaaliyeed la xiriirey taariikhdeeda kuna xirnaa xoolaha iyo beeraha yaryar oo lahaanshahoodu ahaa mid gaar ahaaneed.

Tan iyo dhalashadii Kacaanka barakaysan, waxaynu ogsoonahay guulaha waaweyn ee laga gaarey kor u dhigidda dhaqaalaha Dalka, taasoo lagu gaarey tolayntii halbow layaasha dhaqaalaha Dalka, abuuriddii iskaashatooyinka kala duwan iyo ka faa'iideysigii dhulka dihin ee ballaaran.

Warshadeynta Dalka oo aynu la soconno wixii warshado hor u jiray oo tiradoodu aad u yarayd, oo aan wax dheef ah haba yaraatee laga heli jirin. Kacaanka Soomaaliyeed oo tillaabooyin cadcad ka qaaday warshadeynta Dalka, waxay tirada warshaduhu maanta kor u dhaaftay 40 warshadood oo ah kuwo door weyn ka qaatay kobcinta dhaqaalaha iyo ciribtirka shaqo la'aantii Dalka taalley.

Wuxuu Shirweynaha 2aad ee Shaqaalaha Soomaaliyeed istusaaleeyey shaqo la'aanta iyo guuldarradii haystey dadka Soomaaliyeed curashadii Kacaanka ka hor, taasoo haddii lays garab dhigo, tiradii shaqaalihii shaqayn jirey Kacaanka ka hor ahayd soddon kun oo keliya, tirada shaqaalaha maanta Dalka jiraana ay kor u dhaaftay boqol iyo afartan kun oo qof.

Shaqaalaha Soomaaliyeed oo ah lafdhabarkii Kacaanku waxay si lixaad leh u dareensan yihiin ulana socdaan himilooyinka qotada dheer ee uu hindisoonayo taliska caafimaadka qaba ee Kacaanku, waxay aad xusuusan yihiin dulligii iyo kadeedkii talisyadii foosha xumaa ee Dalka maamuli jirey, waxay si cad u qirsan yihiin tallaabooyinka wax ku oolka ah ee dhinac walba laga qaaday marnabana aan lagu soo koobi karin halkaan, si loo dhiso bulsho hantiwadaagga ah oo ku dhisan caddaalad iyo sinnaan una halgameysa xuquuqdeeda aadamiga ah iyo horukaceeda.

DHIBAATOOYINKA HORTAAGAN KOR-U-DHIGIDDA DHAQAALAHA DALKA.

1. Ayadoo Hay'adaha kala duwani aanay si habboon u fulin qorshaha Dalka loogu talagalay dhinaca dhaqaalaha.

2. Maamulka Hay'adaha dhaqaalaha qaarkood oo aan hantiwadaagsanayn.

3. Aqoonyari dhinaca maamulka iyo shaqaalahaba xagga Wakaaladaha ganacsiga iyo Warshadaha.

4. Ku-takrifalka Hantida Ummadda.

5 Isgaarsiinta Dalka gudihiisa oo aan weli gaarin meeshii la rabey.

Haddaba, si dhaqaalaha Dalka loo taageero loogana baxo dhibahaas, waxa uu Shirweynaha 2aad ee Shaqaaluhu arkay inay tahay lagama maarmaan in la fuliyo qoddobbadan soo socda:

1. In la hirgeliyo go'aannadii ka soo baxay Shirweynihii 1aad ee Ummadda.

2 In Hay'ad kasta laga dhiso waax qorsheynta u qaabbilsan, si cadna ay u fuliso Qorshaha loo dhigo, ayadoo waafajinaysa Qorshaha Guud ee Dalka lana kaashanaysa Agaasinka Guud ee Qorsaynta ee MGSK.

3. In midaynta habka xisaabeed ee hadda lagu bilaabay Wakaaladaha iyo Wasaaradaha Dawladda si dhab ah loo hirgeliyo, Guddiga Dhaqaalaha ee GSK ay ku kormeeraan kontroolaanna fulinteeda.

4. In Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada ee GSK kormeer joogto ah ku sameeyo fulinta go'aannada Labada Gole ee ku saabsan arrimaha bulshada.

5. In la kordhiyo lana xoojiyo raa'sumaalka Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed, si uu si buuxda uga qayb qaato mashruucyada Dalka.

6. In guud ahaan la ballaariyo fiiro gaar ahna loo yeesho kordhinta tacabka beeraha.

7. In la xoojiyo lana badiyo iskaashatooyinka beeralayda, kalluumaysatada, farsamada iyo kuwa kalaba lana adkeeyo isbahaysiga ka dhexeeya ayaga iyo xoogsatada.

8. In mas'uuliinta maamulka meelaha halbowlaha dhaqaalaha haya ay ahaadaan kuwo aaminsan Kacaanka, karti iyo aqoonna u leh hawlaha loo xilsaaray.

9. Si Shaqaaluhu uga qayb qaato ka hortagga dayacaadda iyo bursiga hantida dadweynaha, waxaana loo baahan yahay in la abuuro guddi kormeer ah oo laga soo dhexxulo guddiyada Shaqaalaha.

10. Si looga hortago ku-takhilaafka gaar ahaaneed ee hantida Ummadda, in lacag-haye nimada loo badiyo Haweenka Soomaaliyeed ee aqoonta u leh.

11. In xoog weyn la saaro tababarrada aydiyolojiyada xagga dhaqaalaha, si shaqaala-weynaha dhab ahaan loo taabsiiyo faa'iidooyinka waaweyn ee mabda'a Hantiwadaaggu u leeyahay horumarinta dhaqaalaha Dalka; iyadoo la tusaaleyayo isbeddelka dhaqaalaha ee Waddanka ku dhacay intii uu kacaanka barakaysani jiray.

12. Inay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Shirkadda Gaadiidka Baddu xil gaar ah iska saaraan joogteynta gaadiidka badda, si looga hortago dhibaatada Dalka ka haysata xagga dhoofinta xoolaha iyo alaabta kale ee waxtarka weyn u leh kordhinta dhaqaalaha.

13. In laga faa'iideysto xubnaha dhaqaalaha dalka xagga Maalgelinta iyo kobcinta iyo kordhinta wax soo saarka, iyadoo tusaale ahaan loo qaadanayo Sharikadda Caymiska Qaranka oo lacagi u taal Bankiga loogana faa'iideysto xagga Iibsashada Maraakiibta, maadaama ay aqoon iyo xiriir wacan la leedahay Suuqyada dibedda ee Maraakiibta.

14. Waayo-aragnimadii hawlihii gargaarka abaarta, raridda, dejinta iyo abuurista danwadaagta beeraleyda iyo kalluumaysatada, waxay ummadda Soomaaliyeed ku abuurtay awood iyo kalsooni ay uga faa'iideysan karaan dejinta reer guuraaga.

15. In Gobollada iyo Degmooyinka dalka oo dhan ay xil iska saaraan la dagaallanka kantrobaanka oo cadow u ah dhaqaalaha dalka.

16. In Wasaaradda Hawlaha Guud ay xil gaar ah iska saarto sameynta hagaajinta, iyo dayactirka waddooyinka dalka, gaar ahaanna Gobollada halbowlaha dhaqaalaha ah iyo kuwa xiriiriya meelaha halista u ah nabadgelyada, looguna tala galo dhaqaalahoodii.

17. In guddiyada Shaqaaluhu si buuxda uga qayb galaan fulinta qorshaha dhaqaalaha Hay'adaha, Gobollada iyo Degmooyinkaba, sidii ku caddayd wareegtadii ka soo baxday Madaxweynaha GSK, taariikhdeeduna ahayd 24-7-1973kii iyo tii Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada GSK, taariikhdeeduna ahayd 8-9-1975kii.

BULSHADA:

1. Shaqaalaha Soomaaliyeed oo ah xoogga wax soo saarka iyo kuwa loo hanweyn yahay in ay dhismaha dhaqaalaha dalka qayb libaax ka qaataan, gaar ahaanna waqtiga kala guurka, waxaa shirweynahani gartay in shaqaalaha Soomaaliyeed xil weyni ka saaran yahay kordhinta tacabka, si waddanku uga baahi beelo waxyaabaha dibadda uga yimaada, ee dalkeenna laga suurta gelin karo sida cuntada iyo dharka ay soo saariddooda waajib isaga dhigaan, badiyaanna dadaakooda.

Shirweynuhu wuxuu dareensiinayaa shaqaalaweynaha Soomaaliyeed in horukaca shaqaaluhu uu si toos ah ugu xirany ahay hadba sida ay u kordhiyaan tacabka.

2. Xannaaneynta qalabka iyo ilaalinta hantida dadweynaha, shirweynahani wuxuu taabsiiyey shaqaalaha Soomaaliyeed inay ku dadaalaan siday u xannaaneyn lahaayeen qalabkooda iyo hantidooda, kuwaasoo baajin kara dhaqaale badan, isla markaasna, kaalin wacan ka qaadan kara horumarka bulshada.

3. Shirweynuhu wuxuu ku waajibinayaa shaqaalaha Soomaaliyeed inay dhowraan waqtiga qaaliga ah oo ay tahay inay himmad ugu shaqeeyaan ummaddooda, isla markaasna, adkeeyaan kala dambeynta oo la'aanteedu tacab-kordhintu hoos u dhacayso, xiriirka shaqaduna ay xummaanayso.

4. Shaqaaluuu waa inay u wada sinnaadaan, wadajirna u maamulaan hawlaha heer kasta mas'uuliyaddiisu ha gaarsiisnaatee, isla markaasna ay si muuqata uga qayb qaataan hawlaha dheeraadka ah ee dalka lagu hormarinayo.

5. Shaqaaluhu waa inay si buuxda uga qayb qaataan hawlaha bulshada, kaalintooduna ay ka muuqato Golayaasha Hanuuninta ee Degmooyinka.

6. Inay shaqaaluhu dagaal cad ku qaadaan kacaan-diidka iyo dibusocodka gudaha iyo inta ku xiran, isla markaana heegan u ahaadaan ilaalinta iyo daafacaadda miraha Kacaanka.

7. In Olole lagu qaado aayatiin xumada ay leedahay danaysiga gaar ahaaneed oo ka hor istaagaya halganka dhismaha waddankiisa iyo bulshadiisa, taasna waa in Laanta Tababarrada ee Xafiiska Siyaasadd ee MGSK, diyaariso barnaamij iyo casharro lagu dhaleecaynayo laguna cambaaraynayo ceebaha danaysiga iyo aayatiin xumada uu leeyahay, sida ku xusan Sharciga lamb. 29 ee 1.4.1970.

8. Si looga hortago tabaha iyo xeeladaha ay imberiyaaliyadda caalamiga ahi ku mijaxaabinayso dhaqaalaha dalalka soo koraya oo ah inay ka qaxiso dalka dadka farsamayaqaanka iyo aqoonyahannada ah, waa in shqaalaha farsamayaqaanka ah iyo kuwa aqoontoodu sarreyso, aan shaqo ka tegidda laga oggolaanin.

9. Caadooyinka xunxun oo ay ka mid yihiin: qaadka, khamriga,

khamaarka iwm. sidii horeyba loc-gu caddeeyey Shirwyenihii Koo-waad ee Ummadda ,waa in si cad loola dagaallamaa.

Sida runtu tahay, ma aha arrimo si dhaqso ah loo xallin karayo, hase yeeshee, u baahan in laga qaado wax allaale wixii tallaabooyin ah oo wax looga qaban karo ilaa la gaarsiiyo heer ay ku baaba'aan.

Shirweynaha 2aad ee shaqaa-laha Soomaaliyeed haddii uu arri-mahaas si cilmi ah qoto dheerna uga dooday, wuxuu gartay in laga-ga hortegi karo amaba wax looga qaban karo, ayadoo la fuliyo qo-dobbada soo socda :

1. In la fuliyo go'aankii ahaa in la ururiyo dadka ku baaba'san Jabaljaan lana sameeyo xarumo la-gu daaweeyo dadka khamrigu di-looday, si loogu celiyo noloshoodii caadiga ahayd.

2. In la fuliyo sharciyada lam-barradoodu kala yihiin 58 iyo 59, soona baxay Oktoobar 1975kii, ku-na saabsanaa xannaaneynta dadka khamrigu dilooday.

3. In la yareeyo keenista qaa-dka ilaa laga gaarayo ujeeddada ah in dhammaantiis waddanka la-ga joojiyo, si uu u kordho wax soo saarka dhaqaalaha ee imminka caa-dadaasi dhaawacday waxtarkiisa.

4. In la xiro dhammaan mee-laha laga turbo ee lagu ciyaaro khamaarka; sharci adagna arrin-taan laga soo saaro, taasoo ayadu-na dhaawac weyn u geysata shaqo jeclaysiinta bulshada.

5. Shirweynaha 2aad wuxuu soo jeedinayaa in haweenka looga furo degmooyinka oo idil dugsiya-dii lagu bari lahaa xannaanada car-ruurta iyo dugsiyo ay ku bartaan xirfadaha farsamada kala duwan si ay qayb uga qaataan dhismaha dhaqaalaha dalka, kuwii hore u jirayna la xoojiyo.

6. In shaqaalaha warshaduhu ay shaqeeyaan bishiiba hal Jimce, wixii ay tacbaan maalintaasna marka laga jaro wixii kharaj ah, lacagta saafiga ha ee soo harta loo-gu tabarruco Xarumaha Dhallin-yarada Kacaanka.

DARYEELKA SHAQAALAHA:

Shirweynuhu wuxuu aad u fa-lanqeeyey heerka nolosha shaqaa-laha hoose uu maanta taagan ya-hay, wuxuuna isla gaaray sidii ho-reba loogu guddoomiyey Shirweyni-hii 1aad ee Ummadda.

1. In laysku dheellitiro musha-harka shaqaalaha Soomaaliyeed, ayadoo fiiro gaar ah la siinayo de-rejooyinka «C» iyo «D», ayadoo la tixgelinayo hadba heerka dha-qaaluhu maraayo.

2. Si loo dhaqaaleeyo muruqa iyo maskaxda, loona ilaaliyo caafi-maadka **shaqaalaha una kordho ta-**cab soo saariddu, si looga nasiyo hawlaha isdabajoogga ah, isla mar-kaasna, ay ugu soo xiisaan shaqa-da waxaa waajib ah:

B. In la fuliyo sharcigii lam-barkiisu ahaa 44 ee 19.7.1972kii, qolobka 1aad xubintiisa 2aad, oo ah in qofka shaqaalaha ah sannad waliba la siiyo bishiisa fasaxa ah.

T. In fasaxa shaqaalaha shir-kadaha gaar ahaaneed laga mid dhigo shaqaalaha dawladda 30 «soddon» maalmood sannadkiiba.

BADBAADADA SHAQAALAHA:

Habka Badbaadada Shaqaalaha waxaan ku talinaynaa in loo hir-geliyo qodobbada soo socda :

B. In laga wada badbaadiyo shaqaalaha oo dhan xagga cudurra-da ka yimaadda shaqada iyo dhaa-wacaba.

T. In Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha la gaarsiiyo Gobollada oo dhan gaar ahaanna meelaha ay ku badan yihiin shaqaalaha, war-shaduhuna ku yaalliin iyo beelaha danwadaagta ah ee beeraleyda iyo kalluumaysatada.

J. Inay Wakaaladdu hagaajiso qalabka baarista ayadoo waafaji-naysa teknoloojiyada cusub, ayna shaqaalaha u sahasho helitaanka takhaatiirta iyo daawooyinka ay u baahan yihiin.

X. In dib loo habeeyo sharci-ga qiimeynta dhaawacyada lana waafajiyo mabda'a hantiwadaagga ah, isla markaasna, maamulka Hay' addaas la hoos keeno Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga oo si toos ah ugu abbaaran, xog-ogaalsanna arrimaha shaqaalaha.

KH. In Wakaaladda Badbaa-dada Shaqaalaha Soomaaliyeed Wasaaradda Sahaqada iyo Isboorti-ga iyo Ururka Shaqaalaha Soomaa-liyeed ay iska kaashadaan dhismo Cusbitaal weyn oo ay leedahay Xoogsatada Soomaaliyeed.

TABABARRADA SHAQAALAHA:

Xagga tababarka shaqaalaha, shirweynuhu wuxuu soo jeedina-yaa :

— In xoog la saaro tababarra-da aydiyoolojiyada iyo farsamada ee shaqaalaha, ayadoo lagu qor-shaynayo nocca iyo baahida loo qabo. Abaabulka dugsiyo farsamo oo waaweyn ka hor, inay Wasaa-radaha, Wakaaladaha iyo Sharika-duhu isla xarumahooda ka qaban-qaabiyaan tababarro ku saabsan shaqada, isuguna jira heer waa-xeed, laameed iyo xafiiseed ayadoo mar walba macallimiinta tababar-radaas laga soo dhex xulayo isla shaqaalaha kuwa ugu aqoon dheer

uguna waayo-aragsan sidii horeyba uu u sheegey Macallinka Kacaanku Jaalle Siyaad.

GURYAHA SHAQAALAHA :

Waxaa dhibaato xoog leh ka taagan tahay xagga guryaha hoyga ah gaar ahaan magaalooyinka waaweyn, taasoo sababtu tahay shaqaalihii oo fara batay, magaalooyinkii oo lagu soo batay, dadkii ijaarka guryaha ka baayacmushtari jiray oo ka gaabsaday dhisidda guryaha, markii sharciga ijaarka guryaha la soo saaray, haddaba, annagoo daba joogna go'aankii Shirweynihii 1aad ee Ummadda ee ahaa in Hay'ad waliba u dhisto shaqaalaheeda guryo, ayadoo la tixgelinayo baahida loo qabo arrintaa ayada ah, waxaa Shirweynuhu isla gartay :

— In Hay'ad waliba ay fuliso go'aankaas dhaxalgalka ahaa oo oranayay: «Inay dhismaha guryaha shaqaalaha iska kaashadaan Dawladda Dhexe, Bankiyada oo deyn kor-socod fudud ah bixiya, qaybta macaashka ee Wakaaladuhu u qaybiyaan shaqaalaha, sanduuqa shaqaalaha iyo shaqaalaha Dawladda oo kaga qayb galaya maskax muruq iyo farsamo intaba».

XILKA GUDDIYADA SHAQAALAHA :

Guddiyada Shaqaaluhu waa in ay mas'uuliyaddeeda u arkaan in ay tahay mid ballaaran kana culus midda shaqaalaha caadiga ah, sidaa daraaddeed waa inay tusaale wacan iyo horseedba u noqdaan shaqaalaha kale.

DHISMAHA NAADIYAASHA SHAQAALAHA :

Isku xirnaanta shaqaalaha Soomaaliyeed si loo hirgeliyo, waxaa loo baahan yahay inay helaan shaqaaluhu naadiyaal ay ku kulmaan, wax ku kala kororsadaan, iskuna wargeliyaan.

Sidaa darteed, waxaan soo jeedinaynaa in Gobol iyo Urur kasta ay yeeshaan **naadiyaal u gaar** ah, dhismahoodana iska kaashadaan Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Xarumaha Ururrada Hay'adahooda iyo inay shaqaaluhu kaga qayb galaan dhismahaa, xooggooda, farsamadooda iyo maskaxdooda.

SANDUUQA SAQAALAHA :

Ayadoo la arkay waxtarka weyn ee Sanduuqa Shaqaaluhu u leeyahay daryeelka iyo xannaanada shaqaalaha, waxaa shirweynuhu guddoonsaday in la fuliyo qodobbada soo socda oo lagu sii xoojinayo dhaqangelinta sanduuqa.

B. In la sharciyeeyo Sanduuka Shaqaalaha;

T. In lacagta ganaaxa shaqaalaha iyo tan ku saabsan Guddiyada Garsooridda oo lagu dhisay Sharciga lamb. 86 soona baxay 6-12-1975, lagu shubo Sanduuqa Shaqaalaha.

J. Inay Hay'adaha Dawladda iyo Laanta Shaqaalaha ee Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada GSK, iska kaashadaan habkii dhaqangelinta dhaqaalihii saldhigga u ahaa Sanduuqa Shaqaalaha, taasoo ay ka mid tahay siday deeq midaysan ugu fidin lahaayeen Sanduuqa.

X. In Hay'adaha ku shaqo leh lacag-haynta «**Banki, Boosto** Xisaabiye iwm» ee Degmooyinku ay isla habeeyaan sidii loo socodsiin lahaa Xisaabaha Sanduuqa Shaqaalaha loona dhowri lahaa badbaadinta lacagta laga qabto shaqaalaha Degmooyinka.

KH. Inay Xoghaynta Guddiyada Shaqaaluhu fuliso xeerkii ahaa inay abaabusho maadeysyo, ciyaaro, iyo bakhtiyaanasiib iwm. laguna kobcinaayo **Sanduuqa Shaqaalaha**.

D. In Shaqaalaha Hay'adaha, Gobollada iyo Degmooyinkuba hirgeliyaan wareegtadii Madaxweynaha GSK, ee ku saabsanayd in Hay'ad waliba ay lahaato beer, waxaannu ku talinaynaa in faa'iidada meeshaas ka soo baxda lagu shubo Sanduuqa Shaqaalaha.

CODKA SHAQAALAHA :

In Gobollada oo dhan laga hirgeliyo Wargeyska «Codka Shaqaalaha», sida Gobolka Jubbada Hoose iyo Degmada Baydhabo.

KA QAYB GALKA GUDDIYADA KACAANKA :

Shirweynaha 2aad ee Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu ku talinayaa una arkay inay tahay lagama maarmaan in Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka laga qayb geliyo xubinna ka noqdaan Guddiyada Shaqaalaha ee Gobollada iyo Degmooyinka, laguna saa'idiyo qodobkaas sharciga lamb. yahay 52 soona baxay 8.6.1972kii.

DARYEELKA CAAFIMAADKA :

Ayadoo Ummadda Soomaaliyeed garatay baahida weyn ee loo qabo nadaafadda iyo ka hortagga cudurrada, waa in dhammaan dadweynaha iyo shaqaaluhu iska kaashadaan arrimaha la xiriira caafimaadka, ayadoo Hooyada la daryeelsiinayo laguna baraarujinayo kaalinta qoysku kaga jiro dhowridda caafimaadka bulshada.

WARAAQ MURTIYEEDKA SHIRWEYNAHA 2aad EE SHAQAALAHA SOOMAALIYEED.

TAAGEERO:

1. Shirweynaha 2aad ee Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu si buuxda oo hiil iyo hooba leh u taageerayaa GSK ee hormoodka uu u yahay Macallinka Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

2. Shirweynuhu wuxuu qiimeynayaa tallaabooyinkii iyo guulihii waaweynaa ee laga qaaday badbaadintii dadka abaaruhu tabaaleeyeen, rariddii iyo dejintii dadkaas iyo abuuriddii Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumaysatada.

3. Shirweynuhu wuxuu si buuxda u taageerayaa dagaalka xaqa ah ee dadka Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto kula jiro Gumeysiga iyo dabadhilifkiisa si uu ku xaqiijiyo Gobannimadiisa iyo madaxbannaanidiisa.

4. Shirweynuhu wuxuu si buuxda u taageerayaa GSK, mowqifka geesinnimada leh oo uu ka taagan yahay xoraynta Xeebta Soomaaliyeed oo Faransiisku gumeysto iyo siyaasadda qotada dheer leh oo uu ku raadinayo dalalkeenna kale ee maqan.

Shirweynuhu wuxuu si aada u taageerayaa go'aankii GSK ee ku saabsanaa in shaqaalaha loogu deeqo waxbarasho gaarsiisan heer Jaamicadeed.

6. Shirweynuhu wuxuu taageerayaa halganka iyo dagaalka xaqa ah oo ay ugu jiraan ummadda Carbeed xoraynta dhulkii Sahyuuniyadda Israa'iil ka qabsatay iyo in la soo celiyo xuquuqdii shacbiga Reer Falastiin.

7. Shirweynuhu wuxuu taageerayaa xoogagga dimuqraadiyadiga iyo horusocodka ah ee u halgamaya midnimada iyo carabnimada Lubnaan, iyo dagaalka ay kula jiraan inay imberiyaaliyadda caalamiga ahi ay faraha kala baxdo arrimaha gaar ahaaneed ee dalkaas.

8. Shirweynuhu wuxuu si buuxda u taageerayaa halganka xaqa ah ee dadyowga Simbaabwe, Naamiibiya, Koonfurta Afrika, Jili iyo dhammaan dadyowga u dagaallamaya dimuqraadiyadda, nabadda iyo horukaca.

9. Shirweynuhu wuxuu ayidayaa iskaashiga iyo wax wada qabsiga ka dhexeeya dawladaha hantiwadaagga ah iyo dalalka soo koraya, wuxuuna si gaar ah ugu diirsaday kaalinta Midowga Soofiyeeti iyo Kuuba ka qaateen xoraynta Angoola.

10. Shirweynuhu wuxuu si joogto ah u taageerayaa halganka xaqa ah iyo dagaalka ay kula jiraan dadka reer Falastiin Sahyuuniyadda Israa'iil si ay ku gaaraan xuquuqdooda aadaminnimada ah.

CAMBAARAYN:

Shirweynuhu wuxuu si adag u cambaaraynayaa:

1. Weerarkii foosha xumaa ee aadaminnimada ka baxsanaa ee Ciidammada Qowlaysatada ah ee gumeysiga Faransiisku ay ku soo qaadeen Tuulada Lowyacaddo ee JDS.

2. Shirweynuhu wuxuu cambaaraynayaa dibindaabyada, xariga iyo dib-u-soo-xoorka uu gumeystaha Faransiisku ku hayo Xeebta Soomaaliyeed, si uu ku gaaro qorshihiisii afti beenaadka ahaa ee uu horey u caddaystay.

3. Shirweynuhu wuxuu cambaaraynayaa daandaansiga, cagajuglaynta iyo beenta imberiyaaliyadda Maraykanku ka fidinayo Kacaanka Soomaaliyeed, iyagoo ku andacoonaysa in Midowga Soofiyeeti ka samaystay saldhigyo Berbera, Kismaayo iyo meelo kale, taasoo ay adduunweynaha kaga indha saabayso Saldhigyada ay ka samaysanayso Badweynta Hindiya «Diego Garcia».

4. Shirweynuhu wuxuu cambaaraynayaa xoogga ay Sahyuuniyaddu ku hayso dalalka Carbeed iyo dhul-ballaarsiga ay Sahyuuniyadda Caalamiga ahi u hanqal taageyso.

5. Shirweynuhu wuxuu cambaaraynayaa imberiyaaliyadda caalamiga ah oo sida joogtada ah ugu xadgudbaysa arrimaha gudaha ee waddammada kale, iyadoo alooseysa dagaallo, qalalaaso iyo shirqoollo.

6. Shirweynuhu wuxuu cambaaraynayaa cadaadiska iyo cunaqabataynta Talisyada faashiistada iyo Midabtakoorka Qawlaysatada caddaanka ah ee Koonfurta Afrika iyo Iyaan Ismiit ay ku hayaan dadyowga u halgamaya gobannimadooda iyo Koonfurta Afrika, Naamiibiya iyo Simbaabwe.

BALLANQAAD:

Shirweynuhu wuxuu ballan qaadayaa:

1. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay ballanqaadaysaa in ay dham

maystirto hirgelinta Xaashadii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka.

2. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay ballanqaadaysaa in ay naftEEda, aqoonteeda iyo awooddeedaba u hurto ilaalinta, daafacaadda guulaha iyo miraha Kacaanka.

3. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay heegan iyo diyaar u tahay ciribtirka raadadkii gumeysiga iyo maamulkii dibusocodka ahaa, iyadoo ka faa'iideysatay waayo-aragnimada ay dhaxashay intii uu Kacaanku jiray.

4. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay diyaar u tahay la dagaallanka iyo tirtirka imberiyaaliyadda, dibusocodka, qabyaaladda qaraabakiilka, eexda iwm.

5. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay balanqaadaysaa kor u qaadidda iyo kordhinta tacabka iyo wax soo saaridda, si loo dabargooyo jahliga, gaajada, iyo cudurka, isla markaasna, loo gaaro isku fillaansho dhab ah.

6. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay balanqaadaysaa inay kor u qaaddo aqoonteeda xagga siyaasad da iyo farsamada.

7. Xoogsatada Soomaaliyeed ayadoo ka faa'iideysanaysa tusaalooyinkii isdabajoogga ahaa ee Kacaankeeda, waxay ballanqaadaysaa la dagaallanka rajciyadda, dabadhilifka iyo maamul xumada afkana kula jira uurkana kala dagaallamaya, ayadoo ku baratay tabihii iyo xeeladihii uu ku xoogsan jiray.

8. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay ballanqaadaysaa dejinta dadweynaha Soomaaliyeed ee abaartu waxyeellaysay dhinaca aqoonta, farsamada muruqa iyo maskaxdaba.

9. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay ballanqaadaysaa ayadoo fulinaysa himilooyinkii Kacaankeenna barakaysan iyo mabaadi'da hantiwadaagga ah, inay saldhig u noqoto abuurista shaqaaleweynaha Soomaaliyeed.

10. Xoogsatada Soomaaliyeed waxay ballanqaadaysaa inay u sii gogol-xaadho dhaqangelinta Shirweynaha Koowaad ee Ummadda siiba dhismihiisa Xisbiga horseedka ah iyo Ururrada Bulshada.

— Ha noolaado Macallinka Kacaanka Jaalle Siyaad!

— Ha noolaato Xoogsatada Soomaaliyeed!

— Ha waaro Kacaankii 21ka Oktoobar ee Soomaaliya!

— Ha rumowdo midnimada ummadda Soomaaliyeed!

— Ha xoogeysteen gobannimadoonka Soomaaliyeed iyo kuwa adduunka!

— Ha ku guuleysteen xoogagga horusocodka ah ee Soomaaliyeed, dhismaha hantiwadaagga iyo nolosha cusub!

— Ha waarto saaxiibtinnimada qotada dheer leh oo ka dhexeysa ummadda Soomaaliyeed iyo dalalka hantiwadaagga ah!

— Ha dhacdo imberiyaaliyadda, gumeystaha, midabtakoorka iyo dabadhilifyadoodu!

— Ha fuleen talooyinka, go'aannada iyo tusaalooyinka Shirweynaha 2aad ee Shaqaalaha Soomaaliyeed.

# JAALLE SIYAAD: HADDII LAYSKU DAYO IN XUMAATO LOO GEYSTO DADKA IYO DALKA XEEBTA SOOMAALIYEED JDS FARAHA KA LAABAN MAYSO

**Madaxweynaha GSK, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre,, wuxuu ka qayb galay xaflad ballaaran oo lagu xusayey maalintii Isgaarsiinta Adduunka oo ahayd 17ka Maajo laguna qabtay Machadka Boostada iyo Isgaarsiinta kuna yaal Degmada Shibis**

Jaalle Siyaad, oo munaasabaddaa khudbad ka jeediyey wuxuu ugu horrayntii hambalyo u jeediyey shaqaalaha Boosaha iyo Isgaarsiinta oo u dabbaaldegaya maalintooda, wuxuuna shaqaalahaa ku tilmaamay inay yihiin dhegihii dalka oo ummadda u kala gudbiya hadba wixii jira ha ahaadeen wax dabeeci ah, iyo waxyaabaha kale ee saameeya nolosha bulshada Soomaaliyeed.

Madaxweynaha GSK, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre wuxuu daboolka ka qaaday in ay JDS, si buuxda ay u taageereyso dadka ku nool Xeebta Soomaaliyeed si ay u gaaraan xornimo buuxda aayahoodana uga tashadaan siday doonayaan, wuxuuna ku ballan qaaday in ummadda Soomaaliyeed cisi doonto dhowrina doonto wixii dadka Xeebta Soomaaliyeed u gartaan inay maslaxaddooda ku jirto.

Hoggaamiyaha Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Siyaad, wuxuu cambaareeyey wararka beenta ah oo gumeystayaasha iyo dabadhilifyadoodu ay ka fidinayaan JDS, oo ay ku leeyihiin «Haddii dalkaasi xornimo helo Soomaaliya ayaa weerareysa».

Jaalle Siyaad wuxuu ku tilmaamay wararkaasi mid aan aasaas lahayn haba yaraatee.

Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad wuxuu yiri : «Waxaannu maqlaynaa hadallo iyo haddidaad isweydaarsan oo uu isticmaarku aad u buunbuuninayo oo aannu arkayno muraadka ay ka leeyihiin inuu yahay in dab laga shido Afrikada Bari», ayuu yiri Madaxweynuhu.

Jaalle Siyaad wuxuu ku halqabsaday Wargeys lagu qoray erayo odhanaya «Durbaankii dagaalka ayaa ka yeedhaya Afrikada Bari».

«Durbaan dagaal hadduu yeerayo waxa tumaya gumeystaha oo ujeeddadiisu tahay in dad iyo qaarad nabad ah uu dab ka shido, isaga oo uga gol leh inuu dantiisa ka helo kuna gato qalabka warshadahiisa», ayuu yiri Jaalle Siyaad.

Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad wuxuu yiri: «Isticmaarku wuxuu dabada ka wadaa weli siyaasaddiisa foosha xun leh oo ah inuu isku soofeeyo dalalka deriska ah, taasoo ay u soo maraan dhabbayaalkii mu'aamaraadka iyagoo ku isticmaalaya been iyo luqada mu'aamaraadka.

«Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, fikraddeeda horey ayey u sheegtay ugulana talisay dadka deggan Xeebta Soomaaliyeed ee ay walaalaha yihiin in ayan lumin wixii dano ah ee ka dhexeeya iyaga iyo deriskooda, marka gumeysigu gacanta kala baxo, waxaanna aamminsannahay in ayan lumi doonin danahooda, maxaa wacay, waa dad walaala ah, isla markaana waxaannu qabnaa inaan danahooda wax loo dhimin», ayuu caddeeyey Madaxweynuhu.

Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad, isaga oo hadalkiisii sii wata wuxuu daboolka ka qaaday haddii laysku dayo in xumaato loo geysto dadka iyo dalka Xeebta Soomaaliyeed in aan JDS, faraha ka laaban doonin.

Jaalle Siyaad wuxuu intaa ku daray in ciddii isku dayda in ay ceejiso, haddiddo, ama waxyeelleyso dadka ku nool Xeebta Soomaaliyeed ayan khayr ka qaadi doonin.

Jaalle Siyaad wuxuu yiri: Dadka reer Jabuuti keligood ma aha waana in gumeystuhu ogaadaa in ay dad leeyihiin, JDS, faraha ka laaban mayso haddii laysku dayo in dhibaato loo geysto dadka nabadda jecel ee Xeebta Soomaaliyeed.

Madaxweynaha GSK, wuxuu hadalkiisii sii raaciyey in ninka Jabuuti maaga uu yahay nin Soomaaliya maagay.

Jaalle Siyaad waxaa kaloo uu sheegay in ay Isgaarsiintu tahay xubin door wacan ka ciyaarta fulinta siyaasadda guud ee dalka, taa oo ka dhalanaysa la socodsiin ummadda ay la socodsiinayso waxyaabaha dibadda ka dhacaaya ama ha noqdeen kuwo ay ku kacaan gumeystayaasha ama kuwo ay ku kacaan dad samafalayaal ahi.

Jaalle Siyaad oo ka hadlaayey hawlihii ay qabteen shaqaalaha Boo saha iyo Isgaarsiinta, wuxuu sheegay in lixdii sano iyo siddeeddii bilood ee Kacaanku jiray ay shaqaalahaasi muujiyeen karti iyo dadaal dheeraad ah, taa oo uu sheegay in wax muuqda ay yihiin waxyaabihii ay qabteen marka laga eego oo Kacaanka hortii labaduba heer hoose ay joogeen.

Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad wuxuu ku boorriyey shaqaalaha Boosaha iyo Isgaarsiinta inay sii kordhiyaan hawshooda isla markaana ay taa barbar wadaan xoojinta aqoonta farsamada shaqaalaha si ay ugu suurogasho in mar allayaale markii loo baahdo ay ku shaqeeyaan qalabka casriga ah ee Isgaarsiinta adduunka.

Jaalle Siyaad wuxuu kaloo sheegay in dawladda Kacaanka ahi ay waxyaabo badan ka qabatay xagga Isgaarsiinta, welina haatan ay socdaan hawlo lagu hormarinaayo gaar ahaan xagga waxbarashada shaqaalaha.

Wuxuuna tilmaan ahaan u soo qaatay hirgelinta laga hirgeliyey dalka dugsiyada farsamada iyo xoojinta guud ahaan waxbarashada xagga farsamada, kuwaa oo ah saldhigga horumarinta isgaarsiinta.

Jaalle Siyaad, wuxuu shaqaalaha ku guubaabiyey inay sii xoojiyaan iskaashigooda iyo wax wada qabsigooda, taa oo uu sheegay inay ka mid tahay saldhigga lagu hormarinayo hawshooda.

Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad wuxuu ku ammaanay shaqaalaha Boosaha iyo Isgaarsiintu inay yihiin dad hawlkar ah, heeganna u ah hawsha ay dalka iyo ummaddooda u hayaan.

Wuxuuna la rajeeyey inay ku guulaystaan hawlahaa ay faraha ku hayaan isla markaana ay noqdaan kuwo ku fakira sidii ay garaadkooda u gaarsiin lahaayeen heer aad u sarreeya.

Jaalle Siyaad wuxuu guddoonsiiyey dad ka mid ah shaqaalaha Boosaha iyo Isgaarsiinta shahaadooyin aqoonsi ah, kaddib markii ay dhammaysteen tababarro kala geddisan oo ku saabsan farsamada iyo Isgaarsiinta.

Madaxweynuhu wuxuu Xarunta Machadka Boostada iyo Isgaarsiinta ka furay Hoosad cusub oo wax lagu bari doono ardayda dugsigaa.

Madaxweynaha ka hor, waxaa halkaa khudbad ka jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta, Jaalle Cabdullaahi Cosoble Siyaad, wuxuuna ka warramay hawlihii ay Wasaaraddu ku tallaabsatay labadii sano ee ugu dambeeyey. Wuxuuna sheegay in maanta Gobollada dalka oo dhan ay Wasaaraddu ku dhistay xafiisyadii Boosaha oo Gobol waliba u suurtagelinaaya in uu si toos ah ugu soo xirmo magaalamadaxda, Muqdisho.

Jaalle Cosoble wuxuu kaloo sheegay in Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta Kacaanka ka hor ay ahayd Wasaaradihii gurguuranayey, hase yeeshee, maanta ayadoo lagu mahadinaayo Kacaanka ay gaadhay heer lagu faani karo xagga hawsha Isgaarsiinta.

# SHIRKII DALALKA ISLAAMKA OO GO' AAN KU GAARAY IN XEEBTA S- LA SIIYO XORNIMO AAN SHURUUD KU XIRNEYN



Xoghayaha Wasaaradda Macdanta iyo Biyahay, Jaalle Xuseen Cabdulqaadir Qaasim ayaa ka soo degey gegada dayuuradaha ee magaaladan Muqdisho, isagoo ka soo qayb galay shirkii 7aad ee Wasiirrada Arrimaha Dibedda ee dalalka Islaamka oo bishan 10dii uga bilawday magaalada Istanbuul.

Jaalle Xuseen Cabdulqaadir oo u warramayey weriyeyaal ka tirsan Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha wuxuu sheegay in shirkaa guud ahaan lagu soo qaaday wax wada qabsiga, xoojinta xiriirka siyaasiga iyo dhaqaalaha, hiddaha iyo dhaqanka ummadda Islaamka.

Xoghayuhu wuxuu sheegay in shirkaa looga munaaqashooday siyaasadda guud ee adduunka iyo sidii loola dagaallami lahaa gumeysiga iyo sahyuuniyadda, loogana xoreyn lahaa dalalka Carbeed ee Bariga Dhexe iyo dalalka Afrika oo ay ka mid yihiin: Koonfur Afrika Qowlaysatada Roodiisiya, Naamiibiya. Waxa kaloo lagu soo qaaday sidii xornimo aan shuruud ku xirnayn loo siin lahaa Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto. Wafdiga Soomaaliyeed ee shirkaa ka qayb galay wuxuu hordhigay wufuudda warbixin ay kula socodsiinayeen waxyaabihii ku soo kordhay Xeebta Soomaaliyeed sidii ay ku gaari lahayd xornimo.

Jaalle Dr. Xuseen Cabdulqaadir Qaasim wuxuu kaloo sheegay in shirkaa Wasiirrada Arrimaha Dibedda ee dalalka Islaamka uu go'aan ku gaaray qodobbada soo socda:

1) Isagoo kolka hore fiiriyey ammuurta xeebta Soomaaliyeed, xusuusinayana go'aannadii horey uu uga qaatay, kuwii Jamciyadda Qaruumaha ka dhexeeysa, kuwii lagu qaatay shirkii dawladaha dhexdhexaadka ah, kuwii lagu qaatay shirarkii ururka Jaamicadda Carabta iyo kuwii faraha badnaa ee lagu qaatay shirka UMA oo kulligood dalbanayey in gumeysiga Faransiisku si degdeg ah uga baxo xeebta Soomaaliyeed, shuruud la'aanna uu xornimo u siiyo ummadda halkaa deggan.

«Isagoo shirku ka calool xun yahay in Faransiisku ilaa hadda ayan tallaabo ka qaadin sidii loo gaarsiin lahaa xornimo buuxda ummadda Xeebta ku dhaqan, una fiirinaya xaaladda ciriiriga iyo baqdinta ah ee lagu hayo ummadda halkaa deggan in ay tahay xaalad walwal gelinaysa adduunweynaha, wuxuu shirku mar labaad ayiday isagoo wax shuruud ah uusan ku xirin xaqa ummadda halkaa deggan inuu Faransiisku siiyo gobannimo degdeg ah oo aan dhalanteed

*ahaynna faraha ka saaro.*

*2) Shirku wuxuu ugu baaqay* ***dawladda Faransiiska in ay ka bax****do Xeebta Soomaaliyeed oo ay ka qaadato ciidammadeeda oo siiso xornima taam ah.*

*3) Shirweynuhu wuxuu kaloo ugu baaqay dawladda Fransiiska in ay abuurto jawi samaynaya in ay xorriyad taam ah ay ummadda halkaa deggan ku cabbirto ra'yigooda siyaasiga ah, gaar ahaan dawladda Faransiisku ay ku dhaqaaqdo qodobbada soo socda:*

*a) In ay sii dayso dadka siyaasadda u xiran.*

*b) In ay ogolaato in ay dalkooda ku soo noqdaan dadkii ka tirsanaa dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ee ka maqan dalka oo ictiraafsan yihiin UMA.*

*t) In ay oggolaato in ay dalkooda ku soo noqdaan dadkii horey xaqdarrada looga soo musaafuriyey.*

***j) In ay joojso dadka hadda halkaa ay ka soo saarayso oo u dhashay Xeebta Soomaaliyeed isla markaana ay joojiso dadka aan Xeebta u dhalan oo ay soo dejinayso si ay degaan cusub uga samayso Xeebta Soomaaliyeed.***

***x) In si dhakhso leh dawladda Faransiisku ay uga qaaddo xarigga siligga ah oy ku wareejisay Jabuuti kaasoo ciriiri xoog leh ku haya ummadda halkaa deggan.***

***kh) In dawladda Faransiisku ay*** *tirtirto wax allaale wixii qaanuun isticmaar ahaa ama wixii tallaabooyin ah ee ciriiri gelinaya xorriyadda ee soo baxay 1967kii, una aqoonsato dadka Xeebta deggan iyadoo aan wax kala sooc ah samaynin in ay xaq u leeyihiin in ay codkooda dhiibtaan kuna dhiibtaan qofkii walba oo qaan gaar ah oo xaq u leh ee aanay ku dhiibbeyn xaashiyaha Faransiiska ee haatan dad yar haystaan dadweynaha halkaa degganna loo diidey.*

*Ugu dambeystii dawladda Faransiiska waa in ay isugu yeerto shir dastuuri ah oo ay ka soo qayb galaan ururada s i y a a s i g a ah ee dadka kalsoonidiisa leh xeebtana ka tirsan loona oggolaado dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ulajeeddada shirka laga leeyahayna ay tahay inuu diyaariyo habkii hagaagsanaa ee Xeebta Soomaaliyeed ay ku gaari lahayd xorriyaddeeda iyo xasilloonaanteeda.*

*Jaalle Dr. Xuseen Cabdulqaadir Qaasim oo hadalkiisa sii wata wuxuu kaloo sheegay in shirkaa uu guddoonsaday in dawladaha Islaamka oo ka qayb galay shirkaa ay bilaabeen olole dibloomaasi ah ee dawladda Faransiiska lagala hortegayo in dawladda Faransiisku ay ka tanaasusho waxay haatan ku dhaqmayso una oggolaato xornimo ummadda Xeebta ku nool.*

*Ugu dambeyystii guddoonka shirka Wasiirrada Arrimaha Dibedda ee dalalka Islaamku wuxuu sheegayaa in Guddi ka tirsan afar dawladood oo uu la socdo Xoghayaha Guud ee shirka Islaamka in ay boqdaan Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto, si loo ogaado waxa ay xaqiiqdu tahay.*

*Jaalle Xuseen wuxuu kaloo sheegay in shirkaas uu soo qaaday sidii foosha xumayd ee Faransiisku u maamulay afti ku sheegtii uu kaga goynayey Jasiiradda Moyootedhulkeeda asalka ahaa ee Komoro.*

*Xoghayuhu wuxuu caddeeyey in shirkaa caalamiga ah uu haatan si fiican u garwaaqsaday daba-gaalleynta mararka qaarkood ay ku dhaqmaan dabloomaasiyiinta Faransiika taas oo la hubo inaanay meelgaarsiinayn.*


*«Talada haatan dawladda Faransiiska waxay tahay in ay u khushuucdo go,aannada ka soo baxay ururrada caalamiga ah ee dhammaantood ugu baaqayey in ay xornimo taam ah gaarsiiso Xeebta Soomaaliyeed, taa ayaana Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya ugu baaqaysaa dawladda Faransiiska», ayuu yiri Xaghayaha Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.*

*Jaalle Xuseen Cabdulqaadar Qaasim waxa gegida dayuuradaha ku soo dhaweeyey Xaldhibaano ka tarsan GSK, Xaghayayaal iyo Saraakiil sare oo ka tirsan laamaha dawladda.*


# Miisaanka Maansada

Sidii aan idiinku ballan qaaday bishii hore, maanta waxaynu faaqideynnaa fikradaha isjiidhaya ee ku saabsan Jaalle Gaariye Miisaankiisa maansada oo salka ku haya tirada shaqallada tixda ku jira.

Laakiin inta aadan isku deyin inaad fahamtid miisaankiisa, waxaa lagama maarmaan ah inaad og tahay fikradda uu Gaarriye ka qabo gabayga. Wuxuu aaminsan yahay inayan gabyaannimadu hibo Eebbe ahayne tahay xeel la baran karo. Halkaas keliya kuma ekaane, wuxuu si kalsooni ah u martiqaaday in ciddii doonaysa inay gabyaa noqdaan ay ku biiraan dugsigiisa oo dersiga kala socdaan bogga Suugaanta ee Xiddigta Oktoobar toddobaad walba maalinta Sabtida ku soo baxa.




Dadka fikraddaa diiddani waxay qabaan in gabyaannimadu asal ahaan tahay hibo, barashada shuruudaha maansaduna kaalmo u tahay qofkii hibadaas leh keliya. «Waa laga yaabaa inaad baratid erayo badan, dabadeedna miisaanka maansada la kaashatid si aad gabay u hal-abuurtid,» ayey ku doodayaan, «Laakiin haddii Sayid




Maxamed Cabdulle Xasan raaci lahaa habkan, waxay u badan tahay inuusan muddadii yarayd ku tirin kareen boqollaalka maanso oo aad murtidooda ku dhaygagaysid. Awo oddii uu u lahaa inuu tiriyo gabay lala amankaago (oo mararka qaarkood gaadhaya ilaa 300 oo beyd) ayuu ku mutaystay in lagu tilmaamo nin gabayga hibo u leh».

Tan iyo haddeer Jaamacadaha adduunka ee hidduhu waxay caan ku yihiin in lagu barto murtidii laga dhaxlay raggii gabayga hibada u lahaa ee jaamacadahaas caan kuma aha inay abuuraan rag iyagu gabya. «Dadku waa indha-ku-garaadle», sida ay murtida Soomaaliyeed qabto, gabayguna wuxuu ahaanayaa hibo tan iyo inta safka ugu horreeya oo Jaalle Gaarriye xertiisa hibada ka madhani qalin jebiyaan.

Higgaadda iyo miisaanka maansaduba wey saameeyaan gabayga Soomaaliyeed. Jaale Gaarriyena waxay la tahay in higgaaddu sharci adag oo loo baahan yahay in gabyaaga Soomaaliyeed laga xoreeyo. Wuxuu leeyahay: «Gabaygu wuxuu ka mid yahay noocyada xidhiidhka is-afgarashada bulshada waxaana dhacda in higgaaddu ku jirrabto gabyaaga inuu isticmaalo erey ka leexsan ujeeddadiisii oo aan si dhab ah u cabbirayn dareenka (feeling) naftiisa. Hadaba haddii uu yahay dhaabad, waa inaynu dhaqso uga xoroownaa shardigan». Isla markaas, Jaalle Gaarriye wuxuu xambaarsan yahay miisaanka maansada oo laftiisu shardiyaal ku dabraya leh.

Dadka diiddan in higgaadda gabayga laga tago, ma dafirsana inay higgaaddu dhaabad adag tahay. Waxayse ku doodayaan in gabyaanimaduba tahay awoodda qofku kaga gudbayo dhaabadaha iyo shardiyada ad-adag ee maansada (xag higgaadeed iyo xag miisaan mid kastaba ha ka yimaaddeene). Awoodda yaabka leh ayaana ugu wacan inaynu ku tilmaanno gabyaaga «hibo», taqtaranka «waaya-aragnimo». Waxay kale oo ku doodayaan fikradaha Gaarriye hor taagani, in ereyada higgaadda gabaygu yihiin xuddunta codka macaan iyo jiibka dhegtu ku raaxaysato, haddii higgaadda laga tagana gabaygu dhadhan yeelan maayo.

Tan labaad, waxay leeyihiin: «Marba haddii miisaanka iyo higgaadda labaduba yihiin dhaabado adag maxaynu midna u xooraynaa midka kalena u xambaaranaynaa?» Jawaabtu waa «miisaanku wuu ka sina ballaadhan yahay higgaadda sidaa awgeedna waddooyin badan baa kuu furan.» Hase yeeshee, inkasta oo Gaarriye gabyaa yahay misna tusaaleyaashiisa oo dhammi waa gabay higgaadsan, xertiisuna waxay ka filaysey inuu gabay aan

higgaad lahayn tiriyo oo tusaaie ahaan u soo bandhigo. Xertiisii way sugaysaa.

Isagoo shaqalka gaaban u tirsanaya «1», shaqalka dheerna «2» shaqalka gaaban oo ku dhufsan «w» ama «y»na u tirsanaya «1» ama «2», wuxuu miisaanka maansada ku bilaabay «Jiiftada» (Eeg Xiddigtii 17.1.1976), oo u qaatay saldhiggii gabayga. Wuxuu dejiyey saddexda sharci oo hoos ku taxan:

Sharciga 1aad. Jiiftadu waa sagaalley ama tobanley midkood, waxaana xuddun u kala ah shaqalka 5aad iyo kan 6aad.

Sharciga 2aad. Shaqalladu hab gaar ah ayey isugu reebmaan ama isugu xidhmaan.

Sharciga 3aad. Markii laba shibbane isku xigsadaan waxay leeyihiin meelo u gaar ah.


riye u qaatay mar wuxuu gelayaa ereyga dabadiisa, marna hortiisa amaba dhexdiisa. Jaalle Gaarriyena si bayaan ah uma macnayn sababaha ugu wacan. Dadka qaar waxay markiiba ka dideen 16 hab oo kala duwan oo shaqallada beydku isugu taxmi karaan, dadka Gaarriye taagersanise waxay ku doodayaan inay dhici karto in Gaarriye inoo hawl yareeyey isagoo inaga baajinaya waddooyin kale oo aynu isku luri lahayn.

Waxaa Sharciga 2aad laga soo dheegay tusaale muujinaya jiifto sagaalley ah oo miisaankiidii qumman yahay dhegtuse laaxin ka dareemayso. Dabadeedna wuxuu isweydaariyey laba erey. Inkastoo uu xidhiidhkii shaqalladu kii hore la mid noqday, haddana laaxinkii wuu baxay. «Waxay sidaa ku noqotay», ayuu yidhi Garriye,, «markii aynu labada erey isweydaarinney ayay afarta shaqal oo hore labalaba isugu xidhmeen sida uu muujinayo hakadku (Eeg Tusaale 1).

Hase yeeshee isku-dhufsanaanta shaqalladu ma aha mid dadka u wada muuqan karta ama lagu wa-

da heshiin karo. «xitaa haddii Gaarriye tiisa loo raaco» ayay leeyihiin- «tusaalihiisu wuxuu ku kooban yahay beydka qaybtiisa hore eeg hakadka u dhexeeya tirooyinka sanduuqa bidix ee Tusaale 3). Gaarriye xerta ayuu ku halleeyey inay baadi doontaan sida ay shaqallada beydka xagga dambe kaga jiraa isugu xidhmayaan.

Sharciga 3aadna waxaa laga soo dheegey tusaale waafaqsan Sharciga 1aad iyo kan 2aadba, laakiinse laaxin ku jiro. Dabadeedna ereyga «oggola» oo labada shibbane oo isku xiga leh ayuu kobtiisii ka beddeley (eeg Tusaale 2), markaas ayaa dhadhankii jiiftadu soo yare hagaagey. «Laakiin Shiikhu» ayay leeyihiin xertu, «ma wada sheegin inta meelood oo shibbanayaasha labanlaabmaa geli karaan». Xerta fal-




Qolada dhalliilaysa Sharciga 1aad waxay leeyihiin in Gaarriye «ay» u tirsado «2» marka ay ku jirto «baxay» ama «1» marka ay ku jirto «baxaysaa» xigmad iyo sharci lagu hirto midna kuma fadhidee waa «hadba intaan doonaan ka dhiganayaa». Ta labaad waxay leeyihiin shaqalka xuddunta uu Gaar-

laagowdeyse waxayba leeyihiin «sida guurku uga koobmo nin iyo afo, ayuu miisaankuna uga koobmaa shibanayaal iyo shaqallo. Haddii aad midkood gooni u baacsatidna hawshaadu waxay u kala dhantaalmaysaa sidii ay u kala dhantaallaan lahayd haddii aad ninka keliya isku koobtid adigoo arrin guur

ka hadlaya. Jaalle Gaarriyena wuu isku laday kaalinta shibbanayaashu maansada kaga jiraan iyo xidhiidhkoodaba».

Fikradaha Gaarriye diiddan oo kor ku xusan waxaa sii dheer in la hayo beydad jiifto ah oo aan 16ka hab oo Gaarriye midnaba waa faqsanayn. Tusaale, qaybta hore ee beydka hoose (eeg Tusaale 3) shanta sadar oo ka hooseeya midna ma waafaqsana, laakiin beydka qaybtiisa dambe waxay waafaqsan tahay sadarka saddexaad ee ku jira sanduuqa ka hooseeya. «Waa maxay sababtu?» «Gaarriye weyddii?» Xertii baa yuusaysa.

Taasi waa jiiftadiiye, gabayga u soo gondda dag (eeg Xiddigta Oktoobar 31.1.1976). Gaarriye wuxuu hubiyey in shaqallada gabaygu yihiin 20 ama 21 midkood, iyo in hooriska gabaygu had iyo jeer yahay 8 shaqal. «Qaybta hore ee gabaygu», ayuu leeyahay Gaarriye, «waa jiifto saddex shaqal lagu daray. Haddii ay qaybta hore jiifto sagaalley ah ka timid waxay noqotaa 9+3=12; haddii ay mid tobanley ah ka timidna waxay noqotaa 10+3=13.» Isagoo arrintaas u cuskanaya, ayuu Gaarriye xushay meelaha xudduntu gelayso si uu u muujio xidhiidhka xisaabeed oo ka dhexeeya beydadka jiiftada iyo gabayga. Gabayga sharciyo xertu raacdo uma dejin, hase ahaatee, xidhiidhkan xisaabeed ayaa ku yaboohaya in Sharcigii gabaygu raacay kii jiiftada. Laakiin, maadaama beydka gabayga ahi ka dheer yahay kan jiiftada ah miisaanka gabaygu wuxuu yeeshay 96 hab oo kala duwan. Alla fara badanaa! (Eeg Tusaale 4. Si aad u tirisid hababkaas, sadarrada sanduuqyada xidhiidhsan isku wada dhufo: waa 4x4x2x3=96). Malahayga tiradan badan ee miisaanka maansada ayaa ugu wacan Gaarriye inuu ku doodo in miisaanku ka sina ballaadhan yahay higgaadda. Sina ballaadhnaantan waxtarkeedu ma sugna. Waayo? Waxaa dhici karta in ereygii gabayaagu jeclaan lahaa beydka ugu geli kari waayo miisaan ka aawadii. sida ay u dhici karto in eraygaasi u geli kari waayo higgaadda aawadeed.

Isku soo wada duub. war dhillo ah ayaan u sidaa Shiikh Gaarriye. Miisaankiisii wuu ku hagaagi waayey gabayadii caanka ahaa oo ay kala tiriyeen Daraawiishyadii (Sayid Maxamad Cabdulla Xasan iyo Ismaaciil Mire).

Gabayga «Gudban» oo ka kooban 150 beyd oo Sayidku tiriyey 1904, kaddib markii Boqor Cismaan ku ballan furay, waxaa ku jira 36 beyd oo ka kooban 22 iyo 23 shaqal, sidaa awgeedna aan ku imanayn Gaarriye miiisaankiisa 20 iyo 21 shaqal ku kooban.

Eeg gabaygii Ismaaciil Mire tiriyey 1913 isagoo u dabbaaldegaya guushii colkii uu watey ka soo hooyey dagaalkii Dulmadoobe isla markaana ku diganaya dilkii Abbaanduulihii Ciidanka Ingiriiska Koofil. Gabaygaas (54 beyd) ku magac dheer «Jahaad taladii» 19 beyd oo ka mid ah ayaa 22 iyo 23 shaqal leh oo aan waafaqsanayn miisaanka Gaarriye (eeg Tusaale 4, beydka hore). Arrintani dhif iyo naadir ma ahee gabayo badan ayey saamaynaysaa. Xertuna Shiikh Gaarriye ayay jawaabta ka sugaysaa.

Akademiyada Dhaqanka iyo Hidduhu maxay miisaanka Gaarriye ka qabtaa? «Miisanka maansadu asalkiisaba», ayay madaxda Akademiyadu leedahay, «waa dhibic ka mid ah badweynta nalaga sugayo inaannu salkeeda soo xaadhno. Sidaas darteedna, dhaqaalaha iyo shaqaala yarida na haysataa midna nooma oggola inaannu miisaanka fiiro degdeg ah siinno. Qoraalka farteennu waa 3 jir keliya waxaana jira arrimo naxwuhu ka mid yahay oo nagaga kulul miisaanka. Hadal iyo murti, arrintu waxay u baahan tahay samir iyo baaris dheer, in Akademiyadu go'aan (oggol iyo diidmo midkastaba ha ahaadee) ceedhiin degdeg uga gaadho miisaanka Gaarriye ma habboona».

| MIISAANKA JIIFTADA (Tusaale 3) | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 16 | qaybta 1aad | xudunta | qaybta 2aad | [illegible] |
| noocyada miisaanka | GEELAY 2 2 | GA (1) | HAWLYARI 2 1 1 | 9 |
| | 2, 2<br>2, 11<br>11, 2<br>11, 11 | 1 | 2 1 1<br>2 2<br>1 1 2<br>11 11 | |
| | WAAGAAN U 2 2 1 | HE (1) | LI JIREY 1 1 2 | 10 |
| | 12, 2<br>21, 2<br>12, 11<br>111, 2 | 1 | 2 2<br>2 11<br>11 2<br>1111 | |

**W. Q. E. Cawed (Kholi)**

# DOORKA MAAMUL ROGGUKA QAATO HORUMARINTA DALALKA SADDEXAAD

*W. Q. Axmed Faarax Yare*

Waxa la wada ogsoonyahay in gumeystayaashu ay ahaayeen, welina yihiin, kuwii ugu wacnaa waddammada soo koraya dhibaatooyinka iyo lafajebinta xun ee xag walba ka haysta. Dalalka saddexaad waxaa haysta hiirtaanyo iyo mixnado dhan kasta ah, ha u darraadeen kuwa ka haysta xagga dhaqaalaha, siyaasadda, caadooyinka, tacliinta iwm.

Mashaakilkaas oo ah mid ku tidcan saabka dhaqanka iyo dhaqaalaha waddammada saddexaad waa mid loo xaglin karo inuu ka soo ambaqaaday xukunnadii gumeystayaasha, haddaba markii indheergaratada iyo dadka horukaca jecel garwaaqsadeen xaqiiqada dibudhacooda, waxay isku dayeen inay ka gilgilshaan oo dheeryadii isticmaarka tuuraan. Hase ahaatee, buura dheer iyo cadawyo fara badan ayaa iska hor liqxagaafyadii horumarka.

Waxaa isweydiin leh haddii ay garteen in dalalkaasi ay yihiin kuwa dib loo ridey loona baahan yahay inay xawli dheeraad ah ku ordaan si ay horumar deg deg ah ku gaaraan, maxay, dhab ahaantii u xaqiijin waayeen himilooyinkooda iyo ulajeeddooyinkooda?

Jawaabtu waa fududdahay, waxayna tahay arrinta ugu weyn oo ay la rummayn waayeen horukacooda iyagoo iska illaawey waxa la yiraahdo maamulrogga (Administrative Reform), kaas oo door lama huraan ah ka qaata isbeddelka loo baahan yahay in la sameeyo si loo gaaro horumar xiddida leh. Wixii tegey tage ee tan dambaa daran, waxaa naaiib wanaag ah in maanta rag badan oo cilmiga maamul-rogga wax ka garanaaya ay u soo baxeen, una soo baxayaan, dalalka saddexaad, kuwaas oo ku dadaalaya inay dhaqankii, dhaqaalihii, siyaasaddii iyo arrimihii kale oo gumeystayaashu siday doonayeen ugu kobciyeen, uguna abaabiyeen dalalka saddexaad — Cilmiga maamul-rogga ku beddelaan kuna habeeyaan qarannimada iyo dawladnimada dalalkaas.

Haddii aan isku dayno in aan fasiro macnaha maamul-rogga, runtii, micneheedu aad buu u ballaaran yahay, hase ahaatee, kan ugu habbooni waa kan soo socda: Maamulroggu waa awoodda lagu isticmaalo aaraada cusub iyo fikradaha bedka qaba si uu u noqdo habka maamulka mid waafaqsan danta weyn oo horumarka iyadoo fiira gaar ah la siinayo qorshihii lagu tala galay iyo wixii la qabtay iswaafajintooda.

Mar haddii aan ku fasiray in aaraa cusub la isticmaalayo oo aan horey dadku u arki jirin marka maamul-rog la hirgelinayo waxaa lagama maarmaan noqoneysa in la tuuro waxyaala badan oo horey loo qiimeyn jirey sida caadooyinka xunxun iyo dhaqanada silloon. Arrintaasi ma aha mid sahlan maxaa yeelay dadku waxay boqolaal sannadood ku soo dhaqmayeen si hawl yar loogama gooyn karo.

Sidaas awgeed waa in la baraa faa'iidooyinka fikradaha cusub iyo xumaatooyinka kuwa la beddelayo, waana in lagu hanuuniya ku dhaqanka maamulka cusub oo horumarka xawliga leh lagu gaari karo. Kolba haddii ay meesha soo galaan waxyaala cusubi, waxaa lama dhaafaan ah in la darso dhibaatooyinka ka imaan kara iyo sidii looga hortegi lahaa.

Si looga gaashaanto dhibaha fara badan oo la xiriira maamul-rogga waxaa waajib ah in la tixgeliyo saddex arrimood:-

1. Dabeecadda isbedelka (The Nature of Reform)
2. Beddelayaasha (The Reform Agents)
3. Iyo Bii'da (The Enviroment).

Dabeecadda isbeddelka aad bay muhiim u tahay waana mid loo baahan yahay in la ogaado si isbeddel horukaceed u dhaco. Labaatankii sano ugu dambeeyey maamulyahannadu waxay ku mashquulsanaayeen shaqaalaha hawl wadeennada ah, maaliyadda iyo habayntooda. Kolka la ogaado waxyaalaha ka dhallan kara tallaabo maamul xaggiisa ah lana ogaado sidii looga hortegi lahaa caada-haystayaasha ka hor-imanaya

horukaca ayaa loo gaari karaa halkii la doonayey.

Beddelluhu (Reformer) waa kan ugu qiima weyn marka isbeddel la sameeynayo. Waxa loo baahan yahay in la darso:-

Shaqsiyadda beddelaha siday tahay; cilmigiisu wuxuu yahay iyo waaya-aragnimadiisa, kalsoonida uu mujtamaca ka haysto iyo halka uu fikradaha ka soo dhurto.

Runtu waxay tahay in dalalka saddexaad qaarkood ay ku isticmaalaan aaraa ka soo calool galay dibedda, khusuusan kuwa la taliyayaasha dibedda sidaas awgeed aad ayuu ugu qalafsanaadaa dadka ku nool waddanka gudihiisa. Marka waxaa la rabaa in fikradaha isbedelku aaney noqon kuwa dhoof ku yimaada ee ay noqdaan kuwa ka dhexcurta indheer-garatada dalalka saddexaad.

Arrin iyana tixgelin u baahani waxay tahay dhismaha dhaqanka Buruqraadiyadda ka dhisan dalkaas, ma tahay mid isbeddelka raalli ka ah? Sharcigee bay ku dhisan tahay?

Dalalka saddexaad oo ka baxay gacanta gumeysiga waxay leeyihiin buruqraadiyad xun oo ka koobanta rag yar oo isticmaarku xafiisyadda uga tegey horayna isagu u gargaari jirey, kuwaas oo cilmigooduna kooban yahay isbeddelkana hor istaaga.

Sidaas daraadeed waxaa habboon in lagu beddelo nimaan cusub oo la xulay diyaarna u ah isbeddelka maamulka iyo dhaqanka. Haddii aan xag kale ka eegno waxa iyana aan ka dhicin dhismaha burqraadiyadda bii'ada siyaasadda, kolka aan dadka xukunka sare hayaa ahayn kuwa aayaha dadweynaha ka fikraya ma oggolaadaan wax isbeddel ah waana mixnaadaha dibudhaca ugu waaweyn midaasi.

Arrimaha Saldhigga u ah maamul-rogga waxaa ugu waaweyn:-

A) Dhibaatooyinka dabiiciga ah sida abaaraha oo dadku waxay cunnaan iyo wax u gargaarba ay waayaan.
B) Siyaasaddaha oo qarxa sida dagaallada, Kacaanada iwm.
C) Cadaadiska iyo isku kor noolaanta.

**Straatijiyada maamul-roogga waa xirribta lagaga qiyaas qaato saameynta isebeddelku dadka sammeeynayo iyo waxyaalaha ka iman kara.**

Straatiijiyada maamul-roggu laba ayey u qaybsantaa:

a) Isbeddel kooban (Comprehensive reform)
b) Isbeddel fidaya (Incremental reform)

isbeddelka koobani waa kan loogu tala galay in si degdeg ah wax loogu beddelo, waana mid saameeya laamaha maamulka oo dhan isku mar. Badanaa waxay t a h a y in dadweynuhu la qabsadaan tallaabada dadka yar oo indheer-garatada ah, kuwaas oo diyaar u ah horumarinta iyo beddelaada dalkooda. Sidaas la adligeed waxaa lagu isticmaali karaa isbeddel kooban meelaha ama dalalka waxyaala badan ka horumary oo qaadan kara isbeddel maamul oo degdeg ah. Dad tacliintoodu aad u hoosayso, dhaqankoodu dambeeyo dhaqaalahoodu ragaasay wacyigooda siyaasiga ahina uu gumeystuhu habaabiyey way ku culus tahay la qabsashada maamulka cusub ee dhaqan dhaqaaleed oo dadka yari garwaaqsanyihiin dheefihiisa.

Dalalka dib loo riday oo dhan waxa aad ugu foggaadey dhaqamo cambaar leh sida qabyaaladda iyo khuraafaadka, kuwaas oo gumeystayaashu dadka ku dhiirri gelin jireen si aan dadku wax intaa ka dheer u arkin. Marka ay dadku yihiin kuwa haysta dhaqammo laga tegey waxa, iyaguna, dambeeya wax qabadkooda, kolka dhaqaaluhu curyaamo waxa sii weynaada isku tiirsanaanta iyo qabyaalada, kolka taasi sii fidana waxay dhalisaa faqri iyo..... Siyaasad liidata oo gumeystayaasha ka amar qaadata. Ugu dambeysta arrintu waxay isugu soo biya shubataa in aaney dadkaasi weligood ka bixin garoommada wareegsan oo isticmarku ugu tala galay inay weligood ku meeraystaan (Vicious Circle). Garoommadaas gumeystuhu sammeeyay waxa lagaga bixi karaa oo keli ah maamul-rog isugu jira mid degdeg ah iyo mid tartiib ah; maamul-roggaas oo aan ka biya-qaadayn idioloojiyadda gummeeystayaasha.

Labada straatiijiyadood oo kala ah (I) Tan degdegga ah (II) Tan tartiib tartiibta ah midna goonni ahaan looguma isticmaali karo dal iyadoo aan la tixgelin arrimaha la xiriira tallaabooyinkooda. Waxaa had iyo jeer dalalka saddexaad isku dhex waddaan labada straatiijiyadood oo aan kor ku soo sheegnay, hase ahaate waxa meelaha qaarkood ku habboon mid qura sida meelaha ay jirto buruqraadiyada iyo siyaasiyiin sare oo xukun jecayl awgeed u hortaagan isbeddelka. Waxaan hubaa in dawladaha saddexaad ay si degdeg ah uga guulaysan doonaan isticmaarka kol hadiiba ay hadda ku dhaqmayaan straatiijiyaddaha maamul-rogga oo **isku dhafan, loona miidaan deyey.**

# QABIILNIMADA IYO AFRIKA

w.q. Cabdullahi X. Maxamed

Jirro qadiin ah. Ummadaha adduunka oo dhan waxay soo mareen, ilaa haatanna lakulmaan cudurro farabadan, culimo badan baa ku dadaalay kuna guulaystay inay soo saaraan daawooyin joojiyay jirrooyinkii dadka u boobijiray sidii cows dab galay. Nimankaas cilmiga lahaa kama aysan tegin cudur qur ah ee aysan daawo baabi' isa ama qaboojisa u tilmaamin. Hase yeeshee Afrika waxaa ka hirgalay cudur xun oo aan cidina si cilmi ah u xaliyin tan iyo haatan, inkastoo uu ka mid yahay sababaha waa-weeyn ee Afrika dib u riday, dad malaayiin gaarana uu oofsaday . Cudurkaasu waa Qabyaalad. Qab yaaladuna waxay Afrika dhex deeda ku leedahay sheeko dheer oo yaab badan sidaas darteed, ayaan qabyaaladda gaar ahaan uga sheekeeynayaa ahaan uga sheekeeynayaa, inkastoo dad badani aysan jeclayn soo bandhigidda arrintaas, iyagoo ku doodahaya in qabyaaladdu tahay ceeb qarinteeduna tahay waajib. Dad kaase waxaa la xusuusiyaa waxa xaqiiqada ah: Dhibaatada qarinteedu kama qayb qaadato xallinteeda, dhibaata kastana weligeed waxay noqotaa mid joogto ah, haddaan si caddan ah looga doodin, cee ba kasta oo ay leedahay. Sidaas awgeed, baan qabyaaladda Afrika erayo ka sheegi doonaa.

1 . Dhalashada Qabyaaladda.

Culimada bulshadu (sociologists) waxay rumaysanyihiin, in bulshada baniaadamiga oo dhan ay maraan shan marxaladood oo kala duwan, haddii laga eego xagga Abtirsiinsho qofku ku abtirsado bulshada uu ku dhex noolyahay, iyadoo isla markaas la oqoonsanyahay in dhaqanka qofku iyo dhaqdhaqaaqiisu badiba marxaladda abtirsiinshaha uu ku marayo.

Xaaska oo ka kooban labada waalidka ah iyo ubadkooda waxaa la xisaabay in uu yahay marxaladda ugu horraysa Abtirsiinshaha, maxaa wacay qofku wuxuu ku abtrsanayaa xaaskaas oo qur ah. Abtirsadka noocaas ahi wuxuu ka suurtoobaa meel kasta oo xaas qur ahi ku noolyahay, hadii la helo.

Marxaladda labaad waxaa lagu magacaabay marxaladii cashiirada (clan) taas oo ka kooban walaalihii xaaskii aan horay u soo sheegnay iyo caruurtoodii oo badatay, ama dheh haddaad doonto, cashiiradu waxay ka koobantaa Adeero, Abtiyo iyo caruutooda.

Marxaladdan iyadoo ah, waxaa qofku ku abtirsadaa Cashiiradiisa. Abtirsadkana waxaa ka dhasha, sida badan, qofka oo la wadaaga dadka uu ku abtirsanayo hiil iyo hoo, xummaaniyo samaamba.

Qabiilnimadu (tiriblism) waxay noqotay marxaladii sadexaad ee bulshadaha biniaadmigu marayeen xagga abtirsadka qofka. Qabiilkana, inkastoo dadkiisu ka soo farcamo cashiiradii aan horey u soo sheegnay, haddana wuxuu u kala baxaa halkii qabiilba qabaail farabadan. Maxaa wacay, ilma adeeradu kolkay isku diriraan dano iyaga dhexyaal, kaba dhig biyo, daaq, iyo dumar, kolkaas bay kala boodaan, kooxdii isxigtaabana naftooda ku magacaabaan qabiil gooni ah, iyagoo ku abtirsanayo Awoowe iyaga gaar u ah, kana dheeraanaya inay meel ula abtirsadaan ilma adeeradii ay dirireen dhiiguna ka dhexdhacay. Nimankaas madaxda u ah kooxaha ilma adeerka ah oo isdiriray, marar badan bay ku abtirsadaan awoowe aan jirin, si ay xididada ugu jaraan xiriirkii ay la lahaayeen ilma adeeradooda dhiigu dhex-maray. Taas waxaa markhaati ka ah dadka Soomaaliyeed qaar ka mid ah oo haddaad qabiilkooda wariso, kuu sheegaaya wax qosol iyo naxdinba leh, qaarkood wuxuu ku oran Awoowgayo waxaa la arkay isagoo geed-saaran; haddad suaala ay ka mid yihiin xaggee buu ka yimid awoowgiin intuusan geedka fuulin? yaase dhalay? Afkeebuuse ku hadlahayey? Jawaabtoodu

*waa ma ogi. Kuwa kalana waxay ku oran, awoowgayo wuxuu xeebta ka caaryay isagoo sanduuq ku jira haddaadse wariso, yaa sanduukha kusoo riday markii hore? mase lagu noolaan karaa sanduukh badda kor sabaynaya? waxay kuugu jawaabi, xummaan raadis baad tahay, maxaa yeelay, waxaa ka maqan kuwaas oo dhan runtii cilmiga ahayd, taas oo caddaynaysa in qabaa'ilka kala duwan ee ku nool hal-dal, dham maantood ay kasoo farcameen hal xaas oo qur-ah, ka dibna kolkii dadkii batay, danihiina lagu diriray, baa degmooyinka loo kala firiray, qabaa'il badanna loo qaybsamay.*

*Taasu waa dhalashdii qabiilnimo, hase yeeshee dhammaadkeedii ayaan la gaari karin, waayo filka qabaa'ilka Afrika qaarkood wuxuu gaaraa kun sano, taas micneheedu waxaa weeye in tirada dad ka qabaailka Afrika qaarkood dhowr malyan, kuwaas oo kasoo horjeeda qabaa'il kale ee aan iyaga ka tirayareeyn. Waxaanse dhuuxi karnaa dhibaatada Afrika haysata xagga qabyaaladda, markaan ogaanno in qofkasta oo Afrikaan ah lagu habay, laguna barbaariyay in uu nafta u huro danta qabiilkiisa.*

*Haddii aan dib ugu laabanno marxaladihii shanta ahaa ee aan kaga sheekeyneyney casharkan waxaan barashadii iyo waddadi hore* ***arkaynaa in qaranimadu (nation) tahay marxaladii afraad. Qofku wuxuu ku abtirsadaa, marxaladaan aan ku magacaawnay qarannimada, dawladiisa, yacnii haddaad tiraahdo yaad tahay, wuxuu kuugu jawaabi; Soomaali ama Soodaani ama Masri I.W.L.*** *Malxaladda qarannimadu waxay qabiilnimada kaga duwan tahay, haddiiba aan abtirsiinshaha ka tagno, qofka ku nool marxaladda qarannimada xilka nabadgelyada iyo noloshiisaba wuxuu saaran yahay dowladiisa, marxadda qabiilnimadase qofku wuxuu eegtaaba waa qabiilkiisa.*

*Halkaas waxaa caddaatay in qofku u baahanyahay, si uu ku gaaro marxaladda qarannimada, ilbaxnimo sare iyo aqoon ku dhisan qarannimo iyo Kacaannimo (ciuics).*

*Marxaladda shanaad ee iigu dambeeysa marxaladihii aan ka sheekeeynaynay, waxay tahay marxaladda lagu yiraahdo Afka Ingiriiska (internationalism), taas oo timaadda markii qofku ka kormaro xagga wax-garadka, heerka qabiilnimada iyo kan qarannimada, rumeeyana in bani-aadamiga oo dhan yihiin laamo geed qur ah, waajibkooduna yahay wax-wadaqabsi, iskaashi iyo is-nabadgelin, marxaladaan shanaadna waxaa gaaray horseedna u ah niman heer sare ka gaaray cilmiga loo yaqaan (falsafadda). Fikradooduna maan ta waxay cilmiga loo yaqaan (falsafadda). Fikradooduna maanta waxay leedahay yidiliilo weyn, maxaa yeelay gaadiidka iyo is-gaarsiinta ka dhaxaysa qaaradaha kala duwan, baa waxay gaadhay heer aad moodayso in duniduba tahay beled keli ah.*

***Haddaba haddii culimadu noo caddeysay in bulshadaha bani-aadanka maraan shantaas marxaladood ee aan soo*** *sheegnay, isla markaasna qabyaaladu wax jira ay tahay Afrika dhexdeeda, qofna uusan inkiri karayn dhibaatada ay tahay Afrika dhexdeeda, haddaba waxaa is-weeydiin leh, hadii xaalku saas yahay, ma oran karnaa dadweeynaha reer Afrika, wuxuu ku noolyahay malxaladdii qabiilnimada welina ma gaarin ma rxaladdii qarannimada? Maya iyo haa midkastoo aad kaga jawaabto su'aashaas, waxaad u helaysaa waxyaabo badan oo fikraddaha xoojinaya, iyo waxyaabo kasii badan oo beeninaaya fikraddada. Taasuna layaab ma leh, waayoo, waxaa ka buuxa nolosha Afrika waxyaabo badan oo aan wada socon karin meelna wada geli karin (contradictions). Kuwaas Waxaa ka mid ah halganna ka dhex taagan yahay cusaybkii, iyo duugii, ilbaxnimadii iyo khashiinnimadii, cilmigii iyo jahligii. Inkastoo aan u malaynayo in waxyaabahaas oo dhami isbarbarsocdaan ilaa nolosha Afrika bulshadeheedu xuub-siibtaan, kuna dhisanto ilbaxnimo aqoon kaashanaysa, inkastoon saas qabo, haddana waxaan rajaynayaa in aqriyuhu su'aashaas uga jawaabo si cilmi ku dhisan.*

*2. Ceebeheeda:*

*1. Ummado badan qabyaaladda Ceebeheeda waxaa ka mid ah, iyadoo* ***Ummad qur*** *ah u qaybisa Ummado fara badan oo leh dana kala duwan, taas oo ka dhigta qabiil walba sidii suus garaacaya lafaha Ummadda.*

*Waxaanse si howlyar u garan karnaa dhibaatada qaybyaaladdu ku hayso qaaradda*

*Afrika, markaan ogaanno in qabiilka dantiisu baahato, mararbadan, in la baabiyo qabiilka C, maxaa wacay, qabiilka A wuxuu u malaynayaa, aqoon-darro awgeed, in qabiilka C iyaga ka hortaagan yahay khayraadkii adduunyada. C laftiisu, illayn caqligiisu ma badnee, intaas waxuubuu cayn-goyn.*

*Taase waxay noo fasiraysaa dagaallada ka dhacaya had iyo jeer dadweeynaha ku nool dowladaha Afrika qaarkood.*

*2. Masuuliyad aan aqoon u baahnayn. Midaanuna waa dhibaatada ugu khatarsan ee qabyaaladu dhaliso, ujeedadeeduna waxaa weeye:*

*Qofkasta oo ka mid ah qabiilka xukunka haya wuxuu u qalmaa masuuliyadda kastoo, ha ahaato masuuuliyad ama tikniko amase maamul, iyadoo aan loo fiirin karti qofkaasu uu leeyahay, aqoontiisa xagga cilmigu iyo waayo aragnimadiisa midnaba.*

*Haddaba, waxaan fariraad amase faalo u baahnayn, dhibaatada uu qofkaasi ku dhigahayo wasaaraddii ama wakaaladdi uu la wareegay maamulkeeda. Kolnabase waxaan rajo laga qabin inuu ka hirgalo dal laga rumeeysanyahay qabiil mabda' loo yaqaan: Qof waliba meeshuu ku habboonyahay (right man for the right position), amase dheh haddad doonto, qabyaaladu waxay dumisaa fikradda aduunkoo dhan laga rumeeysanyahay, samdhigna u ah horumarka qofka iyo Ummadaba, taas oo ah: Dadku waxay yihiin, waxay ku yihiin shaqadooda; Fikradaas caalamiga ah qabyaaladu waxay ku bedeshay:*

*Dadku waxay yihiin, wixii ay ku yihiin qabiilkooda;.*

*3. Maxay ka nuugtaa ama ku nuugtaa. Taas waxaan uga gol leenahay, in qabyaaladdu abuurto dib u dhac joogta ah, waayo waxay ku dhex beertaa dadkii walaalaha ahaa nabcaan iyo codowtinimo qoto dheer. Cadawtinimadaasuna waxay dadka kasii jeedisaa shaqadii, waxbarashadii iyo waddadii horumarka. Qof walibana wuxuu ka fikiraa, haddii meel cadawtinimo ka hirgasho, sidii uu qabaa'ilka kale u khayaani lahaa iyo sidii uu isaga ilaalin lahaa dabinnada qabaa'ilka kale isaga u dhigayaan.*

*Kolkaas baa xadka qabaa'ilka isku cadaadinaya dal qur ah dhexdiisa, uu noqdaa, sidii rag isku diriray maal, hase yeeshee maalkii lagala dhexbaxay intay fooda iskula jireen, haddaba kii dhintay muxuu u dhintay!! kii adkaadayse muxuu helay !! waxba.*

*Intaas waa wax yar oo ka mid ah dhibaatooyinka faraha badan qabyaaladu ku hayso Afrikada madow waqtiga aan haatan joogno.*

*Taariikhdii hore dhaawac ay qabyaaladdu Afrika u gaysatay, beelihii ay baabisay iyo Ummadihii ay boqonta gooysay, intaas oo dhan waxaan rajaynayaa in akhriyuhu malayn karo, haddii usan waqti u helin buugtii ka sheekeeysay, haatanna bal aannu isla eegno waxyaabaha dhaliya qabyaaladda.*

*3. Sababaheeda:*

*Runto waxay tahay, in ragga aqoonta leh ee reer Afrika isku dayeen inay ogaadaan meesha laga waraabinayo xididdada qabyaaladda, xididdaas oo la rabay inay maanta qallalaan, waayo reer Afrika waxay qaadeen tallabooyin dhaadheer, xagga ilbaxnimada iyo aqoontaba. Waxaa la malaynayaa in Afrika gaadhay heer ka sareeyay soohdinta qabiilnimmada ee cidhiidhiga ah, una gudubtay marxaladdii qarannimada, maxaa yeelay, dhammantood waxyar mooye, waxaa ka babanaya calamadii gobannimada.*

*Raggii sababaha qabyaaladda dhaliya baaray, kuma ay heshiin mid walbana wuxuu yiri, sababta aan sheegay baa waraabinaysa geedka qabiilnimada. Sidaas awgeed, waxaan hoosku soo tebinaya kuwii ugu muhim sanaa fikradihii badnaa ee ragaasu ka tageen.*

*E — Madaxda Afrika. koox ka mid ah ragga waxbarashada sare helay ee reer Afrika, baa waxay rumay santahay, in madaxa xukumadaha Afrika, heer kastaba darajadoodu ha ahaatee, ay geesinimo geliyaan qabyaaladda, si ay ugu waaraan kursiga xukunka. Waayo raggas masuuliintaaha ma haystaan hub kale oo kala hortaagan dhibaatooyinka nolosha qabyaaladda mooyaane. Taasuna waa hdab waxaan marna lagu murmin in siyaasiyiinta Afrikaanka ahi tixgeliyaan qabyaaladda, waxaase mugdi ku jiraa, muranna ka taaganyahay, su'aasha ah: Madaxda dawladaha Afrika ma iyagaa dadka ku dhiirinaya, kuna beeraya, mise dadweynaha ay xukummaan baa iyaga ku dhalinaya oo sanka ka gelinhayo?*

*B — Dhaqaalaha: Qayb ka*

*mid ah raggi isku taxallujiyay sababaha qabyaaladda dhaliya, waxaa u muuqatay in dhibaatada qabyaaladdu ku xirantahay dhaqaalaha. Raggaasu waxay fikradoodaas ku xoojiyeen xaqiiqda ah in qofku uu qabiilkiisa qayla gaysto, sida badan kolkay la soo gudboonaanto dhibaato maal u baahnaan, sida jirrada, dhimashada iyo guurka. Waxay intaas ku dareen, in qabiilku la mid yahay Caymis, ama loo yaqaan afka qalaal (social insurance).*

*Nimanka ra' yigaas qabaa ugu dambaystii waxay go'aan ku gaareen, in qabyaaladdu dhammaan doonto kolkii reer Afrika ka baxaan baahida gaaraanna horumar dhaqaale. Fikradaasu waa mid suuragal ah, caqligana uusan diidayn, hase yeeshee, waxay qabiilnnimada uga bishaareenaysa cumri dheeri waayo waxay halkii alifka xigayaha, in horumar dhaqaale laga dhaliyo dhul rummaysan qabyaaladda lana diriraysa mab' da. Qof waliba meeshuu ku habboonyahay, saan horay ku soo sheegnay.*

*C — Jaahilnimo Kooxdan saddexaad waxay ku dhawaaqeen in aqoon la'aantu saldhig u tahay qabyaaladda, waayo, habka qabiilnimadu u dhisantahay iyo xiriirkeeda aadaninimada midna ma waafaqsana caqliga, cilmiga iyo qawaaniinta dabeecadda u degsan?*

*Waxay kaloo ku doodeen in qabyaaladdu tahay xiriir bini-aadanimo kii ugu foolxumaa baaristii la baaray taariikhdii dheerayd ee bulshadaha bani-aadamiga soo mareen tan iyo waagii bulsho aadmi ahi abuurantay, baaristaasu waxay caddeysay si aan muran ku jirin in jaahilnimadu tahay saldhigii dhalashada iyo nolosha qabyaaladda. Kooxdaasu iyagoo sii faahfaahinaya fikradooda, waxay aqoonsadeen in qabyaaladdu tahay caado bulshadeed oo la kala dhaxlo; raadweyna uga tagta qofka. Hase yeeshee, waxay yiraahdeen cilmiga awooda u helay in uu beddelo dabeecadda, maskaxda bani-aadamka iyo muuqaalkiisaba, cilmiga awoodaas leh, waxaa hubaal ah inuu xididdada u siibi karo karo caadada qabiilnimmada ee qurmuun.*

*Haddaba ka kacaay jaallayaal, bay yiraahdeen, aannu dadweynaha ka saarnee dhoo qada jaahilnimada , dhexna keeno iftiinka aqoonta.*

*Inkastoo runtii ra'yigaasu iigala dhowyahay aaraadii kale oo dhan, haddana laftiisu waxaa ka hor timi su'aal dhib leh ahna: haddii cilmigu ku filanyahay ciribtirka qabiilka, waxaan aragnaa raggii reer Afrika ee kasoo baxay jaamicadaha reer Yurub kuwii ugu sareeyey.*

*Raggaas maxay qabiilka u hirgelinayaan una rumeeysanyihiin? Jawaabtu waxay tahay, waa mare, aqoonta runta ah may dhadhansan macneheeduna umaa dhaadhicin, waayo qofkii cilmiga duluc-diisa dhuuxay, marna kama suurtoowdo inuu khuraafaad aan cilmi ku dhisnayn rumeeyo. Waa mar labaade, raggasu waxay ku dhex qarinhayaan boorka qabyaalada ay kicinayaan dhiigmiirad iyo dan gaar-ahaaneed, ee waxaaba dhici karta inaysan rumeeysnayn qabyaaladda, siday noo sheegeen wax badan, iyagoo run sheegaya, rag cilmi leh ee shirin jiray qabiilka Soomaaliya waagii doorashadii beenta ahayd ka dhici jirtay dalkeenna ka hor toowraddeenna barakeeysan.*

*Hadal iyo dhammaantee, inkastoo lagu murmay waxyaabaha waraabiya qabyaaladda geedkeeda, haddana waxaa laysku raacsanyahay in qabyaaladdu tahay Kansar (Kaankoro) kagana ballartay dadweynaha Afrikada madoow wadnaha bartamihiisa. Haddaba si loo ciribtiro cudurkaas isaga ah waxaa loo baahanyahay in qaarradda Afrikada madoow oo dhami ku qaado ololayaal aan naxariis lahayn oo isdaba joog ah, iyadoo ay qaaradda Afrika ka faa'iidaysanayso ololihii uu ku qaaday qabiilka, mahadi ha gaadhee, Macallinka Ummadda Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre, kaas oo dhaawacii uu ku dhuftay Qabyaaladda mid taariikhda Soomaaliya wax badan ka sheekeyn doonto.*

# DHIBAATOOYINKA DUNIDA KA HAYSTA XAGGA CUNTADA

W. Q. Cabdullaahi S. Warsame

Laga bilaabo kowdii Abriil 1976ka waxaa dhaqan galay heshiiskii loome ee ku saabsanaa wax-wada-qabsi ballaaran ee dhex maray Suuqa Yurub iyo 46 dal oo ka tirsan Afrika, dagmada kariibiya iyo badweynta daggan. Heshiiskaasi wuxuu ambaqaad u sii yahay kii 1963kii Suuqa Yururb iyo 18 waddan oo Afrikaan ah iyo Malgaashi ay ku saxiixdeen yawndi, oo 1969kii la cusboonaysiiyey iyaddoo jasiiradda mawrishuus ay ku soo biirtay. Ka dibna Suuqa Yurub wuxuu isla sannadkaa heshiis xiriir ganacsi ah la gaaray seddexda waddan ee Afrikada Bari kiinya, Ugaanda iyo Tansaaniya.

Ujeedooyinkii uu ku fadhiyay heshiiskii Suuqa Yurub iyo 18kii dal ka dhexeeyay waxay ahaayeen.

(b) Iskaashi ganacsi in la sameeyo iyadoo la abuurayo bed wax kala qaadasho xor ah ku dhisan ee ka dhaxaysa suuqa Yurub iyo dalkii la bahoobay.

(T) Iskaashi ah xagga farsamada iyo maaliyadda (J) iskaashi hay' adeed oo ay fuliyaan xubinaha u qaybsan maamulka iyo ilaalinta sida golaha wasaaradda Shirka baarlamaaniga ee Sannadkiiba mar laqabto iyo gudiga labada dhinacba ka dhaxeeya.

Isbahaysigaasi xagga habka marka laga eego waxaa weeye mid u xilsaaran shaqo fulin, wuxuuna runtii si dhab ah u matalayaa xiriir ku dhisan gorgortan ee dhexmaray koox hantigoosad ah oo aad u kobacday iyo koox ka kooban dalal soo kacaya.

Taana waxaa weeye siyaasad la xiriirta socodka dabargoynta gumaysiga inkastoo Suuqa Yurub iyo dalalka la bahoobay aad mooddo inay ka siman yihiin xagga aragtida, haddana xiriirkoodu waa kala duwan yahay.

Tobankii sano ee tagtay (1963-73) isbadalkii weynaa ee ka dhacay Afrika iyo S. Yurub gudihiisa gaar ahaan u badnaa xaaladda aduunka ka taagnayd wuxuu tilmaamay in heshiiskii Yowndhi wixii ku qorraa dib loo faaqido oo laga soo saaro arrimo cusub danna u ah horumarinta dhaqaalaha iyo ganacsiga labada kooxood.

Halgankii dadyowgii Bortaqiisku gumaysan hayay iyo kuwa koonfur Afrika, Naamiibiya iyo Roodiisiya ay ku jireen, taa oo keentay dadkii faraha badnaa oo garaadkoodu kordho imbiryaaliyaddana la dirira ayaa qasab ka dhigay in Suuqa Yurub iyo dalalkii la bahoobay ay iskaashi hor leh dhigtaan iyadoo la ballaarinayo heshiis kii hore. Kooxda ka socota S. Yurub waxay ugu baaqday kooxda kale hab horumar ganacsi ah ee u shaqaynaaya fidinta Hantigoosad ballaaran. Midaynta kooxda Afrikaanka ahi ma noqan mid ay caawinto laanta Horumarinta Yurub ee ka tirsan nidaamka sayladda Yurub waayo waxay dal walba ula macaamilootay si dowga ka baxsan oo aan ogolaan karin in dalalka Afrikaanka ahi dhamaantood cod qura ku hadlaan.

Taana waxaa sabab u ah heshiiska labada gees ka dhexeeya oo meesha ka saaray in ay jirto qolo hantigoosad ah oo horay u martay iyo qolo markaa ka baxday kadeed iyo gumaysi isla markaana kala wata siyaasad dhaqaale iyo mad-habado kala gaar ah,

qolo sanaacadda ku shaqaysata iyo qolo beeraley ah. Iyadoo haatan lagu jiro wakhti aad loogu doodayo xiriirka ka dhexeeya dalalka horay u maray iyo kuwa soo barbaaraya iyo iyadoo marmar laysku

dhacay shirka waqooyi koonfur ee 3dii May 1976 lagu qabtay Nayroobi, iyo aqbalidda muddo gaaban ee ku siman 13 bilood ay ku aqbaleen heshiiska loome dawladaha ka tirsan Suuqa Yurub iyo 46 dal ee kale ayaa waxaad mooddaa in la haleelay tallaabo waafi ah ee loogu tiir mudayo xiriir cusub ee dhexmara dunida sanaacadda ku tagtay iyo tan soo kacaysa, dheeraanta waqtiga la siiyey heshiiska loome inuu dhaqan galo iyo qaabka uu uga hadlayo in caalamka loo dhigo hannaan dhaqaaleed oo intii hore ka caddaalad roon oo ka dhe xabuurma dunida sanaacadda leh oo ay ka mid yihiin 9ka wadan ee ku jira Suuqa Yurub iyo dunida ka hoos baxday gumaysiga oo laga soo qaadan karo 46 dal ee heshiiska galay ayaa tusaalaynaya inuu jiro xiriir kala sarreeya.

Wareerka joogtada ah ee haysta ganacsiga adduunka iyadoo la xusayo ascaarta alaabta ceeriin oo marba meel joogta ayaa ku kallifay wadamada Afrika, kaariibiya, iyo badweynta deggan in ay la xaajoodaan sayladda Yurub, wada hadalkaa oo socday 18 bilood heshiiska cusub ee loome wuxuu ku baaqayaa arrimo cusub oo u danaynaya horukaca dhaqaalaha ee qolooyinka ku biiray sida iskaashiga ganacsiga, iskaashiga Farsamada iyo maaliyadda iyo iskaashiga sanacadda oo ah qayb cusub.

Dhammaan waxaa la wada ogyahay in isrogrogga ascaarta alaabta ceeriin ee ay dhoofiyaan dalalka dunidaa saddexaad uu ka mid yahya mashaakilka ugu dardaran ee u baahan in la daweeyo. Sida uu qorayo heshiiska Loome, markii dakhiga ka imaanaya shay ama waxyaabo badan ee dal debadda u diro uu ka hoos maro celceliskii soo galay labadii sano ee dembe, sayladda dhaqaalaha Yurub, iyadoo awaamiir siinaysa Laanta Horumarinta Yurub ayey buuxinaysaa faraqa lacagta maqan hase yeeshee dalkii 46ka tirsanaa ee taa loo galo lacag taa wuxuu u soo celinayaa Laanta Horumarinta Yurub waxay meel u dhigaysaa 46ka dal ee S.Yurub la macaamiltama lacag dhan afar milyardi oo doollar oo lagu bixinayo mashaariicda horumarinta ee kala ujeeddo duwan. Runtiina lacagta intaa la'eg way ka hoosaysaa maaliyadda wadamadaasi ay u baahan yihiin. Iskaashiga xagga lacagta waxaa ka imanaya laba amuurood oo qiimo badan ku fadhiya.

Marka hore waxaa la isku waafaqay maamulidda maaliyadda taa oo ayidaysa sida labada geesba ay ugu siman yihiin tallaabooyinka haboon in la qaato iyadoo lagu gooynayo gole kasta ee loo wada joogo ee qaraar gaari kara tan labaad waxaa laysla ogolaaday in taageeradii la dhiibayo, iyadoo lagu shaqaynayo, si dooroon lagu horraysiiyo wadammada saboolka ah: Waa wadamada sida ay soo baartay jamciyadda Q. ka dhaxaysa dakhliga qofka soo gala sannadba uu ka sareeyo boqol doolar, dakhliga wadaniga ah ee ay kaga qaybgalaan warshadayntana uunanka badnayn 20% heerka aqoon darrada dadkooduna ka hoosaynin 8%

Heshiiska loome waxaa ka soo kordhay arrin waafi ah waxaana weeye tan ku taxaluqda horumarinta Wershadaha. Kii yawndi ku dhexmaray sayladda dhaqaalahaYurub iyo 18 dal oo Afrikaan ah, Warshadayntu ma noqon mid lagu tiigaalo maxaa yeelay maalgalinta gaarka ah iyo tii Suuqa Yurub waxay ku sii socdeen qaynuunka macaash urursiga Intii lagu jiray doodihii arartanka ahaa heshiiska Loome dalalka Afrikaanka, karibiyaanka, iyo badwenta deggan waxay in badan caqabaan in warshadaynta lagu soo rrabka ku dhufteen baahida ay u dabbaalo horumarinta dhaqaalahooda.

Waxay taa awgeed ka dalbeen sayladda dhaqaalaha Yurub in ay gacanta u soo geliso teknolojiyadda ay ku adeegtaan. Dhawaan waxaa laga furidoonaa Magaalada Buruselis Xarun qaabilsan kobcinta Warshaddaha oo hawsheeda weyn ay tahay faafinta warar waxtar leh ee ku saabsan duruufta iyo siyaabaha uu ku imanayo iskaashi sanaacadeed ee faa'iido u ah sayladda dhaqaalaha Yurub iyo 46ka dal ee la bahoobay.

# TUSMO


Faallo . . . . . 1-2

Wareysi wargeys Faransiis ahi la yeeshay Jaalle Siyaad . . . . . 3-4

Heshiiskii Loome . . . . . 5-6

Beeraha . . . . . 7-8

Jaalle Breshenev oo la Gudoonsiiyey Biladdii Marshaalnimada Nabadda Adduunka 9

Khudbadii Madaxweynaha G.S.K. oo u jeediyay Shaqaalaha Soomaaliyeed 1da Maajo . . . . . 11-18

Khudbaddii uu Jaalle Siyaad u jeediyay Dhallinyaradda Soomaaliyeed 15ka Maajo . . . . . 19-25

Guddiga Khaaske ee UMA ee arrinta Xeebta Soomaaliyeed . . . . . 26-27

Jaalle Kulmiye oo ka hadlay xaflad lagu xusayey 15ka Maajo . . . . . 28-29

Go'aanadii Shirweynihii labaad ee shaqaalaha Soomaaliyeed . . . . . 30-39

Jaalle Siyaad haddii laysku dayo in xumaato loo geysto dadka xeebta Soomaaliyeed JDS faraha ka laaban meyso . . . . . 40-41

Shirkii Dalalka Islaamka . . . . . 42-43

Miisaanka Maansada . . . . . 44-46

Doorka maamul roggu ka qaato horumarka dalalka Sedexaad . . . . . 47-48

Qabiillnimada iyo Afrika . . . . . 49-52

Dhibaatooyinka dunida ka haysta xaggacuntada . . . . . 53-54

Tusmo . . . . . 55-56




WAAGA CUSUB (New Era) qiimaha Sh. So. 1 middiiba

Waa Wargeys bil walba soo baxa waxaana soo saara W.W. iyo Hanuuninta Ummadda ee J.D.S
Maamulka iyo Xafiisyada — Tel 3057 S.B. 1178 — MUQDISHO
**Dibedda waxaan ugu tala galnay afafka Ingiriisiga,iyoCarbiga.**

WAXAA LAGU
DAABACAY
MADBACADDA
QARANKA

# QAAYAHA WARSHADEYNTA



# DABEYSHA GOBANNIMADA IYO X. SOOMAALIYEED

